attaquer, v.	Weeraarid.
attardé, adj.	Habsamid; Saacad dib uga dhicid.

atteindre, v.	Dhammayn; lib ku dhammayn; Gaadhid; Guuleysi; Taabasho; la taabto.
atteinte, n.f.	dhibka; qof dhibaato loo gaysto (af iyo adin midba)
attelage, n.m.	lagu xidho gaadhiga ama kareetada faras ama dameer
attendre, v.	La sugo; u keydsan; Sugid; la sugo; aad sugtid inta..
en attendant	Ilaa inta la gaadhayo; go'aan sugid ama dejid sugid.
attendre un enfant	La filo; Filid; Rajayn.
attendrir, v.	Dhalaalay (Dhalaalid).
se laisser attendrir	Cadha bur-bur.
attente, n.f.	Filitaan; Rajayn.
attentif, adj.	U feejignaan; ilaalin; xannaanayn; daryeelid. feejigan; u qalbi furan.
attention, n.f.	Digtooni; si fiican u dhugasho;
faire attention	Caqli; Xasuuso; Maskax; qalbiga ku hay; Tix-gelin.
attentivement, adv.	feejignaan.
lire attentivement	si feejig oo akhrin.
attérir, v.	caga dhigasho; degid·
attestation, n.f.	cadayn; qoraal markhaati ah
attirant, adj.	Isjiidasho; la jeclaysanayo, ku soo jiidanayo
attirer, v.	Soo jiidasho (sida birlabta oo kale).
attitude, n.f.	Joogga qofka; Meesha jidhka; xaalka jidhka ama qalbiga.
attraction, n.f.	jiidasho.
attraper, v.	Qabo; la qabto; Gacanta lagu dhigo.
attribuer, v.	Qaybin;
attribuer un faux nom à quelqu'un	Ugu yeeridhid magac khalad ah.
attribut, n.m.	astaan; calaamad
aube, n.f.	Waaberi.
auberge, n.f.	Dhismaha (jiif iyo cuntaba) lagana kireeyo dad wuxuun wadaaga; sida shaqaalaha; ardayda iwm.
auberge de jeunesse	Hoyga (hudheelka) ardada.ama dhalin yarada
aubergiste, n.m.	Qof loo marti yahay; Qofka wax marti qaada
aucun, adj.	Midna maaha; madkoodna ma..; Eray diidmo ah; Midnaba; Midna maaha; Wax kasta.

au-delà, adv.	Wixii ka shisheya; ka xageya; ka foog.
au-dessous, adv.	Wixii ka hooseya; hoos yala.
au-dessus, adv.	Ka koreya; korayla; ka sareeya.
audience, n.f.	Codsasho aragti (qof weyn ama xil cadaa--ladeed haya)
auditeur, n.m.	dhageyste
auditif, adj.	Dareenka maqalka.
auditoire, n.m.	Dhageystayaal.
auge, n.f.	Jiingadda xoolaha lagu waraa biyo ama cuntada.
augmentation, n.f.	Kordhin; Ku biirin.
augmenter, v.	Kordhid; ku biirin; korodh.
aujourd'hui, n.m.	Maanta; Maalinta la joogo.
aumône, n.f.	Sadaqo; wixii hor ilaah loo bixisto.
auprès, adv.	u dhaw; ag tiisa ah;
auricule, n.m.	Degta wadnaha (godka sare ee wadnaha)
aurore, n.f.	Waabberi; Kolka waagu dillaco, arooyo; oog
aussi, adv.	Weliba; aadana; sidaas oo kale; kol kale; misana.
austère, adj. ≙ vie difficile	Xoog leh; si adag; xaal adag; qallafsan; dacas; diihaal· nolol ama hawl adag.
autant, adv.	badan; iskumid.
auteur, n.m.	Qoraa.
authentique, adj.	dhab; iskumid
auto, pref.	iswada.
automatique, adj.	iswada; iskii isku wada ama isdhaqaajiyay.
automobile, n.f.	Baabuur.
automne, n.m.	Dayr; xiliga dayrta.
autonomie, n.f. autonomie interne autonomie gestionnaire	madax banaanid. madax banaanid hoose madax banaanid maamul (warshadeed)
autorisation, n.f.	Ogoolaanshiyo.

autoriser, v.	Ogoolaansho; u ogoolaansho.
autoritaire, adj.	Kaligi tashade; awood ku kaliyeeyste.
régime autoritaire	dawled kaligeed tashato ah.
autoritarisme, n.m.	hab maamul ka kuliyeeysi.
autorité, n.f.	awood.
abus d'autorité	ku talax tag ama ku xad dhaaf awoodeed
autoroute,n.f.	jid (ama waddo) weyn oo laami ah oo baabuurtu maarto.
autosatisfaction, n.f.	is raali gelin.
auto-stop, n.m.	wa qofka marka uu jid-ka ama waddaada baabuurtu maarto intuu istaago uu warsaado in baabuurtu sii dhaweyso.
auto-stoppeur, n.m.	Qofka coodsada baabuurta in ay sii dhaweyso.
autour, adv.	agagaar.
autre, adj.	wax kale
l'un l'autre	midba midka kale.
autrefois, adv.	wakhti hore ama xili hore.
autrement, adv.	si kale ama hab kale.
autrui, n.m.	kuwa kale.
auvent, n.m.	Bangaalo; hoosasiin (qorax iyo rooba).
auxiliaire, adj.	gargaare baare ee dugsiyada (hoose, dhixi, sare)
avachi, adj.	qaloocin.
ê fatigué	daalid
avachir, v.	qalqaloocin.
aval, n.m.	Biyo dhac
avalanche, n.f.	aguug baraaf ama dhagax (maarki buuraha baraafku ay dilaamaan waxay dhibaato u geystaan dadka agagaarkooda dagan).
avaler, v.	liqid; dhunjin
avance, n.f.	horumarin
avance de capitaux	horay u marin
payer d'avance	horay u sii siin
faires des avances à qn	shukansi naageed ama ninka
progrès	horumar; horukac; horay u kac
être en avance	soo hormarid

avancement, n.m.	Horusocod;
donner de l'avancement à quelqu'un.	dallacsiin; horudallicin; dallacaad.
avancer, v.	Horumarin.
faire avancer	hor u socod siin.
avancer de l'argent	Horumarin lacageed.
avancer la date d'une réunion	horudhigid (shir ama fadhi)
avancer avec difficulté	Korid; fanansho (si dhibaato leh).
avant, n. et adv.	ka hor.
avant (football)	Horjoogeyalka; Weerarayalka (Kubada cagta)
en avant:	ugu horayn. (qof)
en avant!	hore u soco (weerar)
aller en avant	horudhigid
marcher en avant	horu socod
avant-garde	horssed.
avant-midi	duhur ka hor
avant-hier	doraad.
avant-propos	hordhac
avant-décès	geri ka hor
d'avant-guerre	dagalka ka hor
avantage, n.m.	Faa'iido; waxyaabaha ay wax ku wanaagsan yihiin.
≙ profit, bénéfice	Faa'iido; Waxtar
avantageux, adj.	waxtar leh.
avare, n et adj.	Gacan addayg; bakhayl.
avenir, n.m.	Mustaqbal; waqtiga imaan doona; soo socoda; timaaddo.
aventure, n.f.	Biimo; Meel cabsi ah gelin
partir à l'aventure	is biimayn
errer à l'aventure	Meel absi ah gelideed.
aversion, n.f.	Liidis (Qof); Neebcaasho xoog ah; baabi in;
avertir, v.	Ogeysiin; u digid;
≙ conseiller	la talin; ka waanin.
aveugle, adj et n.	Indoo leh.
aveugler, v.	Inda tiriid.
aviateur, n.m.	Biloot; Cir-mareen;
de l'armée de l'air	ciidamada Cirka.
aviation, n.f.	
commerciale	Dayuurada ah baayac mushteriga ama ganacsiga
militaire (de l'armée de l'air)	Dayuurada ah ciidamada cirka

avide, adj.	Hunguri weynaan; waa hunguri weyn yahay.
avilir, v.	qiimo ridid; Qiimo dhicid.
avion, n.m.	Dayuurad
avion de guerre	dayuuradaha dagaalka.
aviron, n.m.	saayib.
avis, n.m.	Talo; sidey ilaa tahay; Talo ahaan; Ra'yi.
avisé, adj.	digtoonaan.
aviser, v. (≙ prévenir)	Ogeysin
avocat, n.m.	
≙ conseiller juridique	gar yaqan.
avocat de la défense	qareen.
avoine, n.f.	Miro adag oo ka baxa dhulka cimilada qabow oo cunto ah.
avoir, v. aux.	la haan; qabid.
avoir conscience de	garasho la haan ama wacyi la haan.
avoir faim (ou soif)	gaajo (ama oon) qabid
avoir un grade supérieur	kadarajo sareeya.
avoir les moyens de	awood lahaan daqalo.
il y a (il existe)	waxa jira
il y a (notion de temps)	wakhti tagay; wakhti ka hor.
avorté, adj.	Dhicisoo
≙ échec	Guul-darro ah.
avortement, n.m.	Dhicis.
avorter, v.	Ilmo iska soorid.
avouer, v.	aqoonsi; aqoonsasho; qirasho ; ogoolaanshiyo.
avril, n.m	Abriil.
axe, n.m	Xariiq; Xariiqin; dhidib
axiome, n.m (mathématique)	odhaah ama hadal laysku raacay muran la'aan.
azalée, n.f.	Noocyo u baxa ka mid ah.
azote, n.m.	Asot; Neef (curiye) aan lahayn midab dhadhan ama ur midnaba oo ah 4/5 hawada dhulka.
azur , n.m.	Midab calan khafiifa sida cirka oo kale.

B

babillement, n.m.	hadaaq.
babiller, v.	U hadlid si carruurnimo ah.
babine, n.f.	debin; bushin.
babouin, n.m.	Daayeer weyn oo wejiga eyga oo kale leh.
baccara, n.m.	Khamaarka turubka lagu ciyaaro.
bâche, n.f.	shiraac; daah.
bachelier, n.m.	dugsiga sare ka baxay
badine, n.f.	ul dhuuban oo jilicsan
badminton, n.m.	Ciyaarta; Teeniska dheer; Laliska dheer.
bâfrer, v.	Cunto boobid; si hunguri weyni ah wax u cunid.
bagage, n.m.	alaabta (shandadaha; seexaaradaha; sanduuq--yada iwm.) Cafash; alaab.
bagarre, n.f.	Qalalaaso.
bagou, n.m.	aftahan.
bague, n.f.	Far-gal (Kaatun).
baigner, v.	Maydhid; dhaqis; Mayrasho (dabaalasho).
bailler, v.	Af kale waaxid (sida hamaasiga oo kale). Hamaansi; afkala qaad.
bain, n.m.	Qubaysi; Maydhashada jirka; Qubeys (suuli)
prendre un bain	Biyo ku shubid; dabaalasho; qoyn
baïonette, n.f.	Soodh; Maddiisha bunduqa afkiisa la gesho.
baisser, v.	Hoos u cadaadin; Hoos u dhigid; ka hoose;
se baisser (comme pour la prière des musulmans)	Rukuucid
baisser la voix	codka hoos loo dhigo
bajoue, n.f.	Haraga Jidhka Daanka.
balade, n.f.	Tamashlayn.

balader, se v.	Temeshlayn; Socod laafyood ah.
balafre, n.f.	dhaawac ama jeexdin wajiga ku taal; dhaawac raad ku reeba wajiga Xagtin; Xångurufo.
balai, n.m.	Xaaqdin; Mafiiq.
balalaîka, n.f.	balalayka.
balance, n.f.	Miisaan; Miisaamid; isku dheellitir.
balancer, v. se balancer,	Leexaysad; la leexaysto;Laalaadin. Lulid; Ruxruxid.
balançoire, n.f.	Leexo; loox dheer oo laba qof midba dacal kaga fariisto oo laysku ruxo.
balayer, v.	Xaaqid; dhul xaadhid.
balbutier, v.	Haghago (marka la hadlayo oo hadalka la qabqabto).
balcon, n.m.	Balkooni (rako).
baleine, n.f.	Nimmiri; Nibiriga badda ku nool.
balivernes, n.f.pl.	Hadal ama qoraal maalayacni ah.
balle, n.f. balle de fusil.	Kubbad; Banooni; Rasaas; Xabadda wax disha.
balle, n.f. (colis)	xidhmo alaabah oo laysku xiray ama duubay si loo qaabo.
ballon, n.m.	Caag laga buuxsho naqas neef.
ballot, n.m.	boorso ama qandi ka samaysan maro
balloter, v.	Xaaqid; dhul xaadhid.
ban, n.m.	gubolada boqor maamusho;
banane, n.f.	Muus (khudrad).
banc, n.m	Miiska shaqo Xirfadeedka lagu dul qabto.
bandage, n.m.	Baandeys; Maro qaro adag oo meesha jirran lagu duubo; Faashad (maraq).
bande, n.f. bande de gens ≙ troupeau	Koox; Urur samaysan; Duub. shirikad ama urur haween ah; Raxanshimbiro ah. xayn; koox ciidan ah.
bander, v.	lagu duubo faashad
bandit, n.m.	Budhcad dadka xoog wax ku dhaca; qof ka mid ah dad budh-cad ah.
banlieue, n.f.	Hareeraha ama agagaarka magaalada.

banni, adj.	Masaafurin.
bannière, n.f.	Heer.
bannir, v.	Masaafurin; Dal dibadda looga saaro;
bannissable, adj.	la eryi karo
banque, n.f.	Baan; Bangi (meesha ama xafiisyada lacagta).
banqueroute, n.f.	Qaan; Fakhriyid; Kicid.
banquet, n.m.	Casuumad; qado-sharaf ama cashosharaf.
banquette, n.f.	fadhi; fadhiisin.
baquet, n.m.	baaldi; sibraar iwm.
baraque, n.f.	Balbalo.
baratte, n.f.	Haanta ama dhiisha weyn ee caanaha lagu lulo si subag looga saaro.
barbare, n.m.	Ilbax la'aan; badow; badow ah; debad galeen ah; waxshi ah; axmaq ah.
barbe, n.f.	Gadh; timaha ka soo baxa gadhka.
barbier, n.m.	Timo-xiire; Jeega xiire.
barême, n.m.	Qiyaas ka qaadasho.
baromètre, n.m.	Qalab lagu qiyaaso cadaadiska hawada.
baroque, adj.	si heer sare ah loo qurxiyo
barque, n.f.	huuri.
barrage, n.m.	Biyo-xireen; biyo-xidheen.
barre, n.f.	qori lagu xidho dariishadaha korkooda si ilxidhka loo gu qodbo.
barrière, n.f.	aan laga gudbi karin.
barrique, n.f.	Foosto.
bas, n. et adv.	Gunta ama xagga ugu hoosaysa; hoosaysa; hoose; aan meel dheer gaari karin;
en bas	ka hooseeye; hoos; xagga hoose.
à bas prix	rakhiis ah.
bascule, n.f.	Leexo; Loox dheer oo laba qof midba dacal kaga fariisto oo laysku ruxo
basculer, v.	Lee xaysi; laalaadin.

base, n.f.	saldhig; asaas; sal; amboqad; gundhig; dhinac (joometariyada); isugaynta unugyada xisbiga
baser, v.	ku dhisan; ku salaysan; ka shiidaal qaadanaysa
basique, adj.	qaacidi (kimiko)
basket-ball, n.m.	Kubbadda koleyga.
bassin, n.m.	saxan bir ama dhoobo ah oo wax lagu shubto; jidhaan (biyo fariistaan); Dhijaan.
bassin (anatomie)	Laf-miskeedka; lafta misigta.
bât, n.m.	saalada; dhiriqda; dhabcanta; xaarka xoolaha
bataille, n.f.	Dagaal ka dhex dhaca laba dal ama laba ciidan; Dagaalan; Dirir; Harda maad; Dagaal.
bataillon, n.m.	Guuto (ciidanah).
bâtard, adj.	Garac; qof meher la'aan ku dhashay. Farakh; wecel; aan sharcigu bannayn.
bateau, n.m.	Dooni; Markab.
bateau à voiles	Dooni (shiraa leh).
bateau à moteur	Markab.
batiment, n.m.	Muuqaal Dhis (sar).
bâtir, v.	Dhis; dhisid.
bâton, n.m	ul
bâton de policier	Usha ninka booliska ah qaato,Budn gaaban sida kan askarta oo kale.
battant, n.m.	qayb furdad; dariisha; moobil iwm; carabka koorta geela
battement, n.m.	Garaacid, Tumid.
battement de pied (danse)	Tumidda cagta ; rablayn.
battement de coeur	Garaaca wadnaha; boodbood ka wadnaha.
battement des paupières	sanqasho, il-jibin.
battement des castagnettes	Shaambalid.
batterie, n.f.	Beytari; Qalab koranto laga helo.
(musique)	durban korontada ku shaqeya .
battre, v.	Garaacid; Tumid; Laga badiyo; ka guulaysi.
battre avec un fouet	Karbaashid.
battre le blé, le mil,etc	Balka ka ridid.
battre fort (le coeur)	wadnaha garaaciisa.
battre monnaie	tumidda lacagta; samayska lacagta birta ah
se battre	Dagaalan; Dirir; Hardamaad; Dagaal.
battu, adj.	Dagaallamay.
baudet, n.m.	Dameer.

baudrier, n.m.	Jeeni-qaar; Bontukha
baume, n.m.	walax dufan ah oo la mariyo dhaawaca ama gubashada; Nabarrada iyo wixii la mida.
bavard, n.et adj.	Hadal badan; aad u hadal badan; u hadlaya.
bavardage, n.m.	hadal badnida
bavarder, v.	Hadal nacasnimo ah; si dabaalnimo ah iska hadashid; sii sheegid; iska hadlid; si aad ah u hadlid.
bave, n.f.	Dhareerka afka; caandhuuf.
bazar , n.m.	suuqa ganacsiga.
bazouka, n.m.	Qoriga ama Bunduqa Lidka Kaaraha ama dubaabadda.
béatifier, v.	U bushaarayn; ka farxin.
béatitude, n.f.	aad u faraxsan.
beau, adj.	Qurxoon; qurux badan; Muuqaal fiican (ragga) Ku soo jiidanaya; jinniyad leh; qurux leh; qurux san.
beaucoup, adv.	Badi (tira) ahaan; badan ; Xaddi badan.
beauté, n.f.	Qurux;gabadh ama naag qurux badan
bébé, n.m.	Canug; Ilma aad u yar; Yar.
bec, n.m.	Afka dhuuban ee shimbiraha Halke ugu sareeya; Ugu fiiqan; Sida Buurta Figta.
bêche, n.f.	Manjarafad.
bêcher, v.	badiil ciid ku rogrogid
Beefsteak, n.m.	Busteeki.
bégayer, v.	Haghago (marka la hadlayo oo hadalka la qabqabto).
béguin, n.m.	jacayl muddo gaaban socda
bêlement, n.m.	Cida idaha (Ariga) Cida idaha, iyo wixii u egba.
bélier, n.m.	sumal; wanka aan la dhuufaanin
belliqueux, adj.	Ujanjeedha xagga dagaalka; Dagaal jecel.
bénéfice, n.m;	Faa'iido; waxtar.
bênet, n.m. et adj.	Qof doqon ah; maran ah; segegar; nacas; qofka qalbi-daciifka ah.

bénir, v.	Ducayn.
benne, n.f.	
benne preneuse	Masaf
béquille, n.f.	Ulaha curyaanka ama qofka dhutinaya ku socdo Qooriga badda.
berceau, n.m.	Gaadhiga Caruurta yaryar lagu riixo.
berceau de verdure	Meesha hadhka leh ee dhirta u dhaxaysa.
bercer, v.	Yiddidiilo gelin.
berger, n.m.	Arijir; Qofka arigaraaca.
beri-béri, n.m.	Jirro ay fiitamiin la'aantuu keento.
besogne, n.f.	shaqo
besogneux, adj.	jecel in uu shaqeeyo; shaqo fiican
besoin, n.m.	U baahan; loo baahan yahay; loo baahdo.
bêta, adj.	Qofka qalbi daccifka ah; Nacas.
bétail, n.m.	xoolo (geel, lo', adhi, fardo)
bête; adj et n.f.	Xayawaanka afarta addin leh;
≙ simplet	Qofka axmaqa ah. Fikrad gaab ah; Nacasnimo; Dammiin.
≙ brute	Xayawaanka oo idil ninka mooyee; Xayawaanka oo dhan dadka mooyee; Qof iska Xayawaana.
bêtise, n.f.	Hadal ama qoraal maalayacni ah; Hadal aan ujeedo lahayn. aan caqliga geli karin;
dire des bêtises	Hadal doqonimo; Hadal Nacasnimo.
betterave, n.f.	Buruq (doombirta u eg).
beurre, n.m.	Subag burcad ah (buuro) ; Burcad; wax lagu darsado; Nooc subag ah;
biais, n.m.	Duwid; Dhinac u qalloocin; aan toosnayn.
biaiser, v.	si toos ah qof ula hadlid
bible, n.f.	Kitaabka Masiixiyiinta.
bibliothèque, n.f.	Maktabad; Meesha kutuba iwm lagu akhriyo.
biceps , n.m.	Muruqa gacanta.
bicyclette, n.f.	Baaskeel
bidenté, adj.	laba-xidhiidhiye.
bien, n.et adj. adv.	wanaagsan; fiican; waa heer sare hagaagsanaan

bien ,n.m. avoir des biens	Hanti. Hanti lahaan; hanti la yeesho.
bien, adv. ou bien	kale mid ahaan; mid ama ka kale; ... kasta.
bien-aimé, adj.	Qofka ama shayga si aad ah loo jecel yahay ama qof u jecel-yahay. Qaali; la jecelyahay; ku dheer (jacayl).
bien-être, n.m.	Raaxaysi; Xaaladda caafimaadka wanaagga, nolol raaxo, shaqo iwm, aad haysatid.
bientôt, adv. à bientôt	Dhakhso. Nabadgelyo; Isnabadgeyeyn.
bienvenue, n.f.	Soodhawayn; soo dhawow.
bière, n.f.	Biire; Nooc khamri ah;
biffer, v.	Xangaruufo; Xagtin; xariiqid; tirtirid
bigamie, n.f.	Ninka labada naagood qaba, nin laba xaas leh.
bikini, n.m.	Dharka ay dumarku gashadaan marka ay dabbaalanayaan; dharka dabbaasha ee haweenka.
bile, n.f.	dheecaan qaraar oo beerku ku soo daayo marka cuntada dheef-shiidkeedu socdo oo wax ka tara dheef-shiidka.
bilingue, adj.	laba af (Luqadood) ku hadlaya; laba af yaqaan oo qori kara akhriyina kara.
billet, n.m. ≙ lettre	Tigidh; shati (sida tigidhka diyaaradda lagu raaco.) warqad yar oo marti qaad ah
billion, n.m	Malyan malyan; malyan meelood oo malyan ah.
billot, n.m.	Jirridda hoose.
binette, n.f.	Yaambo (qalab beerta lagu baaqbaaqo).
binoculaire, n.m.	Diirad; qalab aragga soo dhaweeya.
biographie, n.f.	Qof taariikhdii oo uu qof kale qoray.
biologie, n.f.	Cilmiga barashada noolaha; nafleyda.
bipède, adj.	Nafleyda labada Lugood ku socota sida dadka, shimbiraha iwm.
biscuit, n.m.	Buskut;
bisser, v.	Ku dhawaaqid ah; ku celiya; Mar kale; ama Biis.
bistouri, n.m.	Mindi yar oo qalliinka dadka lagu isticmaalo; Mindi ama mandiil laba aflay ah.

bitume, n.m.	Daamur.
bizarre, adj.	keli; dadka ka dhexbaxa; aan caadi ahayn
blague, n.f.	Hadal aan Ujeedo lahayn; Kaftan; Xanaakad. Hadal nacasnimo ah; hambag.
blame, n.m.	Canaan; Ceeb.
blanc, adj.	Xaashi aan waxba ku qorneyn; Xaashi cad ama banaan. Cad (midab);midab caddan ah.
blanchir, v.	Dhar-dhaqid; maryo maydhid.
linge à blanchir	Meesha dharka lagu dhaqo; doobi.
blanchisseur, n.m.	Doobbi; Dhardhaqe.
blanchisseuse, n.f.	Gabdha ku lacag qaadata dhar dhaqidda.
blatérer,v.	cida wanka; ololka geela
blatte, n.f.	Baranbaro.
blé, n.m.	Sarreen (qamadi).
blême, adj.	Weji madoobaaday (is beddeley); caro ama murugo wejiga qofka laga dareemo.
blénnoragie, n.f.	Jabti; cudur ku dhaca ibaha laga kaadjo iyo qaybaha dhalmada ee jidhka.
blesser, v.	Dhaawicid; wax yeelid; qoomis.
blessure, n.f.	Dembi;Dhaawac nabar,
bleu, adj.	Midabka Cirka oo kale; (Calanka soomaalida midabkiisa oo kale). lafcir; beymadow.
bleu foncé	Buluug qira leh.
bloc, n.m.	Waslad weyn oo ah qari; loox; dhagax iwm. Burka Cawska ah. Jirridda hoose; Cammiraad.
blockhaus, n.m.	Meesha tareenka ama markabka shidaalka loogu kaydiyo.
bloc-note, n.m.	Xusuus-qor; Joornaal.
blond, adj.	dahabi; qofka timihiiso dahabiga yihiin
bloquer,v.	Joojiin; Istaag; joogso.
blouse, n.f.	qamiis dheer oo nafis ah oo dharka laga kor qaato marka macmalka laga shaqaynayo
boa, n.m.	Jebiso.
bobby, n.m.	Askari Boolis ah.

bobine, n.f.	Aalad lagu duubo dunta iwm si ay u hawlyaraato isticmaalkeedu.
bobiner, v.	duubid (dunta; suufta)
boeuf, n.m. (viande)	Hilibka lo'da; Jiir lo'aad.
animal	lo'
boire, v.	Cabbid; Cab; Cabbitaan ama sharaab.
boire à longs traits	aad u cabid.
bois, n.m.	Qori; loox;Daab.
bois d'oeuvre	Loox Guryaha lagu sameeyo ama dhiso.
bois de santal	geedka cuudka ah; santal
bois pour dormir	Baarkin.
boiser, v.	Dhireyn; Dhir ku beerid.
boisson, n.f.	Cabitaan; Sharaab; wax kasta oo la cabbo (sida Caano; Shaah; Khamri; Fiimto; iwm..)
boisson alcoolisée	Nooc khamri ah.
boite, n.f.	Shandad; Sanduuq.
boite aux lettres	sanduuqa boostada.
boite de nuit	Meesha habeenkii lagu tunto.
boîter, v.	Dhutin; Dhutis; Socodka Laangadhaha oo kale.
boiteux, adj.	Laangadhe; qofka dhutinaya; dhutiya.
boitillement, n.m.	Tukubid (socod).
bol, n.m.	qaafiri yar; baaquli yar; fujaan yar
bombarder, v.	duqeyn; (dagaal Ciidameed) weerar laxaad leh oo hubeysan.
bon, adj.	Wanaagsan; Fiican; Sax.
bon marché	Rakhiis ah.
bonbon, n.m.	Macaan ; dhadhan macaan; macmacaan
bonbonne, n.f.	dhalo weyn oo saab leh.
bond, n.m.	Boodid; Booto;
bondir, v.	Boodis; Boodid; ka dul boodid.
bonheur, n.m.	nasiib wanaag.
boniment, n.m.	naada ninka beecmushtarka ah ee wareega isaga oo ku dhawaqaya waxa uu wado iyo qiimahooda
bonjour, n.m.	Subax wanaagsan; maalin wanaagsan
bonne, n.f.	qofka haweenka ah ee guriga ka adeegta
bonsoir, n.m	Galab wanaagsan; habeen wanaagsan

bord, n.m.	Wareegsan; la goobay; Wareegto; Daraf; Dacal; Giftin; Qooriga badda;
bord de la mer	Xeebta ku qabsan (dhaw); Xeeb (saaxil).
bordel, n.m.	aqalka ama guriga sharmuutooyinka loogu tago; Guriga dhilloyinka lagu booqdo.
borne, n.f.	Xad; (Heer ku xadaysan).
bosse, n.f. (de chameau, de bossu)	Kurus (kuruska Geela); Tuur.
bossu, n.m.	Tuur leh
botanique, n.f.	Cilmiga barashada dhirta.
botte, n.f.	Xidhmo; wax isku gunta;
chaussure	bood (iskaarbo).
bouc, n.m.	Orgi.
bouche, n.f.	af.
bouche-bée, adv.	af kala qaad.
boucher, v.	Joojin; Istaag; Joogso;Gufeys.
boucher, n.m.	Kawanle; hilibqale; Xoolo qale.
bouc-émissaire, n.m	Qof lagu ciqaabo ama lagu canaanto khalad uu qof kale ama cid kale sameeyey ama falay.
boucle, n.f.	Qoolaad; suryo;
de cheveux	laalaabka timaha; garaaraha timaha
d'oreilles	dhago.
bouclier, n.m.	Gaashaan.
boudoir, n.m.	qolka dumarku ku beddeshaan; qolka fadhiga ee dumarka.
boue, n.f.	Wasakh; aan nadiif ahayn; Dhoobo; dhiiqo;
bouffon, n.m.	qofka maadeeya, dadka ka qosliya
bouger,v.	dhaqaajid; socodsiin.
bougie, n.f.	shamac la shito si uu iftiin u bixiyo.
bouillie, n.f.	maraq culus;
bouillie de céréales	mushaari; mushaalli; shurbad.
bouillir, v.	Karkarin; baylin.
bouilloire, n.f.	Kildhi; Jalmad.
bouillon, n.m.	maraq; Fuud.
boule, n.f.	kubad; wax sida kubada u wareegsan

boulevard, n.m.	Dariiq; Bulwaar.
bouleversé, adj.	Xagga kale u rogid; Qallibaad (Madax manjo u celin).
bouleversement, n.m.	Is-beddel weyn oo degdeg ah.
bouleverser, v.	Dhaka-faar; maskax fajac..
boulot, n.m.	Gaaban oo buuran; shaqo
bourbe, n.f.	dhoobo; dhiiqo.
bourdonnement, n.m.	sanqadh; xiin
bourdonner, v.	Heesid; la heeso.
bourgade, n.f.	Tuulo; Xaafad.
bourgeois, adj.	Maalqabeen.
bourgeonner, v.	bilawga dhalashada ubaxa
bourrelier, n.m.	Qofka koorayaasha sameeya.
bourrer, v. bourrer de coups	ka buuxin; rasayn garaacid; tumid
bourru, adj.	Cod-xun; qallafsan.
bourse, n.f. ≙ porte-monnaie bourse d'études	shandad ama boorso yar oo jeebka lagu qaato. Shandad yar oo lacagta lagu qaato; Boorso. Deeq Waxbarasho; Lacag.
boursier, adj.	arday deeq wax barasho haysta
boursouflé, adj.	Bararay; bararsan (meel jiran).
bousculer, v.	Tukhaatukhayn; Tukhaatukho (Riixid ama Riixid xoog leh).
bout, n.m. bout de promenade	Waslad; Qidcad; Qurub; In yar; qidcad yar; Qodobo aan la rabin ama qashin ah. Tamashlayn.
bouteille, n.f.	Dhalo; qaruurad wax lagu shuban karo.
boutique, n.f.	dukaan; macdaar; meel wax laga gato
bouton, n.m. bouton (de maladie de peau par exemple)	Sureer; Badhan; Burada maqaarka ka baxda.
boutonner, v.	badhan xidhid; guluus xidhid
boxe, n.f.	Feer;
boxer, v.	feedhtan.
boycotter, v.	Qaaddacaad.

bracelet, n.m;	Qool (kuul).
brai, n.m.	Daamur.
braiement, n.m.	Cida dameerka.
braille, adj.	Habka dadka indhaha la'wax loogu dhigo.
brailler, v. (fam.)	Qaylin ama oohin dheer.
braire, v.	Cida dameerka.
branche , n.f.	Laan geed; laan.
brandon, n.m.	marka caws ama qori la shido si wax loogu ifiyo
brandy, n.m.	barandi (konyaak.)
branler, v.	Gariirid (sida dhulka); sameyn cod yar (sida jiiq-jiiq). Tukubid; jiitan.
bras, n.m.	Cudud (gacanta inteeda calaacasha ka sarraysa); hub; hubsiin.
moulin à bras	Mishiinka xawaashka lagu riqdo.
bras de mer	marka badu dhulka soo gasho
brasero, n.m.	weel macdan ah oo wax lagu kululaysto;jalamad
bravache, adj.	qofka xoog ama awood wax bajiya ee inta ka liidata ku cabcabsiiya; faanka badan
brave, adj.	Geesi;
bravo, n.m.	Eray kor loogu dhawaaqo markaad qofka leedahay si fiican baad fashay.
brebis, n.f.	sabeen.
brèche, n.f.	Meel yar oo bannaan.
bredouillement, n.m.	Hadal dudubin; la boobsiiyo hadalka.
bref, adj.	(Hadal; qoraal; iwm) oo yar ama wakhti yar ku eg; gaaban.
breuvage, n.m.	Cabitaan; Sharaab; wax kasta oo la cabbo (sida caano; shaah; khamri; fiimto; iwm;)
bricoler, v.	Marka shaqo yar la qabto ama shaqo tamar yar lagu qabto (dherya samayn).
bride, n.f.	Xakamaha faraska; In yar; qidcad yar.
brider, v.	xakamayn; yarayn
brigade, n.f.	Guuto (Ciidan).
brigand, n.m.	Qof ka mid ah dad budh-cad ah.

brillant, adj.	Midab dhalaalaya; Dhalaalaya; caddaan aad u dhalaalaya.
briller, v.	Ifid; Dhalaal cad; Bidhaya; Iftiin.
brin, n.m.	marka ugu horaysa ee abuurka dhasho (beerta) wax yar oo ..; qayb yar
brique, n.f.	bulukeeti
briquet, n.m.	Qaraxad.
briser, v.	Burbur qarax oo kale ah.
broc, n.m.	Joog; weel wax laga shubto oo dheg leh.
brochure, n.f.	Buug yar; Jariidad.
broder, v.	Tolis; tolid (irbad iyo dun la isticmaalo).
bronzer, v.	isqoraxayn (bacad is dhigid).
brosse, n.f.	Burush; Buraash ku masaxid.
brosse à dents somalienne (branche ou racine du cadey)	Rummey.
brosser, v.	Burushayn.
brouette, n.f.	Kaaryoone; gaadhi yar; gaadhi gacmood
brouillard, n.m.	Ceeryaan.
brouille, n.f.	Kala jajabid.
brouiller, v.	Dhaka faar; maskax fajac...; arbushid; kala firdhin
broyer, v.	shiidid; daqiijin
bruiner, v.	Shuux (Roob).
bruit, n.m.	Buuqaya; qaylinaya; buuq badan ama qaylo badan; Dhawaaq; Jabaq; Sanqadh; Caafimaad-qab; Qiyaasta dhererka hoos ee badda iwm.
bruit strident	Qaylada dhuuban.
bruit sourd, mat	Shanqadh yar; sida wax mel jilicsan ku dhacay oo kale.
bruit qui court (on-dit)	war aan rasmi ahayn ee dadku isla dhex maraan.
brûlé, adj.	Gubasho.
brûler, v.	Gubid; la gubo.
brûler légèrement	Gubasho dab yar.
brûlure, n.f.	Gubidnimo.
brume, n.f.	ciiryaamo; marka iftiinku yaraado
brun, adj.	Midab boodhe; Cusuur
brunir, v.	Wa marka dadka cadcad ay intay qoraxda isu dhigaan midab koodu mado u dhawado.

brusque, adj.	Lama filaan ah; si lama filaan ah; kediso.
retour brusque	ka soo boodid (sida kubbad gidaar lagu dhuftay.)
brusquement, adv.	Kedis ahaan.
brut, adj.	aan bislayn; qaydhin, akhlaaq daran
brutal, adj.	Waxshi; axmaq; qalafsan; bilaa naxariis; Naxariis laawe; badow; Debad galeen ah; axmaq ah.
brute, n.f.	qof akhlaaq xun
bruyant, adj.	Cod dheer; Dhawaaq dheer;Buuqaya; qaylinaya; Buuq badan ama qaylo badan.
buccal, adj.	aan qoraal ahayn; hadal ahaan lagu sheego.
bûche, n.f.	Qoriga xaabada ah ee la dhito.
bucher, n.m.	Dadaal.
budget, n.m.	Miisaaniyad.
buée, n.f.	Dharab; Qoyaan; Qaac; Uumi.
buffet, n.m.	Kaantiinku.
bugle,n.m.	Bililka ama Turuumbada ciidammada loo afuufo
building, n.m.	Xaa fad (dubbo); aqal dabaqyo badan ka kooban
buisson, n.m.	Kayn; Duurka.
bulldozer, n.m.	Cagafta afka ballaaran leh wax burburisa.
bulletin, n.m.	maqaalad
bungalow, n.m	Guri fillo ah ama Bangalo.
bureau, n.m.	
meuble	miiska wax lagu akhristo ama lagu qorto
salle	qol; makhsin; xafiis
bureau de poste	Xafiiska boostada.
bureau de presse	Xafiiska wargeynta
bureau de renseignements	Xafiiska warbixinta.
burette, n.f.	mitimiye.
bus,n.m.	Bas; baabuurta baska ah; Koryeeri.
arrêt de bus	Hakad (joogsi) bas.
buse, n.f.	Qof doqon ah ama maskax xun.
but, n.m.	Muraad; qasdi; walax; shay;
but (football)	Goolka ciyaarta kubbada
gardien de but	Gool-joogo; Gool-haye.

C

ça, pron.dém.	kaas
çà, adv. de lieu	halkan, halkas
cabale, n.f.	Koox sir siyaasadeed haysa.
cabane, n.f.	Dargad; Cariish.
cabaret, n.m.	Masaf; Shay balaadhan oo alaabta fudud lagu qaado.
cabine, n.f.	Qol hurdo oo markabta ama dayuuradda ku yaalla, dargad ama cariish yar.
cabine de bateau	Qol markabka ka mid ah oo dadweynaha ka dhexeeya.
cabine téléphonique	Qolka telefoonka.
cabinet, n.m. (meuble)	Kabadhka ama armaajada.
cabinet (bureau)	Xafis; Golaha Wasiirrada.
cabinet de travail	Xafiiska ama qolka shaqada
cabinet privé	Qol gaar loo leeyahay
cabinet de consultation	Qolka takhtarku dad-ka ku baadho.
cabinet ministériel	Golaha wasiirrada.
les cabinets (les toilettes)	Qolka (meesha) lagu weji dhaqdo faraxasho. Qolka yar ee musqusha ah ee biyaha leh.
câble , n.m.	Xadhig weyn oo gar ah (Kuwa Maraakiibta iyo korontada).
caboche, n.f.	Madax; Qofka darajo sare leh.
cabriolet, n.m.	Baabuur yar Dusha qaawan (Bannaan.)
cacao, n.m.	Midho ama geedka Kookaha iyo shaglaydka laga sameeyo; kakaw
cache-nez, n.m.	Iskaaf (qoor-duub).
cacher, v.	Qarin; Xasayn; Haragga Xoolaha (Saan) Khabbeyn; Sir hayn;
se cacher	Ugu gabbasho; ugu dhuumasho.
cachet, n.m.	Hab (Qoraal hadal; Dharxidhasho iwm.)
= médicament	Kiniini (Xubuub).
cactus, n.m.	Geedka Tiinka.
cadastrer, v.	Sahamin.
cadavérique, adj.	la xidhiidha maydka
cadavre, n.m.	Raqda xayawaanka (Xoolaha); Meydka dadka; Qofka dhinta meydkiisa.
cadeau, n.m.	Hibo; Hadyad.
cadenas, n.m.	Quful; Qufulka wax lagu xidho.

cadence, n.f.	Cod; Dhawaaq ama hadal si is le'eg u baxaya.
cadet, adj.	Ardayga Kulliyadda Ciidanka badda ama Cirka dhigta; Wiilka yar.
cadre, n.m.	maamule sare; kaadar; hogaamiye sare
cadre d'entreprise	maamule ama madaxa warshad wax soo saarta
caduc, adj.	Duq ah; Taag-darro da'ama gabow ah.
cafard, n.m.	baranbaro
cafarder, v.	si munaafaqnimo ah uga waramid
café, n.m.	Makhaayad; Maqaaxi;Bun; Kafee; Qaxwe;
cage, n.f.	Qafis; Kaamka maxaabiista Dagaalka lagu hayo.
cage d'ascenceur	Jid ka Wiishku maro.
cagnotte, n.f.	Berkedda lagu dabbaasho; ka dhexeeya Dadweyne.
cahier, n.m.	Daftar·
caille, adj.	gadhoodhka
cailler, v.	gadhoodhin; caano fadhiisin
caillot, n.m.	Xinjiir (Kuus dhiig ah).
caillou, n.m.	Dhagax.
caisse, n.f.	Kiish; Shandad; Kabadhka yar; Durbaan.
caisse d'épargne	Buugga bangiga kaydka.
caissier, n.m.	Lacag haye
calamité, n.f.	Masiibo khatar ah; Nasiib darro; Nasiib xumo;
calcium, n.m.	Kaalsho; Macdan jidhka (Lafaha iyo Ilkaha) ku jirta.
calcul, n.m	Xisaab; U fiirsasho.
calcul vésical(médecine)	dhagax ku samaysma kaliyaha iyo kaadi mareenka
calculateur, n.m. et adj.	Kumbuyuutar; qalab sida maskaxda biniaa-damka loogu adeegsado (fikir).
calculer, v.	Ka shaqeeya ama soo saar (xisaab) Xisaabin; Isku xisaabin.
calendrier, n.m.	Taariikh la tirsado; Faahfaahin ama qoraallo tusaaya wax lagutala galay; Jadwal; Taaqwiim.

caler, v. — Qabasho.

calibrer, v. — cabirid; qiyaasid

calicot, n.m. — Go'cad ama Turraxad.

calleux, adj. — Safanta jidka ee hawsha badani dhalisa.

calligraphie, n.f. — Fardhigan; Qoraal; Qoraal qurux badan.

callosité, n.f. — Aalad lagu qiyaaso dhumucda.

calme, adj. — La dejiyo; la qaboojiyo; jabaq la'aan sanqadh iyo hadal la'aan; Deggan.

calme, n.m. — daganaanta

calmer, v. — Aamusiin ama qoboojin (Qof cadhaysan) In lays qaboo jiyo; Dejin; Qaboojin.

calorifuger, v. — Dahaadhid; Ka xijaabid; kagasoocid waxaan dabgudbiye ahayn.

calotter, v. — Dhirbaaxid; Dhirbaaxo.

calquer, v. — qorid; calaamad; guuris

camarade, adj. et n. — Jaalle; Saaxiib daacad ah; Wehel; Raafiq; Saaxiib ama Jaalle wax gooni ah ama shaqo gaar ah lagu saaxiibo.

camaraderie, n.f. — Saaxiibtinimo.

cambrioler, v. — Dhicid sida xoolaha la dhaco.

cambrioleur, n.m. — Qofka habeenkii guryaha jabsada si uu u xado; Tuugga habeenkii.

cambuse, n.f. — Qolka markabka wax loogu kariyo; Kijinka markabka.

caméra, n.f. — Aalad ama qalab wax lag sawiro-kamarad.

camion, n.m. — Gaadhi; Baabuur weyn; Baabuur Xamuul qada; Baabuur carabi (ama tareen yar) oo balka dhuxusha iwm, lagu qaado.

camp, n.m. — xero

campagnard, adj. — Beer-qodaal.

campagne, n.f. — Ololε.

camper, v. — Xero.

canal, n.m. — biyo mareen ; Biyo mareen laba badood isku xidha; kali

canalisation, n.f. — Qasabadda ama dhuunta qashinka (Bulaa--cada) qaadda; Qashin Qubis.

canapé, n.m.	Kursi fadhi oo dheer ee dhowr qofi ku fariisan karto.
canard, n.m.	balanboolada lab (shimbir)
≙ fausse nouvelle	Warbixin Dacaayad.
cancans, n.m.pl.	Fadeexad; Dacaayad.
cancer, n.m.	Waa cudur khatar ah oo loo dhinto; Qoor-gooye.
candidat, n.m.	Qofka imtixaanka gala ; Qofka la soo sharxo.
cane,n.f.	dhaddiqa balanboolada (shimbir)
canelle, n.f.	dhagayare
canine, n.f.	Fool (Ilkaha dadka foolasha)
caniveau, n.m.	Saaqiyad; Gacan (ka biyuhu maraan).
canne, n.f.	Ul; Bakoorad.
canne à sucre	Qasabka sonkorta laga sameeyo.
cannibal, adj.	Dadqal; Qofka hilibka dadka cuna.
canoe, n.m.	Huudhi; Huuri; Saxiimada yar ee seebka lagu kaxeeyo.
canon, n.m.	Madfac (Noocii Hore); Bunduq; Qoriga xabbadda laga rido.
cantonner, v. (se)	Iska takoorid; Gooni ama keli u soocid.
cantonnier, n.m.	Ninka dejiya ee hagaajiya laymanka tilifoonka iyo taararka.
caoutchoucs, n.m.pl.	Koodh roobka laga xidho.
cap, n.m.	dhul badda qashan.
capable, adj.	Kari kara; la kari karo; u leh karti; awood, tamar, xirfad iyo aqoon inuu qabato waxa loo baahan yahay xirfad leh; khibrad leh;
rendu capable	Awood siin ama karsiin.
capacité, n.f.	Karti; tanka tacabka.
cape, n.f.	Maro garbaha la saaro oon gacmo lahayn.
capitaine, n.m.	Dhamme (Saddex xiddigle); Madax gaybeed.

capital, n.m.	Hanti; Qaniimad; Kabitaal
investissement du capital	Maal gelin; Hanti gelin.
capital fixe	Hanti qotoma.
capital circulant	Hanti wareega.
capital constant	Hanti joogtada.
capital variable	Hanti isbeddela.
capital industriel	Hanti sanceed
forme générale du capital	Formulaha guud ee Hanti.
avance de capital	Hanti qadiman.
capitaux	Hanti lacagta
capitaux productifs	Hanti tacabeed.
capitaux commerçants	Hanti baducadeed.
capitaux marchands	Hanti ganacsi
capitaux financiers	hanti maaliyadda.
avance de capitaux	Hanti amaanda.
export de capitaux	Dibegeynta hanti.
capitale, n.f. (lettre)	Xarfaha waaweyn ee alafbeetada.
capitale, n.f. (ville)	Magaalo madax; Caasimad.
capitalisme, n.m.	Hanti goosad.
capote, n.f.	kibood; qolofta ama dadka baabuurka
captif, adj.	La haye; La xidhay.
capture, n.f.	La qabtinimo.
capturer, v.	La qabto; Qabasho.
caquet, n.m.	Qeylada ama dhawaaga digaagadda markay dhasho; Qosolka dheer.
caqueter, v.	Qosolka dheer; U hadlid; Si aad ah u hadlid.
carabine, n.f.	Bunduq yar; Kaarabiin; Rayfal.
caractère, n.m.	Dabeecad; Qaab; Nooc.
carafe, n.f.	Dhalada biyaha ee miiska; Dhalada weyn ee biyaha lagu shubto; weyso.
caramel, n.m.	Nacnac.
carbone, n.m.	Kaarboon.
carboniser, v.	u rogid dhuxul; gubid; dhuxulayn
carburateur, n.m.	Qeybta qaraxu ka dhaco ee injiinka (Gaariga)
carcasse, n.f.	Raqda xayawaanka (Xoolaha) dhiska lafaha jirka.
cardamone, n.f.	Hayl (Xawaash).
cardigan, n.m.	Jubbad balawar.

cardinal, n.m. (religion)	waxa weye darajo lagagaadho diinta khrishtaanka.
caresse, n.f.	taabasho jaceyl ku jiro (dhunkasho); salaax
caresser, v.	salaaxid
cargaison, n.f.	Alaabta markabta lagu qaado.
carie, n.f	Lafo qudhunka;ilka qudhunka (Suuska).
carié, adj.	Qudhun; Khaayis.
carier, v.	Qudhmid; Qaasiyid.
carnage, n.m.	Dilista badan; le'adka (sida Goobta dagaalka); Gawracidda iyo qalista.xoolaha.
carnivore, adj.	Habar-dugaag xayawaanka hilib cunta ah.
carotte, n.f.	Dabacose; Geed (khudrad)Badhidiisa la cuno; Qajaar; Karoot.
carpe, n.f.	Kalluunka biyaha macaan ku nool.
carré, n.m.	La bajibbar.
carreau, n.m.	muraayada dariishadaha
carrefour, n.m.	Isgoyska waddada; afar irdood (is-goys).
carrière, n.f.	xirfad; shaqo
cartable, n.m;	Shandada lagu qaato alaabta yaryar ee fudud siba buugaagta (Dugsiga iwm.) waxaanay ka samaysan tahay saan ama shiraac iwm.
carte, n.f.	Qalabka askariga oonay ku jirin hubka iyo dharku.
≙ plan	Maab; Khariidad.
carte postale	Kartoliin.
cartilage, n.m.	taharta xoolaha (hilibka ku taala); kaarti--laajo
carton, n.m.	Kartuush; Kartoon.
cartouche, n.f.	Qasharka rasaasta
carvi, n.m.	Kamoonta nooc ka mid ah.
cas, n.m.	xaalad; kiis; dhacdo; wax muhiim ah (arrin) oo dhacay
cas urgent	gargaar degdeg ah
dans le cas contraire	haddii kale; si kale; hab kale

cas, n.m.	; Kiis; Dhacdo; Wax muhiim ah (arrin) oo dhacay.
cas urgent	Gargaar degdeg ah.
dans le cas contraire	Haddii kale; Si kale; Hab kale.
casier, n.m.	Dheri; Digsi; weelka wax lagu kariyo; Dusuud.
casque, n.m.	Koofiyadda birta ah ee askarta; macdan qodayaasha iyo kooxaha dabdemiska iwm.
casquette, n.f.	Koofiyad.
cassé, adj.	Wuu jaban yahay.
casser, v.	jabin; kala jabin
casserole, n.f.	Digsi dheg la qabto (sida maqlida) iyo Fur leh oo suugada lagu sameeyo.
cassette, n.f.	Cajalad.
casuel, adj.	Gunno; Waxa ka siyaadada ah mushaarka.
catalepsie, n.f.	Suuxitaan; Suuxis (Cudurka suuxdinta).
catalogue, n.m.	Hordhac (liis).
catalyse, n.f.	Kalkaalid;
catapulte, n.f.	Shimbir-laaye (qalab); laan-cigaaleed
cataracte, n.f.	Gebiweyn oo biyo shub ah.
cataracte, n.f. (maladie des yeux)	Kataraat: Cudur Indaha gala oo dad-ka indha tira.
catastrophe, n.f.	Masiibo lama filaan ah oo kedisa;
catch, n.m.	Lagdanka xorta ah.
catégorie , n.f.	Dabaqad ; Katigori.
cathédrale, n.f.	Kaniisad guud.
cation, n.m.	Ayoon tagan.
cause, n.f.	Sabab; Millayga ay dhacdo ama wax gaar ahidhacaan.
causer, v.	Kaftamid; laga caraysiiyo.
= parler	Hadal; hadlid; la hadlo.
causerie, n.f.	Kaftamis.
caustique, adj.	Lagu gubi karo ama lagu dumin karo fal kiimiko.
caution, n.f.	ganaax maxkamadeed; fiijignaan; ka tabaabushey--Si badbaado
caution personnelle	rahmaad; rahan

cavalerie, n.f.	Askarta ku dagaal gasha fardaha (Fardoo leyda).
caverne, n.f.	God.
caviar, n.m.	Kafyaar (ugxan kallun).
cavité, n;f.	Meesha (meel) madhan ee adkaha ku taal Jidka; Dalool; Daloolin.
Cayenne, n.m. (piment)	Nooc basbaas ah oo aad u kulul. Basbaas-kulul.
ce, pron. dém. c'est, ce sont	Wax waa
ce, adj. dém. (cet, cette, ces) ces particules s'ajoutent à fin des mots concernés	kuwan; -han; -tan; -gan; -lan; -dan;-an
ceci, pron. dém.	Waxaan; Kan.
cécité, n.f.	Indha aan waxba arkayn.
céder, v.	Beddelid; La beddelo; Is dhiibid (sida marka dagaalka).
ceinture, n.f.	Suun (ka dhexda lagu xidho oo kale); dhexda jidhka; Gunburi.
cela, pron.dém.	Kaas; kan
célébration, n.f.	dabbaaldigida
célèbre, adj.	Caan ah; La wada yaqaan.
célébrer, v.	Dabbaaldegid; Damaashaadid.
célébrité, n.f.	Caan.
célibat, n.m.	Doobnimo ama Gashaantinimo.
célibataire, adj.	Keli ah; Mid qudha; Keli.
celle, pron. dém.	tii; middii.
celle-ci celles-ci celle-là celles-là	tan; middan kuwan; waxyabahan middas; taas kuwas
cellule, n.f.	Qol yar oo jeelka ku yaal; Unugga Jirka;
celui, pron.dém. celui-ci ceux-ci celui-là ceux-là	kii; midkii kan kuwan kaas kuwas
cendre, n.f.	Dambas.

cendrier, n.m.	Walaxda sigaarka lagu Bakhtiiyo ama la dul saaro.; dambas qaad
censeur, n.m	Cis awood u leh inuu baadho warqadaha filimada Wargeysyada iwm (sarkaal awoodda leh).
cent, n.m.	Boqol; tiro ah 100;
un cent (argent)	1/100 shilin.
centaine, n.f.	Boqol.
centenaire, adj. et n.	Sannadguurada boqolaad.
centigrade, n.m;	Halbeegga kulaylka; Sentigireet; Heerka Kulka.
centigramme, n.m.	Qiyaas ama Cabbir (1/100 Mitir) Dherer.
central, adj.	Badhtamaha; Dhexaadka; Dhexdhexaadka.
centrale électrique,n.f.	Warshadda Xoogga Korontada.
centraliser, v.	Badhtanka la keeno; la dhexdhexaadiyo.
centre, n.m.	Dhexda; Xarun; Badhtan.
centrer, v.	Dhexda; Xarun.
cependant, adv.	wakhtigas; xiligaas
cercle, n.m.	Goobo; Shaag;
quart de cercle	Goobada rubuceed; Afar meelood oo meel Goobada.
céréale, n.f.	Heed (Qamandi; Bariis; Sareen; Heed).
cérébral, adj.	Qeybta sare ee maskaxda.
cerf, n.m.	Deero (Ugaadh).
cerne, n.f.	Xarxariiqa ama laalaabyaha indhaba Hoostooda ku dhasha Marka qofku daalanyahay.
cerner, v.	Hareerayn (Cadaw); Xerayn; Ku soo wareejin; Agagaarayn.
certain, adj.	Hubaal; Xaqiiq; Shaki la'aan.
certains, pron.	Xoogaa yar.
certificat, n.M.	Shahaadad.
cerveau, n.m.	Maskax.
cesse, n.f.	joojin.
cétacé, n.m.	Nimmiri; Nibiriga badda ku nool.

chacal, n.m.	Yey; xayawaan u eg eyga.
chagrin, n.m.	Murugo.
chagrin, adj.	Cabasho badan.
chagriner, v.	Arbushid; La arbusho.
chaine, n.f. ≙ rangée	Silsilad. Tixid; Taxan.
chainette, n.f.	Silsilad ; Katiinad.
chainon, n.m.	isku xidhid.
chair, n.f.	Cad; Jiidh (Baruur maaha).
chaise, n.f.	Kursi; Fadhi; Fadhiisin.
châle, n.m.	Garba-saar; Shalmad.
chaleur, n.f. chaleur latente	Kulayl; Kul. Kul dahsoon.
chambre, n.f.	Qol; Qowlad.
chameau, n.m. entrave à chameau (entre les deux pattes antérieures) mors à chameau guide à chameau (attaché à la lèvre supérieure)	Awr; Ratti; Geel. dabar-seeto. hoggaan Faruur-xidh.
champ, n.m. être au champ. théorie des champs des ligands.	Qiyaas dhuleed oo la mid ah 4,840 talaabo oo dhan kasta ama la mid ah 4000 Mitir oo dhan kasta ah. Beer weyn (Daaq ama miro beerid); Garoon. Ka fog hoyga. Aragtida badka ku xeeranaha. (Fiisiko iyo Kimiko.).
champignon, n.m.	Boqoshaar; like; malaabuq
champion, n.m.	Ciyaartooy.
chance, n.f .	Fursad;
chancelant, adj.	Lulmaya; Gariiraya; Ruxmaya.
chanceler, v.	Lulid; Ruxruxid; Dhaqdhaqaajin;Heedadow; Tukubid; Jiitan.
chanceux, adj.	Nasiib badan leh.
chandail, n.m.	Balawar (Funaanadda dhaxanta).
chandelle, n.f.	Shamac la shito si uu iftiin u bixiyo.

change, n.m. | Sarrif ; Sanuud

changeant, adj. | Si fudud ama hawl yar u dhaqaaqi kara·

changement, n.m. | Beddel; Bedbeddelis; Gedgeddis.

changer, v. | Beddelid; Is beddelid;
changer de place | Meel ama jiho ka beddelid.
changer d'adresse | Beddelid-Cinwaan.

chanson, n.f. | Heesta

chant, n.m. | Hees·

chanter, v. | Jabaq; Heesid; la Heeso.

chanteur, n.m. | Hoobel; Heesaa.

chaparder, v. | xadid

chapeau, n.m. | Koofiyad.

chapître, n.m. | Tuduc (Qaybaha Buugga).

chapon, n.m. | Digirinka lab ee la maaxsado (si loo cuno).

chaque, art. | Midkiiba; Mid kastada; Gabi ahaan; Mid walba.

char, n.m.
de combat | Taangi; Haan Biyeed ama Batrool iwm, kaare dubaabad.

charbon, n.m. | Curiyaha Kaarboonka C
Dhuxusha Dhulka laga soo qodo
charbon de bois | Dhuxul.

charette, n.f. | Gaadhi Carabi; Gaadhi Dameer.

charge, n.f. | Culays; Ganaax; Dacwayn (Xukun) lagu qaado La danbeeyo.

chargé, n.m. | Mas'uul.

chargement, n.m. | Alaabta markabka lagu qaado.

charger, v. | Culays; Ganaax; Dacwayn; (Xukun) lagu qaado.

chariot, n.m. | Baabuur carabi (ama tareen yar) oo balka dhuxusha iwm. lagu qaado;
Baabuur Xamuul qada.

charité, n.f. | Debecsanaan; U roonaanta dadka jilicsan ama faqiirka.

charmant, adj. | Farax gelin; Farxad leh; Lagu Farxi karo.

charme, n.m. | Soo jiidasho;Jinniyad.

charmer, v. | Soo jiidasho.

charpentier, n.m.	Nijaar; Ninka Farsamada qoryaha (Looxyada) iyo ku shaqeyntooda yaqaana.
charogne, n.f;	Bakhti; Raq(xayawaanka).
charette, n.f.	Baabuur carabi (ama tareen yar) oo balka dhuxusha iwm; lagu qaado.
charrue, n.f.	Qodal (Qodalka ama Cararooga Beeraha aalada loo isticmaalo oo Kakooban Qori ama geed laqoray oo afdheer ama bir afdheer oo inta lagu xidho laba dibi ama ri ti loogu qodo beeraha.)
charte, n.f	Warqad ballan qaad.
chasse, n.f.	La eryado.
chasser, v.	Eryad; La eryado; Eryid; Tuuris; ka saarid; Ugaadhsi.
≙ bannir	Samrid; shaqo ka eryid; sii dayn; la waayid ama maskax ka sii dayn.
chasseur, n.m.	Qofka Ugaadhsada; Ugaadhsade.
chasseur d'hôtel	Bog; Xammal; Qofka alaabta qaado; Waardiyaha irrida; ilaaliyaha irridda.
chaste, adj.	Sino la aan. (Nagta ama Ninka aan qof nagtiisa ama ninkeeda ahayn aan sino u doonan.)
chat, n.m.	Bisad; dummad; Mukulaal; Basho.
chateau, n.f.	Qalcad Milateri.
chateau d'eau	qalcad biyaha lagu kaydiyo
chatier, v.	ciqaabo xun; Ciqaabid xun; Ciqaab; Karbaashid.
chatiment, n.m.	Xanuun.
chaton, n.m.	Bisadda yar; Mukulaasha yar.
châtrer, v.	Dhufaanid; Xaniinyo ka siibid ama ka saarid.
chaud, adj.	Kulul; Kulayl ah; Diiran.
chaudière, n.f.	Waa makiinadda kululaysa guriyaha wada - -madda qabow
chaudron, n.m;	Dhere weyn.
chauffer, v.	Kul; Kulayl.
chauffeur, n.m.	wadaha ama darewalka lacagta la siiyo. Maqal-haye (jooge).

chaumière, n.f.	cariish; aqal yar
chausser, v.	kabo xidhasho; kabo qashad
chaussette, n.f.	Sharaabood; Maro cagaha kabaha buudhka ah loo gashado.
tricoter des chaussettes	Tolid sharaaboodo.
chaussure, n.f;	Buudh; kabaha dusha ka qafilan. Kab; Kooy; Iskaarbo.
chauve, adj.	Timo la'aan; aan tima lahayn.
chauve-souris, n.f.	Fiidmeer.
chaux, n.f.	Nuurad; Walaxda cad;
chaux vive	Nuuraad qoyan.
chavirer, v.	Qalibid; Fadqalalayn.
chef, n.m.	Hoggamiye; Hor kaca
chef de cuisine	Dabbaakha ama kariyaha hudheelka baarka (madax a kariyada).
chef d'orchestre	hoggaanshe koox ciyaartooy ah
chef de clan	Nabad-doon; Caaqil.
chef de tribu	kaabo qabiil
chef de brigade	Hor-jooge koox.
chélatant, adj.	xidhidiyaha ka kanaanta .
chélater, v.	Xidhiidhiye.
chemin, n.m.	Waddo; Jid; Marin; Wadiiqo; Waddo-luuqeed; Dariiq.
chemin de fer	Tareen rasto-biro ah;saldhigga tareenka.
chemise, n.f.	garba gale ; Shaadh; Shaati; Qamiis; Shaar.
chemisier, n.m.	Shaati. (gacmo gaab ah)
chenapan, n.m.	Qof aan waxba isku falayn; Qof aanay waxba ka xaaraan ahayn.
chêne, n.m.	Noocyo dhir waaweyn ah oo jirrid weyn leh adduunkana ku badan.
chenil, n.m.	Cariish eyga hooy looga dhigo. Hoyga eyga.
chenille, n.f.	Diir; Dirxiga balan baalista naqda.
chèque, n.m.	Warqadda lacagta; Jeeg.
toucher un chèque,	jeeg qaadasho
cher, adj.	Qaali; la jecelyahay.
= coûteux	Qiime sare ah.
chercher, v.	Baadigoobid; Doondoonid; u eegid.
chéri, adj.	Malab; Qaali; La jecelyahay.

chérir, v. — Yiddidiilo gelin; jeclaan

cherry, n.m. — khamri laga sameeyo soriiska

chétif, adj. — Yar oo caato ah

cheval, n.m. — Faras;
  monter à cheval — Farda fuulid. Fuulid.

chevaucher, v. — Farda fuulid.

chevelure, n.f. — Timo.

cheveu, n.m. — Timo.
  boucle de cheveux — Timaha dumarka.

cheville, n.f. — Canqow; Halka cagta iyo lugta isku xidha.

chèvre, n.f. — Ri'.

chevreau, n.m. — Ri'yar.

chevron, n.m. — Alifka askarta (darajo).

chevroter, v. — Hadal googoynayo; Hadal la gargariirid.

chez, prép. — hooy; guri; aqal
  chez soi — hooygiisa; gurigiisa; aqalkiisa

chic, n.m. — Hab (Qoraal hadal; Dharxidhasho iwm.)

chien, n.m. — Eey.

chienne, n.f — Eey.
Dheddigga ama ka dheddig ee eyga·

chiffon, n.m. — Maro calal ah.

chiffre, n.m. — Summada Tirada sida 0,1,2,3,4,5,6,7,8,9.
sawirka Jaantuska ah iwm.
Erey; Xaraf .

chignon, n.m. — Guntintaama duubka timaha ee dumarku madaxa qadaadkiisa ku samaystaan.

chimie, n.f. — Cilmiga kimikada.

chimique, adj. — kimiko;
  échange chimique — Isbeddel kimikeed.

chimiste, n.m. — Qofka aqoonta u leh cilmiga kimikada.

chintz, n.m. — Daah daabac leh.

chiper, v. — Dhuumasho; Ka war-sheekeed.

chique, n.f. — toombaako; toobaako

chirurgie, n.f. — Cilmiga iyo Barashaada nabarrada iyo cudurrada la qalo.

chirurgien, n.m. — Dhakhtarka qalliinka.
Wax qale.

chlore, n.m. — Kaloor Cl, Curiye kimikeed.
gaz chlore — Neef Cagaar-Hurdi ah, qarmuun ah , sambabahana u xun, Cl_2.

chloroforme, n.m. — Daawada qofka lagu suuxiyo marka la qalayo $CHCl_3$.

chlorure, n.m. — Wixii curyaha Kaloorin ku jiro: Cl^-.

choc, n.m. — Dakhar; Madaxa oo wax la yeelo.
Naxdin; Argagax.

chocolat, n.m. — Shokoolaato.

chœur , n.m. — Isla jiibin (Hees la isla jiibin, ama si waddajir ah loo heeso).

choisir, v. — wax dooratid; xulatid ; Dooratid; Xulid; La doorto;La xusho; la doorasho.

choix, n.m. — Doorasho; Laba wax marka la kala doorto.

choléra, n.m . — Daacuun calooleedka (Cudur dalalka kulul ku badan).

chomage, n.m. — Shaqo la'aan.

chope, n .f. — Bekeeri dheg leh; koob dheg leh.

choquer, v. — Garaac; Ridid; Leged; ka yaabin

chorus, n.m. (faire chorus) — si wada jir ah loo heeso.

chose, n.f. — Walax; Shay; Wax.

chou, n.m. — Waa khudrad; Kaabash.

chrétien, adj et n. — Masiixi ah; Kiristaan ah.

Christ, — Masiix (Nebi Ciise).

chrome, n.m. — Curiye waxa adaglagu dahaadho la mariyo.

chronique, adj. — Xanuun ama xaalad dabadheeraad oo raaga.

chronologie, n.f. — Cilmiga isku dubbaridka taariikhaha wax dhacaan liis garaynta.

chuchotement, n.m. — loo roonado; aad loo jeclaado

chute , n.f. — Soo dhicid; Dhicid.

chutney, n.m. — Shigniga raashinka lagu cuno basbaas la ridqay, liin dhanaan iyo waxyaalo kale oo laysku daray.

cible, n.f.	Calaamad; Calaamadin; Summadin.
cicatrice, n.f.	Xagtin; Xangurufo.
cicatriser, v.	Bogsiin (meel bogtay); daa weyn.
cidre, n.m.	wax la cabbo oo tufaaxa laga sameeyo.
ciel, n.m; les cieux (le Paradis)	Cirka; Janno; Janaada aakhiro.
cigare, n.m.	Siigar.
cigarette, n.f.	Siigar.
cime, n.m.	Figta; Halka ugu dheer; Shir heer madax weyneyaal ah; Halka ugu sarreya.
ciment, n.m.	Sibidh; Shamiinto.
cimenter, v.	Shamiintayn.
cimeterre, n.m.	Seef gaaban oo yara qaalooban oo laga isticmaali jiray beershiya: Carabta iyo Turkiga.
cimetière, n.m.	Qabuuraha; Xabaalaha.
cinéma, n.m.	Shaneemo; Sinime; Meesha Filimada lagu daawado.
cinétique, adj. et n.	la xiďhiidha ďhaqdhaqaaqa
cinglant, adj.	qalafsan; aan naxďin lahayn
cingler, v.	Shaabuugeyn; Karbaashid; Jeedalid;
cinq, adj.	Shan, 5
cinquante, adj.	Konton, 50
cinquième, adj.	Ka shanaad, 5aad.
circoncire, v.	Gudniinka (Ragga);
circonférence, n.f.	Wareegga Goobada.
circonspect, adj.	U feejignaanta wax walba intaanad qaban ama ku dhaqaaqin.
circonstance, n.f.	Duruuf; Tusaale; Dhab ama wadiiqo run ah.
circulaire, adj.	Wareegsan; La goobay; Qaab goobaabin ah sida Kubbada.

circulation, n.f.	Socodka baabuurta, dadka iwm.
milieu de la circulation	Marinka wareega.
cire, n.f.	Xayd; Laxda shinidu malabka ka samayso.
cirer, v.	Kaga dhaalisid; Si fiican u Hagaajisid.
cirque, n.m.	gole ciyaareed ("stadium"); Sirki.
ciseau, n.m.	Maqas.
ciseau à bois	Qalab wax lagu jaro (Birta)
ciseaux	Maqas; mangas; Ka dharka marka la tolayo lagu jarjaro.
ciseler, v.	Qalab wax lagu jaro (Birta; Shiine).
citation, n.f.	Tusalooyin; Hal ku dhigyo.
cité, n.f.	Degmo; Magaalo.
cité administrative.	Degmadda ama Xafiisyada maamulka; Degaanka maamulka.
cité ministérielle	Degmo wasaaradeed.
cité industrielle	Degmo warshaadeed.
cité-dortoir	Degmo xagley (degmo aan dukaamo, makhaayado iyo xafiisiyo midna aan lahayn).
cité universitaire	Degmo Jaamacadeed (Kambuus).
citer, v.	Ka soo xigasho; Magac sheegid; Sheegid; Magmagcaabid.
citerne, n.f.	Haanta biyaha ee Guryaha kor saaran.
citoyen, n.m.	Reer magaal.
citron, n.m.	Liin; Liin dhanaan.
civil, n. et adj.	Shicib; Rayid.
civilisation,n.f.	Xadaarad; Ilbaxnimo;
civiliser, v.	Ilbixid; la ilbixiyo; Jaahilnimada laga saaro oo wax la baro.
civique, adj.	Cilmiga bulshada.
clair, adj.	Si qeexan loo arkays ama loo fahmayo. Qeexid; qeexan. Si hawl yar loo fahmi karo; aan lagu khaldami karin
clairon, n.m.	Bililka ama turuumbada Ciidammada uu Afuufo.

clairvoyance, n.f. — Awoodda u qof maskaxda ka arkayo wax dhici doona ama wax ka jira meel fog (aragti la'aan). Qof sidaasi ah.
Maskax-furraan; Fahmi-Ogaal.

clameur, n.f. — Sawaxan iyo qaylo dheer oo madax arbushah.
Baroor; Qaylo.

clan, n.m. — Jilib qabiil ka mid ah. Qoys ama reer.

clandestin, adj. — sir ; qarsoodi ah; sharci maaha; waa mamnuuc ; Lama oggola.

clapet, n.m. — Af yar oo wax maraan.

clapotement, n.m. — Sanqadha baxda marka biyaha bash laga siiyo wax lagu dhifto.

claquer, v. — Dhirbaaxo.
claquer des mains — Sacab tumid; Sacab garaacid; u Sacbid.

clarifier, v. — Qeexid; Caddayn; Sifayn;
clarifier (terme culi--naire) — U celin; Sida Ilaahay mahad u celin.

clarinette, n.f. — Aalad la afuufo oo qalabka muusigga ah.

classe, n.f. — Fasal; Dabaqad.
classe (école) — Dugsi; Iskuul.

classer, v. — Fasalid; Dabaqad.

classification, n.f. — Kala soocid; Kala qaybid.

classique, adj. — Wax tayo heer sare ah leh; caadi ah

clavicule, n.f. — Lafta kalxanta.

clé, n.f. — Fure; Maftaax
clé à écrou — Baanad, Qalabka Boolasha lagu furo.
fermer à clef — Quful; Furayn.

clémence, n.f. — Naxariis; Dabceesanaan.

clément, adj. — Naxariis leh.

clenche, n.f. — Handaraab; Balka irridda ama daaqaadda laga xiro.

clérical, adj. — karraalinimo

client, n.m. — Macmiil; Qofka looyarka ama qareenka loo yahay.
Qof macmiilnimo meel wax uga iibsada.

cligner, v. — Indho bidhiqsi; sanqasho.

clignotement, n.m. — Il-jibin; sanqasho.

clignoter, v.	Iftiin mar yaraanaya marna weynaanaanaya.
climat, n.m.	kiliimo: hawada ; daqsiga
clinique, n.f.	Xafiiska Takhtarka; Isbitaal.
cliqueter, v.	Sameyn Cod yar: sida Jiiq-jiiq.
cloche, n.f.	Dawan (gambaleelle).
cloche à chameaux	Koor.
épée, n.f.	beeynaad soodh; mindida bunduga afkiisa ku jirto; bir adag oo ah isku darka xadiidka iyo kaarboon ama curiye kale; seef (dhuuban).
épeler, v.	yeedhis (erayo ah) xarfaha uu eraygu ka kooban yahay.
épellation, n.f.	u yeedhin.
épépiner, v.	iniin ka saarid.

éperdu, adj. — murugo xoog leh.

éperdûment, adv. — murugaysan.

éperon, n.m. — sumal; wanka aan la dhufaanin.

éphémère, adj. — waxyar (aan waqti dheer socon).

épi, n.m. — sabuul.

épiage, n.m. — sabuul bixin.

épice, n.f. — xawaash; walxaha raashinka iyo shaaha ud--gooneeya.

épicé, adj. — cuno xawaash leh.

épicer, v. — xawaasheyn.

épicerie, n.f. — dukaanka cunada kali ah laga gato

épicier, n.m. — dukaan gade; buuc sharo-gade; dukaanle; qofka daaska iibiya

épidémie, n.f. — aafo (sida daacuunka).

épidémiologie, n.f. — barashada ama cilmiga aafada sida daacuunka.

épidémique, adj. — cudurka sida daacuunka .

épiderme, n.m. — maqaarka sare ee jirka; dubka

épididyme, n.m. — xidid ku ladhan xiniinyaha oo shahwadu soo marto.

épier, v. — la socod (ilaalin si qarsoodi ah).

épierrer, v. — dhagax ka qaadid.

épieu, n.m. — tiir loo isticmaalo dabinada.

épigraphe, n.m. — erayo gaban oo aman ah.

épilation, n.f. — timo sisiibid.

épilatoire, adj. — qalab loo isticmaalo siibida timaha.

épilepsie, n.f. — sooxdin; qalal (cudur).

épileptique, adj. — qofka sooxdinta qaba.

épiler, v. — rifid; riftid baalasha digaagga gorayada iwm.

épilogue, n.m. — gabagabayn.

épiloguer, v. — faalayn; ka doodid; fasirid

épinard, n.m.	khudrad inta la shiido; lana kariyo la cuno
épine, n.f.	qadax; waa geed qodax leh.
épine dorsale	laf-dhabar (xayawaanka).
épineux, n.m;	geed qodax leh.
épinglage, n.m.	qodbin; bin ku qabasho.
épingle, n.f.	qodax; biin.
épingle de sureté	biinaan dheerdheer; biinka dharka laysugu qabto.
épinglé, adj.	qodbis.
épingler, v.	qodbid.
épinier, n.m.	qodax badan.
épinière, adj.	
moëlle épinière	xangulayda laf dhabarta ku dhex jirta.
épisode, n.m.	gogoos (sheeko ama filin).
épisodique, adj.	xilli; wakhti (qaybaha filinka= filis).
épistaxis,n.f.	goror.
épistimologie, n.f.	ibistimoloji; cilmiga run raadiska
épistolaire, adj.	habka qorista.
épistolier, n.m.	qofka aad wax u qora.
épitaphe, n.f.	qoralka xabaalaha lagu qoro
épithète, n.m.	eray magac lagu ladho.
éplucher, v.	diirid; qolof kaqaadid.
épointer, v.	qiimo daran; u jeedda la'aan; macno daran; aan lahayn wax dhibco ah (ciyaaraha).
éponge, n.f.	buush.
éponger, v.	buusheyn.
épontille, n.f.	tiir; dhidib wax lagu xoojiyo
époque, n.f.	casri.
épouiller, v.	qolof ka qaadid; diirid.
époumoner, s'.,v.	hadal badan daraadi qofka xoortooda is daalin hadaldarti.
épousailles, n.f.pl.	aroos.
épouse, n.f.	afo; oori; naaqta laqabo.
épousée, n.f.	guursi; marka qofko guursado.

épouser, v.	guursi; la guursado.
époussetage, n.m.	boodh ka qaadid; habas ka rogid.
épousseter, v.	boodh ka qaadid; jaafjafid.
époustouflant, adj.	la yaab lah.
époustoufler, v.	yaabin.
épouvantable, adj.	weyn; xoog badan; wax ku naxdin geliya; wax kaa nixiya.
épouvantail, n.m.	wax ka bajiya.
épouvante, n.f.	baqdin badan.
épouvanter, v.	bajin; ka bajin; baqo gelin.
époux, n.m.	ninka xaaska leh, guri leh
éprendre, s'.,v.	jeclaan; qofka marka u wax jeclado.
épreuve, n.f.	tijaabo; caddayn; sabab sheegid;
épris, adj.	jacayl.
éprouvant, adj.	hubsasho.
éprouver, v.	imtixaanid; tijaabin.
épucer, v.	injir iskagurid.
épuisable, adj.	lagu daalo.
épuisant, adj.	wax daaliya.
épuisé, adj.	daal; tii ugu dambaysay ay ka taagan tahay
épuisement, n.m.	daalis.
épuiser, v.	daalid; idlayn.
épurateur, adj.	makiinad loo isticmaalo kala saar saarida madooyinka; safeeye
épuration, n.f.	kala dhigdhigid, safaynta
épurer, v.	safayn sida batroolka iwm: saafi ka dhigid.
épurge, n.f.	maadola cabo oo caloosha jilicsa.
équarrir, v.	u googoyn hab barbaroole.
équarissage, n.m.	jarjarid barbaroole.
équateur, n.M.	badhaha dhulka (xariiq).
équation, n.f.	is-le'ekaansho;
équation au deuxième degré	le'eg saabley ah.

équatorial, adj. — ku saabsan wadamada dhulbadhuho maro.

équerre, n.f. — qalab loo isticmaalo sawiridda xagalada toosan

équidé, adj. — xoolo qaybta fardaha iyo dameeraha iwm.

équidistance, n.f. — isle'ekaan (masaafo).

équilatéral, adj. — saddex xagaale; saddexda barbar is le'eg yihin.

équilibrage, n.m. — isla ekayn.

équilibration, n.f. — la isla ekeeyo.

équilibre, adj. — isle'ekaan.

équilibré, adj. — isla ekaan; isu dheelitiran

équilibrer, v. — dheelitirid; isla ekeeysiin

équinoxe, n.f. — isle ekaanta habeenka iyo maalinata.

équipage, n.m. — koox isla shaqaysa.

équipe, n.f. — koox.

équipée, n.f. — qalabayn.

équipement, n.m. — qalabka askariga; qalabaynta; xafiis; iskool warshad ciidan iwm

équiper, v. — qalabayn·

équipier, n.m. — qofka ciyaartoyga ah·

équitable, adj. — isla ekaan ; caqligal; wax macquud ah ama sabab yeelan kara.

peu équitable — aan xaq ahayn; xaq maaha.

équitablement, adv. — qayb isla eg (dhaxal).

équitation, n.f. — fardo fuulis.

équité, n.f. — cadaalad.

équivalence, n.f. — isudhignaan.

équivalent, adj. — u dhigma; la qiimo ah.

équivalent, n.m. — isle'ekaan.

équivoque, adj. — shaki ah; shaki leh·

érafler, v. — xangaruufasho; la xagto

éraflure, n.f. — xagtin

éracler, v.	xangaruufo; xagtin.
ère, n.f.	muddo taariikheed.
érecteur, adj.	taagis; istaagin.
érectile, adj.	istaajin kara.
érection, n.f.	istaagid.
éreintant, adj.	daal
éreintement, n.m.	daalis.
éreinter, v.	daalid.
ergot, n.m.	suulka digaaga
ergotage, n.m.	wax aan macna lahay oo la isku diriro.
ergoter, v.	dagal aan macnu ku fadiyin.
ériger, v.	taagid; sare joojin; dhisid; xannaanayn.
ermite, n.m.	cidla ku noolasho; qofka aan jeclay in dad kale uu la noolaado
éroder, v.	naabaadguurin; xaquuq ama xaaqid ku nadiifin; xaaqis roob xoog leh intuu da'o uu labeenta dhulka ka qaado
éros, n.m.	habka ay giriigi hore ilaahay u caabudi jireen
érosif, adj.	waxa keena xoqidda dhulka (ruubka, dabaysha, iwm).
érosion, n.f.	xoqid (marka roobku do'o wuxuu kaqada labeenta dhulka korkiisa saaran).
érotique, adj.	la xidhiidha jacaylka isu tagga ninka iyo naagta (wada seexashada).
errant, adj.	aan lahayn meel loogu soo hagaago oo uu ku nool yahay; qof shaqo la'aan warwareegaya.
erratum, n.m.	sixidda khaladka la sameeyo marka wax la qoryayo ama la daabacayo
errer, v.	war-wareejis (socod) aan ujeeddo lahayn; warwareegga; aan u jeeddo lahayn
errer à l'aventure	is biimayn.
erreur, n.f.	khalad; sax maaha.
induire en erreur	hoggaan xumayn; si xun ama wax xun u horseedid.
erroné, adj.	khalad.
erse, n.f.	nooc midho ah oo u dhaw digirta.

érudit, n.et adj.	caalim; qof aqoon badan leh
érudition, n.f.	waxbarasho xeel dheer.
éruptif, adj.	burkan.
éruption, n.f.	marka ay burkaantu soo butacdo.
escabeau, n.m.	jaranjaro yar oo la qaadi karo.
escadre, n.f.	shir muhim ah oo guuto dagal qadato.
escadrille, n.f.	guuto ciidan ah (badda, cirka)
escadron, n.m.	hoorin ciidan ah.
escalade, n.f.	koritaan adag; fuulis adag.
escalader, v.	halgan; halgamid.
escalator, n.m.	jaranjaro makanika ah (iswada).
escale, n.f.	meelaha dayuuraduhu ku hakadaan si ay bansin uga qataan.
escalier, n.m.	jaranjaro.
escalope, n.f.	cad yar oo hilibka aalada ah.
escamotable, adj.	si qarsoodi ah loo tuuro.
escamotage, n.m.	tuurid ama ka saarid iyada oo aan lagu arkin.
escamoter, v.	saarid si qarsoodi ah.
escampette, n.f.	cararid.
escapade, n.f.	ka fakasho.
escargot, n.m.	xayawaan yar oo qolof leh oo la cuno.
escarmouche, n.f.	dagal yar oo labo horin isaga hortimaado
escarpé,adj.	aad u janjeedha; janjeera.
escarpement, n.m.	qar; qawraarin.
escarpin, n.m.	kabo kor ka furan oo aan cidhib lahayne.
escient, n.m.	aqoonta
à bon escient	aqoon u leh waxa u samaynayo.
esclaffer, s'.,v.	qosol.
esclandre, n.f.	qaylo; shanqadh; buuq.
esclavage, n.m.	addoonnimo.
esclavagisme, n.m.	addoonsi.
esclavagiste, adj.	addoonsadde.

esclave, n. — addoon.

escogriffe, n.m; — nin dheer oo fool xun.

escorte, n.f. — qayb gelin.

escorter, v. — ilaalin; raacid; dhawrid

escouade, n.f. — cutub yar ama koox yar oo ciidan ah

escrime, n.m. — seeftan(dagaalka seefta).

escrimer, s'.,v. — inta tabartiisa aan wax iskala harin.

escrimeur, n.m. — ninka seefta ku dagaalama

escroc, n.m. — musuqmaasuqlow

escroquer, v. — musuqmaasuqid.

ésotérique, adj. — garaado; darajo; ereyo gaar ah isticmaalis.

espace, n.m. — meel bannaan oo sidaas u sii weynayn; qol; meel.

espacement, n.m. — meel aan geedo iyo dhis midna lahayn;bannaan

espacer, v. — kala durkin.

espadrille, n.f. — kabo korka maroka ah hoostana xadhig ka ah.

espagnol, adj. — afka spanishka.

espalier, v. — geed saaq ah oo midho dhala.

espèce, n.f. — nooc; saynis; qayb ah xayawaan ama dhir oo isku qoys ah; dabaqad; jaad; naxariis.
  ê argent — naqad; bixinta lacagta.

espérance, n.f. — filitaan; rajayn;la filo·

espérer, v. — la filo; filid; rajayn·

espion, n.m. — basaas; jaajuus.

espionnage, n.m. — basaasnimo.

espionner, v. — basaasid.

espoir, n.m. — rajayn; rajo;
  plein d'espoir — rajo leh; rajo badan.
  sans espoir — rajo la'aan; rajo ma leh; bilaa rajo.

esprit, n.m. — maskax furan; wax fahmi og; ruux; naf; niyad; maan; fahmid.
  esprit épais — qofka qof kale ka hoos shaqaeeya.

esquif, n. . — doon yar.

esquimau, adj. — waa umad ku nool waqooyiga aduunka.

esquintant, adj.	daal leh.
esquinter, v.	daalid.
esquisse, n.f.	sawir-gacmeed dhakhso loo sameeyey.
esquisser, v.	sawir dhakhsaha.
esquisser un plan, une idée.	tusaalo gaban; tusmo gaaban
esquiver, v.	kafakasho.
essai, n.m.	tajrubad; ku dayid; dhudhumin; tijaabo
prélèvement d'essai	shaybaadhis
essaim, n.m.	raxan u wada socoda; shinnida shimbiraha iwm.
essaim d'abeilles	godka ama qafiska shinnida (hooyga shinnida).
essaimage, n.m.	abdinta shinnida.
essayer, v.	isku dayid ; tijaabin; ugu deeqid; u hidayn; siin; imtixaanid; tijaabin; isku dayid.
essayeur, n.m.	tijabiye.
essence, n.f.	baansiin; baasiin; baatrool.
≘ parfum	barafuun; cadar; waxyaabaha udgoon ee la' isku carfiyo
essentiel, adj.	loo baahan yahay; lagama maarmaan ah; aasaaska; gunta; waxwalba ugu horreeya ama ugu muhiimsan; nololeed; ku xiran oo lagama maarmaan u ah nolosha.
essentiel, n.m.	muhiim ah; ugu muhiimsan walax , shay; wax walba ugu horreeya ama ugu muhiimsan.
essentiellement, adv.	ugu muhiimsan.
esseulé, adj.	kali ahaan.
essieu, n.m.	birta dheer ee tayirada isku haysa
essor, n.m.	
prendre son essor	hawada loo gano.
essorage, n.m	maroojinta mariaha marka ladhago.
essorer, v.	masaxaad; nadiifin; qalajin ; maroojin
essoreuse, n.m	mashiin mariaha biyaha kasaara.
essoriller, v.	dhago goyn.
essoufflement, n.m.	neeftuur.
essouffler, s'.,v.	neeftuurid.
essuie-mains, n.m	tuwaal; shukumaan.
essuie-meubles, n.m.	marada lagu tirtiro moobilka.

essuie-pieds, n.m. — marada kabaha lagu tirtiro.

essuie-verre, n.m. — marada muraayada lagu tirtiro.

essuyage, n.m. — tirtirid.

essuyer, v. — masaxaad.

est, n.m. — bari; gorax ka soobax.

estafette, n.f. — bus yar (caasi).

estafilade, n.f. — saarid; lagu jaro (mindi af badan)

estampage, n.m. — saxiixidda; tiimbaraynta; daabicidda

estampe, n.f. — daabicaad.

estamper, v. — daabicid.

estampillage, n.m. — saxiixa farsamayaqanku ku qoro waxyabaha u sawiro.

estampille, n.f. — sixiix farshaxan.

estampiller, v. — sixiix ama calamad.

esthéticien, n.M; — qofka wax qurxiya.

esthétique, adj. — qurux.

esthétique; n.f. — qurxin.

estimable, adj. — la qiyaasi karo·

estimatif, adj. — qiyaasma.

estimation, n.f. — qiyaas ama qiimayn; u malayn qiyaaseed.

estime, n.f. — caadifad; u janjeedh; ixtiraam

estimer, v. — aad u ixtiraamid; xushmayn ama tixgelin; qiyaasid; qiimayn (male ah); qaderid; qaderin.

estomac, n.m. — calool.

estomaquer , v. — la yaab dhalisa.

estomper, s'.,v. — dhimid; yarayn

estrade, n.f. — marxalad; meesha qofka hadlayaa ama qudba--deynayaa isku taago fagaare.

estropier, v. — naafayn.

estuaire, n.m. — meesha wabigu badda kaga daro.

estudiantin, adj. — ardaynimo.

esturgeon, n.m.	nooc kalluunka ka mid ah
et, prép.	iyo.
étable, n.f.	xerada lo'da
établir, n.m.	samayn; suubin; la sameeyo; degid; dejin; qotomin; dhisid; habayn
établissement, n.m.	qoton sanaan; dejitaan; degganaansho; dejin; degmo.
étage, n.m.	dabaq ka mid ah guriga ama dhismaha fooqa ah
étagement, n.m.	dabaqadayn.
étagère, n.f.	armaajada buugta ama sheelfiska.
étai, n.m.	tiir wayn; dakhalka markabka.
étain, n.m.	macdan etan.
étal, n.m.	miiska alaabta lagu dulgato
étalage, n.m.	farsho.
étalagiste, n.m.	bandhig alaabo.
étale, n.m.	marka baddu dagantahay.
étalement, n.m.	bandhigid.
étaler, v.	firdhin; fidin; kala filqin.
étalon, n.m. cheval	heer (qiyaasid). qoodha (faraska).
étalonnage, n.m.	cabirid.
étalonner, v.	kimiko ama fiisiko; caabirid.
étampeuse, n.f.	shaambad; tigidh; shati.
étanche, adj.	biyo celinta ; biyaha celiya ama aan sii dayn.
étanchéité, n.f.	aan biyaha si daynayne.
étanchement, n.m.	biyo celin.
étancher, v.	siidayn la'aan.
étançon, n.m.	tiir; dhidib
étang, n.m.	jidhaan (biyo fariistaan); dhiijaan.
étape, n.f.	marxalad; heer; meesha markaas la marayo

état, n.m.	xaalad; waji
état oxydé	wajiga ogsidheynta.
Etat, n.m.	waddan·
étatique, adj.	dawladnimo.
étatisation, n.f.	dawladayn.
étatiser, v.	qaramayn; marka dawleddu aywax la wreegto.
étatisme, n.m.	marka dawladu habka dhaqaale soo faragaliso.
état-major, n.m.	talis guud oo cidamada.
étau, n.m.	qalab laba daan leh oo xooggan oo lagu qabto wax lagu shaqo qabanayo
etcetera, prép.	iwm (iyo wixii la mid ah).
été, n.m.	xaggaga; xilliga u dhexeeya bilaha Juun ilaa Ogosto·
solstice d'été	bilawga kululaha (21 juunyo)
éteindre, v.	damid (naalka); bakhtiin (dabka); demin
étendard, n.m.	heer.
étendre, v.	firdhin; fidin; kala filqin.
≙ couper avec de l'eau	barax; xariir
s'étendre	is kala bixin; is kala jiidid; is ballaadhin
étendu, adj.	gaadhid; tiigsad; jiif; fidin; kala jiidal; dheerayn; ballaaraan.
étendue, n.f.	sagxad·
éternel, adj.	daa'in.
éterniser, v.	ku raagid.
éternité, n.m.	wakhti ama milay aan dhammad lahayn.
éternuement, n.m.	hindhiso.
éternuer, v.	hindhisid
étêtage, n.m.	madax ka jaridda geedka.
étêtement, n.m.	laga jaro geedka inta kore.
étêter, v.	madax ka jarid.
éthane, n.m.	Etan (kimiko).
éthiopien, adj.	nin dhalashadiisu tahay Etobian.

ethnique, adj.	jinsi; jinsiyadaha bani-aadamka.
ethnologie, n.f.	cilmiga barashada qaybaha dadka.
éthologie, n.f.	cilmiga dhaqamada.
éthyle, n.m.	(kimiko) ka yimid etan C_2H_5.
éthylisme, n.m.	lagu sumoobo khamrada
étiage, n.m.	heerka ugu hooseeya ee biyaha wabiga.
étincelant, adj.	dhalaal kulul ama dhimbila.
étinceler, v.	dhinbiileyn ; dambabureyn.
étincelle, n.f.	dhinbiil (falliidh dab ah).
étioler, v.	weydayn
étiologie, n.f.	cilmiga badhista cudurada.
étique, n.f.	wayd.
étiquetage, n.m.	calaamadayn.
étiqueter, v.	calaamadin.
étiqueteur, n.m.	gofka wax calaamadeeya (ninka).
étiqueteuse, n.f.	naagta wax calaamadaysa.
étiquette, n.f.	calaamad; qoraal lagu dhajiyo waxyaabaha la dirayo oo caddaynaysa meeshu wuxu ka yimaa--deen iyo meesha ay u socdaan
étirable, adj.	jiidmi karo; kala bixi kara.
étirage, n.m.	jiidmo; iskala bixis.
étirement, n.m.	iskala bixin; jimicsi.
étirer, s'.,v.	jimicsi.
étoffe, n.f.	hab dhar samayneed (sida warshadda dharka ee balcad); dhar; maro
étoile, n.f. dormir à la belle étoile	xiddig; banaan seexasho.
étonnant, adj.	la yaab leh.
étonnement, n.m.	la yaabid.
étonner, v.	aad u yaabid; aad ula yaabid.

étouffant, adj.	cabudhin.
étouffée, n.f.	cunada marka lagu kariyo bokhar.
étouffement, n.m.	la cabudhiyo.
étouffer, v.	neef-qabatow; ku saxadka; ku mirgasho; ku saxasho.
étourderie, n.f.	qofka aan fiirsan fal horti; aan fekirin.
étourdi, adj.	aan maas'uul ahayn; mas'uul ma aha; aan looga fekerin; xilkasnimo la'aan
étourdir, v.	fal aan fakar lahayn.
étourdissement, n.m.	miyir beel gaaban.
étrange, adj.	yab; fajac; aan hore loo arag.
étrangement, adv.	si aan la arki jirin.
étranger, adj.	qof qalaad oo qariib ah; ajnabi qofka dal shiisheeye jooga; dibadda (dadka gudihiisa maaha) qaalad.
étranglé, adj.	ceejis; cuno qabatayn; marjis
étranglement, n.m.	ceejinta; cuno qabataynta; marjinta
étrangler, v.	ceejin (cuno ama hunguri ceejin). isku uruurin; isku xejin; isku yareyn; isku cidhiidhid, cuno qabad lagu dilo; cunaha la qabto.
étrangleur, n.m.	qofka dadka ceejiya; marjiya
étrave, n.f.	madaxa markabka
être, v.	jirid; ahaan;
étant	jiritaan; jira.
être plus nombreux	ugu badnida ahaan
être utile	faa'ido leh
être debout	taagnaan
être dessous	hoos jiifsasho.
être, n.m.	jiritaanka; ahaanta
étreindre, v.	marka qof aad isku duubto marka aad salaamayso.
étreinte, n.f.	isku duubid.
étrenne, n.f.	u feestayn arin dhacday marki ugu horay.
étrenner, v.	la falo ama la sameeyo markii ugu horaysay.
étrier, n.m.	ganjada faraska dhiniciisa ka laalada oo lugta lagashado; rakaab

étriller, v.	ulayn; karbaashid.
étriper, v.	calol ku jirta marka nefka laga saaro.
étriqué, adj.	cirriri; aan ballaarnayn.
étude, n.f.	wax-barasho.
salle d'études	qolka wax barashada; qolka wax lagu akhristo.
étude du soir	wax barashada habeenki
cycle d'études	aqoon-is weydaarsi; siminaar wax barasho gaaban.
directeur d'études	maamule wax barasho
bourse d'études	deeq wax barasho.
étudiant, adj.	qofka jaamacadda ku jira ee aan qaadan shahaadodii uu jaamacadda kaga qalin jebin lahaa; arday (siiba ka jaamacadda dhigta).
étudiant licencié	wax barashade iwm ee la qabto qalin jibinta ka dib; arday jaamici ah
étudiant après la maîtrise	arday diyaariya P.H.D.
étudier, v.	barad; barasho; is baris; waxbarasho; waxis barid.
≙ faire des recherches sur...	baadhid (dembi iwm).
étui, n.m.	galka ·
étui à pistolet	galka baastoolada·
étui à lunettes	galka indhagashiga.
étui à cigarettes	sigaar-xajis (dhuun).
étuve, n.f.	qol aad u kulul.
étuver, v.	foornayn.
étymologie, n.f.	cilmiga aqoonta asalka kalmadaha.
étymologique, adj.	la aqoonsado asalka ereeyadu halka ay ka soo jeedaan.
eu, part.passé.	lahaa.
eunuque, n.m.	ninka dhufaanka ah.
eurocommunisme, n.m.	kumunismka reer yurub.
euromissile, n.m.	sawaarikhda reer yurub.
euromonnaie, n.f.	lacagta reer yurub.
européanisation, n.f.	la yurubeeyo.
européaniser, v.	yurubayn.
européen, adj.	qof reer yarub ah.
euthanasie, n.f.	qofka dhaqso udhinta isaga oo aan sakaraadin.
eux, pron.pers.	iyaka
évacuateur, adj.	qofka wax saara, ka bixiya; ka qixiya

évacuation, n.f. — bannayn; ka bixin; qixin.

évacuer, v. — faaruqin; madhin; bannayn.

évadé, adj. — qofka fakada (xabis ka fakada).

évader, s'.,v. — baxsada.

évaluable, adj. — qiimo leh; anfac leh.

évaluation, n.f. — qiiyas; qiimayn; u malayn; qiyaasidda

évaluer, v. — qaderid; qaderin; qiyaasid; qiimayn (male ah).

évangélique, adj. — krishtaannimo.

évangélisation, n.f. — krishtamin.

évangile, n.m. — injiil diinta krishtaanka.

évanouir, s'.,v. — libdhid; suurid.

évanouissement, n.m. — miyir beelid.

évaporable, adj. — karkarikara; noqon kara qaac.

évaporation, n.f . — uumiyow.

évaporé, adj. — uumi noqosho.

évaporer, v. — uumiyoobid.

évapotranspiration, n.f. — biyaha geedaha ku jira intooda uumiga u rogmata.

évasé, adj. — balaadhan; furan.

évasement, n.m. — balaadh.

évaser, v. — balaadhis.

évasif, adj. — ka jawabid la'aan.

évasion, n.f. — fakasha; baxsasho.

éveillé, adj. — feejigan; digtoon.

éveiller, s'.,v. — laga tooso hurdada

évènement, n.m. — arin dhacda oo muhiim ah.

évent n.m. — marka kalluunku uro (duqow awgi); daloolka nibiridu ku lee yahay qadaadka oo uu ka neef--sado

éventail, n.m. — babbis

éventer, v. — dabayl u dhigid; shaaca ka qaadid (sir)

éventreur, n.m. — qofka dadka dooxa

éventualité, n.f. — wixii taagan markas.

éventuel, adj.	suuro gal.
éventuellement, adv.	suuro gali kara
évêque, n.m.	wadaad(diinta krishtaanka).
évertuer, s'.,v.	isku dayid.
éviction, n.f.	xuquuq waayid.
évidemment, adv.	hubaal ah.
évidence, n.f.	la hubo.
évident, adj.	qeexan; u cad (indhaha iyo caqligaba u qeexan); la dareemi karo; la taaban karo; iska cad oo la fahmayo; shaki la'; aan lagu khaldami karin.
évider, v.	qodid.
évier, n.m.	waaskada weelasha lagu dhaqado.
évincement, n.m.	ka fogayn; ka dheerayn.
évincer, v.	fogayn.
éviscération, n.f.	laga fogeeyo.
évitage, n.m.	is hortaagidda; ka hortaga
éviter, v.	ka hortag; is hortaagid.
évocable,adj.	la sooqaadi karo laga hadli karo.
évocateur, adj.	qofka arinta soo qooda.
évocation, n.f.	xusuusiin; soo noolayn wax tegay
évoluer, v.	horummarin
évolutif, adj.	horay u kac yeelan kara.
évolution, n.f.	horukaca
évoquer, v.	ka hadlid; soo qaadid.
exact, adj.	si sax ah; saxid; hagaajin; khaalad ka reeban (sax ah); sax; run ah; waa dhab; waa saas.
=ponctuel	aan ka soo hor marin kana dib dhicin wakhtiga.
=précis	si sax ah loo sheegay.
exactement, adv.	la hubo; hubal ah.
exaction, n.f.	wax khasba; ku khasbidda qof wax aan sharci ahayn
exactitude, n.f.	aan ka soo hor marin kanadib dhicin wakhtiga.
exagération, n.f.	buunbuunin.

exagéré, adj.	buunbuunis.
exagérer, v.	buunbuunin; la buunbuuniyo; (runta laga sii baahiyo ama wax lagu sii kordhiyo).
exalter, v.	aad u ammaanid.
examen, n.m.	imtixaanka; imtixaan.
composition d'examen	xaashida ama warqaada imtixaanka
examiner, v.	dhawris; hubsiimo ah; imtixaamid; baadhid (dembi iwm).
≙ fouiller	baadhis; raadin; qodid; faagid
≙inspecter	kormeerid.
exaspérant, adj.	ka cadhaysiiya.
exaspérer, v.	ka cadhaysiin.
exaucer, v.	gaadhsiin ujeedo.
excavateur, n.m.	makiinad godka lagu qodo.
excavation, n.f.	qodid; la qodo.
excaver, v.	qodid ama daloolid dusha ama dabool ka qaad.
excêdent, n.m.	kabadnaan; inti loogu talagalay ka badan.
excêdent de travail	shaqo dheeraad ah.
excêdentaire, adj.	ka badan soo saarid.
excéder, v.	ka badin; siyaadin; kordhin.
excellence, n.f.	darjo sare oo loogu yeedho madaxda.
excellent, adj.	aad u wanaagsan; aad u fiican.
exceller, v.	fiicnaan; wanaag.
excentration, n.f.	badhtamo wareejin.
excentrique, adj.	cajiib ah; caqli gali karin.
excepté, prép. et adj.	moyee; maahee.
excepter, v.	moyee; maahe.
exception, n.f.	ka reebid; aan ku jirin ama ka tirsanayn.
excès, n.m.	xad dhaaf; ka badan.
excessif , adj.	badan; aad u badan; la heli karo xad dhaaf ah
exciser, v.	gudid (gabdhaha)

excision, n.f. — gudmo; gudidda gabdhaha

excitable, adj. — laga xanaajin karo; laga cadhaysiin karo

excitant, adj. — hordada ama cajiska biiya.

exciter, v. — arbushid; niyad kicin; dareen kicin; ka cadhaysiin; laga caraysiiyo; dedejin·

exclamer, s'.,v. — qaylo kedis ah oo yaab leh·

exclure, v. — ka reebid; mooyee; ka ilaalin; maahee; ka celin.

exclusion, n.f. — ka eryid; cayrinta (sida dugsiga).

exclusive, n.f. — gaar ah.

exclusivement, adv. — gaar ahaan.

exclusivité, n.f. — lagu kaliyaysto.

excommunication, n.f. — ka saaridda qof urur diineed

excommunié, adj. — laga saaro dariiqada

excommunier, v. — diinta ama dariqada laga saaro.

excrément, n.m. — saxaro.

excréter, v. — qashin saarid (jidhka)

excrétion, n.f. — qashiin saarka jidhka.

excroissance, n.f. — tuluxda ama burada dadka ama xoolaha ka soo baxda.

excursion, n.f. — maalin joog; fasax tegid; socdaal.

excuse, n.f. — raalli gelin.

excuser, v. — cudur daarasho; raallin gelin; meeldhac ka soo noqod

exécrable, adj. — waxa xun qofka ka hela.

exécration, n.f. — ka helid waxa xun.

exécrer, v. — necbaysatid; aad u nacdid; kardhid.

exécutable, adj. — la fulin karo.

éxécutant, n.m. — qofka wax fulinaya.

exécuter, v. — fulin.

exécuteur, n.m. — u xil saaran in uu arin fuliyo

exécutif, n.m. — wasiireed; xil-wasiireed ama wasiirnimo; jago wasiirnimo; awood fulin leh

exécution, n.f. — fulinta; hirgalinta

exégèse, n.f. — fasiraad, naxwo

exégète , n.m. — qofka wax fasira (naxwada)

exemplaire, adj. — tusaale loo qaadan karo; lagu dayan karo.

exemplarité, n.f. — dabeecada qofka lagu dayan karo.

exemple, n.m. — tusaale·

exemplifier, v. — fasirid iyada oo tusaalo la qaadan karo.

exempt, adj. — sarkaal boolis ah

exempté, adj. — cafis ; laga cafiyo.

exempter, v. — ka cafiyid; ka dhaafid; ka dayn

exercer, v. — ku celcelin wax qabasho.
exercer une pression — maroojin.

exercice, n.m. — layli; jidh kala bixin; gacan ka qabasho; hawl gacmeed; gacan ku falis.

exerciseur, n.m. — makiinad jimnaastiiga lagu sameeyo.

exfoliation, n.f. — caleen ka dhicidda geedka.

exfolier, v. — caleen dhicid

exhalaison, n.f. — ur.

exhaler, v. — neef saarid·

exhausser, v. — kor u qaadid.

exhaustif, adj. — ku xeeldheeran maaddo.

exhiber , v. — soo bandhigid; soo saarid; dhalid; la soo saaro; tusid.

exhibition, n.f. — mujin; bandhigid.

exhibitionnisme, n.m. — is qaawin·

exhortation, n.f. — geesinimo galin.

exhorter, v. — ku guubaabin; ku geesinimo galin.

exhumation, n.f. — xabalka soo saarid.

exhumer, v. — qof dhintay oo xabasho laga soo bixiyo.

exigeant, adj. — qofka wax khasba.

exigence, n.f. — khasab.

exiger, v. — khasbid; lagu khasbo.

exigible, adj. — khasab noqon karo.

exigu, adj. — aad u yar.

exil, n.m. — masaafurid; dibed u caydhin.

exilé, adj. — masaafurin.

exiler, v. — isgo'doomin; is karantiimayn.

existant, adj. — wax jira.

existence, n.f. — jiritaan;
moyens d'existence — habka nolosha; macnaha nolosha.

exister, v. — jira; mawjuud ah; jirid.

exode, n.m. — qax ka bixid; ka cararid.

exogène, adj. — ku samaysma banaanka.

exonération, n.f. — ka cafin; ka dhaafidda

exonérer, v. — cafin.

exorbitant, adj. — ka nixin aad u axmaq ah; xishmad daran.

exorciser, v. — jinka bixin; furdaamin.

exotisme, n.m. — wixii kayimaada wadan ama dhul shisheeye.

expansible, adj. — waynaan kara; balaadhan kara.

expansif, adj. — balaadhmi kara.

expansion, n.f. — fidid; fidis; fiditaan; kala bixis.

expansivité, n.f. — is-fidin.

expatriation, n.f. — ka eryid; ka saarid (qofka marka dhulkiisa laga eriyo).

expatrier, v. — qof dalkiisa laga eriyo.

expectative, n.f. — maskax ku sii hayn; rajayn; la filo; la sii dhowro.

expédient, n.m. — hab; tab

expédier, v. — dir; dirid; dirto; u dirid; loo diro; la diro.

expéditeur, n.m. — dire.

expéditif, adj. — dirmi kara

expédition, n.f.	sahan;
expédition punitive,	duulaan.
expéditionnaire, adj.	u xil saaran dirida.
expérience, n.f.	tijaabo.
expérimental, adj.	tijaabo ah.
expérimentateur, n.m.	qofka tijaabad sameeya.
expérimenté, adj.	khibrad leh.
expérimenter, v.	imtixaanid; tijaabin.
expert, n.m.	qof khibrad iyo waayo aragnimo leh; khabiir.
expier, v.	ciqaabid
expirant, adj.	dhamaanaya.
expirer, v.	khaayis; wakhtigiisii dhamaaday
explicable,adj.	la fasiri karo.
explicatif, adj.	fasiraya; macnaynaya.
explication, n.f.	sharax.
explicitation, n.f.	fasiraad; sharax.
explicite, adj.	cad; muuqda; qeexan.
expliciter, v.	cadayn; fasirid.
expliquer, v.	sharxid; sifayn; sifayn leh; tusaalooyin iyo sawiryo; tarjumid; ka tarjumis.
exploitation,n.m.	
exploitation agricole	beer abuurasho.
exploitation minière	macadan qodasho.
exploiter, v.	dhiigmiirasho; ku dul noolaansho dhiigmiirad.
exploiteur, n.m.	dhiigmiiradka; dhiigmiirte.
explorateur, n.m.	baadhe; soosaare.
explorer, v.	dalmarid (cilmi baaris ah).
exploser , v.	qarxid; furka-tuuris.
exploseur, adj.	makinad wax qarxisa.
explosible, adj.	qarxi karta.
explosif, adj et n.	qaraaxad ama miino.
explosion, n.f.	qarax (sanqaar weyn leh).

export, n.m.	dibedgeyn; banaanqayn (beecmushtar) banaan u iibgayn.
export de capitaux	dibedgeynta kabitaalka.
exportable, adj.	banaan loo iibgayn karo.
exportateur, n.m.	banaan u iib geyn.
exporter, v.	dibad u dhoofin (alaabo).
exposant, n.m.	qofka wax soo bandhiga.
exposé, adj.	sabab u yeelid; sabab leh.
exposer, v.	dabool ka qaadid.
exposer au danger	khatar gelin; sigid.
exposer de nouveau	sheegid mar labaad.
exposition, n.f.	bandhigidda; la soo bandhigo
exprès, adv.	u kas; loola kaco; ula kac
express, n.m.	degdeg ah (ekisbarees).
expressément, adv.	degdegidda; dhaqsaha
expressif, adj.	sharxid; sheegid.
expression, n.f.	la xiriira naxwaha (erayo ka mid ah weerta oo macna gaar ah samayn karin).
exprimer, v.	sharxid, sheegid.
expropriateur, n.m.	lagala wareegay wixisii.
expropriation, n.f.	dhaxal wareejin.
exproprier, v.	dhaxal wareeg.
expulsé, adj.	masaafurin.
expulser, v.	casilid; martab ka qaadid.
expulsion, n.f.	ka saarid; ka eriyid.
exquis, adj.	macan badan.
exsangue, adj.	dhiigbax.
extasier, s'., v.	qushuucid.
extension, n.f.	fidis; kala bixis; si yaadin.
extérieur, adj.	dibad; dul; guudka; oogo; dibadda; xagga dibedda ka sare; wax isku hoos jira ka sare ee dhexda ka fog.
extérieur, n.m.	dibadda; xagga dibedda.
extérieurement, adv.	ka baxsanaan.

extériorisation, n.f.	la is qufo.
extérioriser, v.	is qufid; is fasirid.
extériorité, n.f.	banaan ka joogid.
exterminateur, adj.	cidhib tire.
extermination, n.f.	la cidhibtiro
exterminer, v.	cidhib tirid;baabi'in; dhammayn
externat, n.m.	banaanka kaga nool ama wax kabarta.
externe, adj.	dibedda; ka sare; wax isku hoos jira ka sare ee dhexda ka fog.
extincteur, n.m.	dabka lagu damiyo.
extinction, n.f.	damis.
extirper, v.	cidhib tirid; xidid u saarid.
extorquer, v.	xoog ku qaadasho; faramarooqsi.
extorqueur, n.m.	qofka faramarooqsi wax ku qaata.
extorsion, n.f.	laga fara ma rooqsado.
extra, préf. et adj.	wanaagsan.
extraction, n.f.	kala soocid.
extrader, v.	isa siin.
extradition, n.f.	fakad celinta
extra-fin, adj.	dhuuban.
extra-fort, n.m.	xoog leh.
extraire, v.	siibid; soo saarid
extraire une dent	ilig siibid
extraire un métal par fusion	dhalaalinta birta (kala soocidda).
extraordinaire, adj.	qayracaadi; si aad u xad-dhaaf leh.
extra-utérin, adj.	ilmaha minka banaankiisa ku samaysma
extravagance, n.f.	nin waalan dabeecadi.
extravagant, adj.	nin waalan.
extravaguer, v.	leh fal aan fakar lahayn.
extrême, adj.	heerka ugu sareeya; dacalada ugu shisheeya; meesha ugu fog; ugu shisheysa.
extrémité, n.f.	caarad sida faraha caaraddooda

F

fable, n.f.	sheeko baraley; ku tidhi kuteen sheeko khiyal ah.
fabricant, n.m.	wax sameeya; wax soo saara.
fabrication, n.f.	samaynta
fabrique, n.f.	warshad.
fabriquer, v.	wax soo saar; samayn qalab ; soo saarid; dhalid;
fabuler, v.	khiyal samayn.
façade, n.f.	waji ama dhinac badana aan dhuub nayn.
face, n.f.	jibbar; waji; soo jeed
cubique face centrée	saddex jibbarane bar xudunle.
en face, face à	horey ahaan.
facétieux, adj.	qofka kaftanka ka hela ama kaftama.
facette, n.f.	waji; dhinac.
fâcher, v.	cadhoonaya; cadhaysan.
fâchèux, adj.	xumaato keena
facile, adj.	hawl yar; aaan adkayn; diyaar; sahlan.
parole facile	aftahan; hadal kar.
facilement, adv.	fudayd ahaan.
facilité, n.f.	fududayn.
faciliter, v.	fududays.
façon, n.f.	jidka ama sida ay wax u qabsoomaan ama u dhacaan; sida uu qofku ula dhaqmo dadka kale; qaab; hab
de toute façon	si kastaba.
de cette façon	sidaas oo kale.
façonnement, n.m.	habayn.
façonner, v.	samayn; suubin; la sameeyo.
facteur, n.m.	ninka boostada.
≙ cause	sabab; xaaladaha
facteur de production	xaaladaha tacabka
faction, n.f.	askariga waardiyaha ah (ilaaliyaha).
factionnaire, adj.etn.	askariga waardiyaha ah (ilaaliyaha).
facture, n.f.	muuqaal; biil; wax macmiil loo qaato oo wakhti logu bixiyo.

faculté, n.f.	kulliyad; quwad; awood; garasho; fahmad
lecteur de faculté	bare aan rasmi ahayn
fadaise, n.f.	aan caqliga gelin karin.
fade, adj.	macno daran; ujeeda la'aan.
fadeur, n.f.	qaf aan waxba ahayn; macno lahayn.
fagot, n.m.	xaabada; qoryaha la shito.
faible, adj.	saaqid; laciif; yar oo caato ah; xoog daran; damiin ; yar aan weynayn; tamar-daran.
faiblesse, n.f.	dabacsanaan; jilicsanaan;
faiblir, v.	dabcin.
faignant, adj. et n.	caajis; hawl necbi; wahsi badan
faille, n.f.	jab; dilac.
faillir, v.	dhicid; saaqidid.
faillite, n.f.	khasarid.
faim, n.f.	gaajo; baahi.
endurer la faim	macaluulid.
fainéant, adj. et n.	caajis; hawl necbi; wahsi badan
faire, v.	qabo ama fal wax yeel samayn; suubin; la sameeyo.
faire savoir quelquechose partout	warfaafinta.
faire chorus	isku raacid (arin)
faire parvenir	dir; dirid ; dirto; u dirid; loo diro.
faire sauter	qarxid sanqadn weyn leh.
faire concurrence,	tartamis; beratan.
faire cuire	kariye; la kariyo.
faire naitre une idée	qasdiyid; niyeyn; arrin soo jeedin ama soo bandhigid.
faire de l'œil	ku dhaygagid (eegid).
faire remarquer	u fiirsasho; loo fiirsado.
faire du mot à mot	tarjumid; qeexid.
faire détonner	qarxid sanqadh weyn leh.
faire paraitre	ogeysiin dadweynaha; daabicid (buug, wargeys,iwm).
faire venir	u yeedhis; wacid; isku yeerid.
faire l'énergumène	is tustus; iska yeelyeel
faire suivre le courrier	raad raacid cinwaankii hore
faire l'éloge de quelqu'un	amaanid; amaanis; la amaano.
faire lever le gibier	soo qixiya ugadha (si loo ugaadhsado)
faire route	dhoofid; saafid
faire tourner	ku warwareejin; ku meerid.

faire, v. (suite).	
faire le point	ku celin; dulmarid; marlabaad.
faire pousser	la beeray; la koriyey.
faire de l'escrime	seeftan (dagaalka seefta).
faire une piqûre	irbadayn; durid
faire un mauvais emploi de quelque chose	si xun u isticmaalid.
faire la guerre	dagaal samayn; dagaalamid
faire attention	tix-gelin; ka digtoonaan; ka taxadarid
faire un signe de la tête	madax ruxid; marka haa u jeedid ee madax hoos loo dhigo.
faire le tour de quelque chose	soo koobid; soo dulmarid; fasiir ka bixin gaaban
faire-valoir, n.m.	tacab soo saaridda
faisable, adj.	la yeeli karo; la qaban karo; la suubin karo.
faisceau, n.m.	shucaac
fait, n.m.	dhab; xaqiiq; run.
faite , n.m.	horumar heerka ugu sarreeya;figta, halka ugu dheer; shir heer madaxweyneyaal ah.
falaise, n.f.	fiiqa ama caarada dhagax weyn (siiba cirif--yada badda).
falloir, v.	ku waajibay.
falot, n.m.	feynuus
falsificateur, n.m.	qofka wax aan sharci ahayn sameeya sida lacagta, xaashiyaha.
falsification, n.f.	wax isdaba marin.
falsifier, v.	wax is dabamaris; is weydaarin
famé, adj.	caan ah
famélique, adj.	la xidhiidha jinka.
fameux, adj. -	wax qiimo weyn leh; macduun ah; aan had iyo jeer jirin ama la araq; naadir.
familial, adj.	qoys ahaan.
familiariser, v.	qoysnimo.
familiarité, n.f.	saaxiibnimo; qoysnimo.
familier, adj.	ku caan ah·
peu familier	aan la aqoon; caan maaho.
famille, n.f.	qoys; xaas.
nom de famille	magac uu qof caan ku yahay ama looga yaqaan qoyskooda.

famine, n.f.	gaajo; macaalul; abaar.
fanal, n.m.	tiriigga,
fanatique, adj. et n.	qofka qiiro weyn u haya diin; xusbi wax dhacay iwm.
fanatiser, v.	kabadbadin; dhaafa xadka caadiga
fanchon, n.m.	shaash ; malkhabad, qambo dumar (ta madaxa).
fanon, n.m.	macal; ilkaha neberiga
fantaisie, n.f.	iska yeelyeel·
fantasme, n.m.	iska yeelyeel ah.
fantastique, adj.	la yaab leh.
fantôme, n.m.	cirfiid; shaydaan.
farce, n·f.	kedis (sida barnaamijka kedis).
farceur, n.m.	qofka kaftanka badan leh; qofka maada badan.
farcir, v .	hilib iyo khodaar la isku dhexkariyo.
fardeau, n.m.	culays·
farder, v.	midabayn (wajiga)
farfelu, adj.	waalan; wajaqsan.
farine, n.f.	daqiiq; bur·
fariner, v.	daqiijin.
farouche, adj.	cadha kulul; dabci adag; dadka kacarara.
fasciner, v.	ka helid; jeecayl.
fascisme, n.m.	faashiismada.
faste, n.m.	muujin wax qiimo leh
fastidieux, adj.	wax dhiba; murugo keena
fatal, adj.	khasaaro.
fatalité, n.f.	khasaaro leh.
fatigant, adj.	wax daalinaaya (waa hadal wax daalinaaya).
fatigue, n.f.	tabcaan; aad u daalan·

fatiguer, v. daalid; tabcaamid.

fatras, n.m. wax kala jaad ah oo isku raasan

faubourg, n.m. hareeraha ama agaarka magaalada.

fauchage, n.m. goynta; xadidda

faucher, v. xadid.

faucheur, n.m. qofka wax xada; tuug.

faucille, n.f. mindi gaar ah oo qaloocda oo beera lagu jaro.

faucon, n.m. shimbir indho fiican oo dheereeya ama fudud, si fiicana wax u ugadhsada

faute, n.f. khalad; sax maaha.

fauteuil, n.m. kursi-dheere (jiimbar).

fautif, adj. dambiile; qofka khalad gala.

fauve, n.m. deero (ugaadh).

faux, adj. khalad; been; run maaha.

faux, n.f. mindi gaar ah oo qaloocda oo beera lagu jaro.

faveur, n.f. tix-gelin; taagerid naxriis leh

favorable, adj. ugol; raali ka ah.

favori, adj et n. qofka ama shaygu si aad ah loo jecel yahay ama qof u jecel yahay.

favoriser, v. dallacsiin; horu-dallicin.

fébrile, adj. feebaro; qandho.

fébrilité, n.f. feebaro leh; qandho leh.

fécal, adj. saxarada;xaarka; wasakhda gadaal ka baxda.

fécond, adj. nafaqo leh; nafaqo ah (ciidda, dhulka, dhirta); wax soo saari kara; wax dhalin kara.

fécondateur, adj.et n. dhali kara; rimi kara.

fécondation, n.f. rimidda

féconder, v. rimin; uurayn.

fécondité, n.f. rimi kara; wax soo saari kara

fédayin, n.m. naftood hurayaal; fidaa'in.

fédéral, adj.	isku dar; isku dhaf; isku dar laba dal ama laba dowladood (mid laga yeelo)
fédéraliser, v.	isku dar; rijin ama dal isku darid.
fédératisme, n.m.	isku dar; midayn.
fédération, n.f.	isku dumid.
fée, n.f.	naag aad u caqli badan.
feindre, v.	iska yeelyeelid; matelid; iska dhigid.
feinte, n.f.	iska yeelid.
feldspath, n.m.	macdan faldisbat
fêlé, adj.	waali yar.
fêler, v.	dilaacid.
félécitation, n.f.	tahniyad; hambalyo.
félicité, n.f.	hambalyeenta.
féliciter, v.	tahniyadeyn; boogajin; hambalyayn.
félidés, n.m.pl.	nooc naaslayda ka mid ah oo hilibka cunta.
félin, n.m.	jalaqsanaan; jiljilicsanaan.
fellaga, n.m.	budhcad; falaago ; shufto.
fellah, n.m.	qofka beerta qota.
félon, n.m.	khaa'in.
femelle, n.f.	iyada; qofka dheddigga.
féminin, adj.	dheddig; dheddigood ah.
féminiser, v.	naagayn; dabeecad naag leh.
féministe , adj.	xoquuqda naagaha difaaca
femme, n.f.	afo; oori; dheddig; naagta la qabo.
jeune femme	naag da'yar
femme de chambre	booyeyso (jaariyad).
femme mal soignée	basari; baali;
fémur, n.m.	lafta bawdada.
fenaison, n.f.	xiliga caws goynta
fendre, v.	kala jarid; kala goyn;
fendre à la hache	gudin ku jarid; ku goynta ama ku jaridda (looxa, cadka iwm) faaska ama gudinta.
fenêtre, n.f.	daaqad; dariishad.

fennec, n.m. — nooc dawacada ka mdi ah oo lamadagaanada ku nool.

fente, n.f. — dalool yar ama dhilaac oo derbiga ku yaal;

jeexdin aan daloolin oo wax laga ridi karo; kala jabis; dilaac.

féodal, adj. — fawdal.

féodalité, n.f. — fawdalnimo.

fer, n.m. — bir; xadiid
  marquer au fer — summad; calaamad; maddane; birta wax lagu sunto.

férié, adj. — fasax.
  jour férié — maalin fasax ah.

ferme, adj. — adkaan ; adag; qalafsan; xidhan; adaagoon dhaqdhaqaaqayn; xoog leh

ferme, n.f. — beer (lagu beero xabuubka, heeda iwm) ama daaq ka baxo oo xoolaha la daajiyo.
  ferme d'état — beerta dawladda.
  ferme collective — beerta iskaashatada.

fermentation, n.f. — khamiirin.

fermer, v. — xidhid; oodid; albaabid; furayn; gufayn; jufid

fermeté, n.f. — adkaan; xoog leh.

fermeture, adj. — xiritaan.
  fermeture éclair — silsiladda surwaalka lagu xidho

fermier, n. — shaqaalaha beertada; beeraley.
  fermier de collectivité — beeraley is kaashato.

féroce, adj. — badow; debad galeen ah; waxshi ah; axmaq ah

férocement, adv. — si waxshinimo ah.

férocité, n.f. — waxshinimo.

ferraille, n.f. — biro aan loo baahnayn (qashin ah)

ferrailler, v. — seeftan

ferrer, v. — bir galin sida marka faraska qoobka birta loo galiyo.

ferreux, adj. — bir leh; bir ka samaysan.

ferroviaire, adj. — ku saabsan xadiidka tareenku maro.

fertile, adj. — nafaqo leh; nafaqo ah (ciidda, dhulka, dhirta).

fertilisant, adj. — barwaaqeeye.

fertilisation, n.f. — barwaaqayn.

fertiliser, v. — nafaqayn ama digo ku shubid (ciidda).

fertilité, n.f. — barwaaqada.

fervent, adj. — niyo furan; dhab ah.

ferveur, n.f. — qalbi wanaagsanaanta

fesse, n.f. — badhida dadka sal ahaan, sal.

fessée, n.f. — dabada ka dharbaxidda

fesser, v. — dabo ka dharbaaxid

festin, n.m. — diyaafad; casuumad weyn.

festival, n.m. — Iid (sida iidda carafo oo kale)

fêtard, n et adj. — qofka nolol wanaagsan ku nool;

fête, n.f. — diyaafad; casuumad weyn ; dinta ku sugan; iid.

fêter, v. — dabaaldegid; damaashaadid.

fétiche, adj. et n. — sixir; falfal

fétichisme, n.m. — sixirka; falka.

fétichiste, adj. et n. — qofka sixirka sameeya; sixirlow.

fétide, adj. — ur leh; gudhmuun.

feu, n.m. — dab (ka wax lagu karsado ama wax guba).
- en feu — gubanaya; dabka dul saaran.
- feu de signalisation — kala hore (semaaforo).
- crochet à feu — faraley (xashiishka yaa lagu ururiyaa).

feuillage, n.m. — caleemaha geedka

feuille, n.f. — caleen; warqaad; xashi; baal
- feuille de chou (journal) — joornaal; wargeys; jaridad

feuille-morte, adj. — caleen dhimatay; caleen qala shay.

feuillet, n.m. — xaashida yar ee daabacan ee wax sifaynaysa

feuilleter, v. — aad u eegid; egmada ku celcelin.

feuilleton, n.m. — googoos filin ama sheeko

feulement, n.m. — cida shabeelka

feuler, v. — ciyid shabeel.

fève, n.f. — digir

février, n.m. — bisha labaad ee sannadka miilaadiga; febraayo.

fiacre, n.m. — gaadhi faras

fiançailles, n.f.pl. — gabadh iyo wiil marka la isu doono.

fiancé, adj. et n. — gof doonaan (gabadh ama wiil).

fiancer, v. — doonid gabadh ; ballan qaadid guur.

fiasco, n.m. — khasaro; dhicid.

fibre, n.f. — xadhko dhuudhuuban oo jidhku ka samaysan yahay.

fibreux, adj. — xadhko yaryar leh.

fibrome, n.m. — tulux ama buro ka soo dhexbaxdha xadhkaha dhuudhuban ee ay oo gadu ka samaysan tahay.

ficelage, n.m. — la xidho.

ficeler, v. — xadhig lagu xidho; xidhid.

ficelle, n.f. — xarig; khayd.

fiche, n.f. — xaashi yar oo warbixin leh

ficher, v. — warbixin (qoraal)
ficher le camp — bax; orod; carar.

fichier, n.m. — xaashio yaryar oo la isu soo uruuriyeyoo wax ku qoranyihin.

fichtre, interj. — aga! now! dheega!

fichu, adj. — aad u xun.

fichu, n.m. — garbo saar.

fictif, adj. — aan dhab ahayn.

fiction, n.f. — khayaali ah.

fidèle, adj. — dhabta ah; mukhliska ah.

fidélité, n.f. — ogolaan; raacsanaan.

fiduciaire, adj. — loo xil saaray.

fief, n.m. — lacagta ujuurada ah;ujuuro; rusuum.

fieffé, adj. — xumaanto halka ug saraysa; xumaan badan.

fiel, n.m. — xameeti.

fielleux, adj. — xumaan leh.

fiente, n.f. — xaarka shimbirta

fier, adj. — isla-weyn; kibir weyn; qab weyn; han weyn.

fièrement, adv. — isla-weyni.

fiérot, adj. — si foolxumo leh isulawayn.

fierté, n.f. — islaweyni.

fièvre, n.f. — xummad (markuu jidku xanuun la kululaado).

fiévreusement, adv. — xummad badan.

fiévreux, adj. — xumaad leh.

fifre, n.m. — fiilo fiilada, laga cisiiyo.

figement, n.m. — dhaqdhaqaaaq la'aan.

figer, v. — aan dhaqdhaqayn; fadhiyid dhaganaan.

fignoler, v. — hab wanaagsan shaqo u fulin.

figurant, adj. et n. — qof aan rool wayn ciyaareeyn.

figuratif, adj. — wax matila.

figuration, n.f. — ka muuqasho.

figure, n.f. — weji; wejihaad; joogga qofka.

figurer, v. — malayn; u malayn (maskax ka dhisid).

fil, n m. — dun.
- fil de la Vierge — xuubcaaro;xuub jilicsan.
- fil métallique — silig; xadhig macdan ah
- sans fil — xadhig la'aan

filament, n.m. — dun.

filandre, n.m. — xuub caaro; xuub jilicsan.

filant, adj. — jiidma.

file, n.f. — saf; tixid; taxan.

filé, n.m. — dun; xadhig

filer, v. (se sauver) — si qarsoodi ah loole baxsado ; orday; ordid; orod.

filer, v. (la laine) — soohid

filet, n.m. — xarig, khayd; sabaq.
filet pour les jeux — shabaq : teeniska dheer; laliska dheer.
fabrication du filet — samaynta ama isticmaalidda shebegga.

fileter, v. — soohid; samaynta dharka.

fileur, n. — qofka wax sooha.

filial, adj. — ka soo jeeda; la xidhiidha.

filiation, n.f. — ku xidhan.

filiforme, adj. — dhooban.

filin, n.m. — xadhig.

fille, n.f. — gabadh; hablo.
jeune fille — gabadh aan la guursan; gabadha aan weli guursan.
petite fille — foodley; inan.
fille de service — booyiso; adeegto; jaariyed gabadha adeegtada ah.

fillette, n.f. — foodley; inan.

filleul, n. — qofka waalidka loo yahay.

film, n.m. — filin; biniikole.

filmer, v. — sawirid.

filon, n.m. — dilac laba dhagax dhexdood macdan ku samaysma.

filou, n.m. — tuug; wax sira.

filouter, v. — xadid.

fils, n.m. — inan; igaar; wiil.

filtre, n.m. — shaandhayn; qashin ka reebid; shaandho.
filtre à lumière — sifeeye (filter).

fin, n.f. — dhamaad; waqtixaddidan; ujeedo.
mettre fin — dhamayn (qandaraaskii urur ka dhammaaday).
sans fin — aan dhammad lahayn; aan wiligii joogsanayn.

fin, adj. — dhumuc yar; dhuuban; fiiqan; saafi.

final, adj. — ugu dambayne ; kama dambayn.

finale, n.f. — ugu dambaysta.

finalement, adv. — ugudambayn.

finaliste, adj. — dhamaad; akhiritaan.

finance, n.f. — cilmiga maraynta lacagta.

financer, v.	lacag galin.
financier, n.m.	qofka xirfada u leh habaynta lacagta.
financier, adj.	aqoonyahanka lacagta isticmalkeeda.
financièrement, adv.	lacaag ahaan.
finement, adv.	si aqoon leh.
finesse, n.f.	maskax furnaan; fahmi-ogaal.
finir, v.	dhammaansho; dhammayn; idlayn.
finisseur, n.m.	dhammaystire.
fiole, n.f.	dhalo yar (oo lagu shubo dawooyinka iwm; dareere ah).
firme, n.f.	shirkad.
fisc, n.m.	maamulka u xilsaaran canshuurta.
fiscal, adj.	la xidhiidha canshuurta.
fiscalité, n.f.	habka canshuurqaadka.
fission, n.f.	kala jajabidda
fissure, n.f.	kala jab; dilaac
fixage, n.m.	dhajin (nabe).
fixateur, adj.	dhajiya.
fixation, n.f.	dhajiska; fadhiisinta.
fixe, adj.	xidhan; adag oon dhaqdhaqaaqayn; ku naban ; deggan; joogta ah; aad loo xidhay; aan debecsanayn.
fixer, v. fixer quelqu'un du regard	dhajin; adkayn; nabid ku dhagagid.
flacon, n.m.	dhalo luqun dhuuban oo shaybaarada loo isticmaalo
flageller, v.	karbaashid.
flageoler, v.	cabsi darteed inta la gariiro cagaha la isladhoco.
flageolet, n.m.	digir yaryar.
flagrant, adj.	muuqda; aan la diidi karin.
flair, n.m.	ur; dareen la xidhiidha urka

flairer, v. — fiifsi; neefka qaadasho xagga sanka oo sanqadh leh.

flambeau, n.m. — toosh; tooj; kaarboono.

flamber, v. — gubid; ulolin; khasaarin.

flamme, n.f. — olol; ololin.

flammèche, n.f. — olol yar; dhinbill (fallidh dabah).

flanc, n.m. — ganac; dhinac; kareer.

flancher, v. — dabcid; ka hadhid.

flanelle, n.f. — maro khafiif ah oo suuf ah.

flâner, v. — tameshlayn; socod laafyood ah.

flânerie, n.f. — laafyood

flanquer, v. — loo tuuro si xoog ah.

flaque, n.f. — meel yar oo biyuhu ku fariistaan markuu roobku da'o, sida meelaha dariiqyada dhex ah.

flasque, adj. — jilicsan; dabacsan

flatter, v. — salaaxid; amaanid; sasabid.

flatterie, n.f. — amaanid.

flatteur, adj.et n. — qofka isaga oo ka badbadinaya wax amana.

fléau, n.m. — cudur,dhib yar laakiin taxan; khaati baa laga jogga.

flèche, n.f. — leeb; fallaadh.

fléchir, v. — soo qalloocsamid.

fléchissement, n.m. — weecin ama qaloocin.

flegmatique, adj. — daganaanshiiyo.

flegme, n.m. — qof dagan.

flétrir , v. — ka wareejin ka qaadid.

fleur, n.f. — ubax.

fleurer, v. — udgoonaan.

fleurir, v. — ubax bixin; ubax dhalid.

fleuriste, n. — qofka ubaxa gada.

fleuve, n.m. — webi.

flexibilité, n.f.	weecweecismi kara.
flexible, adj.	qalloocsamir kara (aan jabayn); la qallocin karo.
flexion, n.f.	laabmi kara.
flibustier, n.m.	budhcadii bada ee dadka dhicijirtay qarniyadi XVII ila iyo XVIII ee amerika.
flirt, n.m.	qofki xidhiidh jacayl lala leeyahay.
flocon, n.m.	kuuskuus suuf ama baraf ah.
floconneux, adj.	kuuskuusan.
floraison, n.f.	ubaxu marka uu aad u soo baxo.
floral, adj.	la xidhiidha ubaxa.
flore, n.f.	ubax.
flot, n.m.	sabbaynaya; heehaabaya (biyaha ama hawada).
flotte, n.f.	maraakiib badan oo wada socota.
flottement, n.m.	sabbayn; kor heehaabid.
flotter, v.	sabbayn; heehaabayn (biyaha guudkooda).
flotteur, n.m.	kor sabbaynaya.
flou, adj.	aan cadayn; aan si fiican loo arag.
flouer, v.	xadid; khaa'imid.
fluctuation, n.f.	isbadbadal mar kor u kac ama hoos.
fluet, adj.	weyd; dhumuc yar; dhuuuban.
fluide, n.m.	wax shubma sida biyaha.
fluidité, n.f.	shubmid; qulqulid.
flûte, n.f.	fiilofiilo.
flux, n.m.	biyo badan oo dhulka socda (roobka dabadi); daad.
foi, n.f. digne de foi	caqiido; daacadnimo; mukhliska ah; la isku halayn karo.
foie, n.m.	beer; nafleydu leedahay.
foin, n.m.	caws (doog la jarjaray oo la qalajiyay).
foire, n.f.	suuqa ganacsiga.
fois, n.f.	mar.

foisonner, v.	tiro badin; xaddi badan.
fol, adj.	waali.
folâtrer, v.	ciyaarid; dheelid.
foliation, n.f.	caleemayn.
folie, n.f.	waali an miyir qab lahayn; waali .
folklore, n.m.	ciyaaraha hidaha iyo dhaqaanka.
folklorique, adj.	la xidhiidha ciyaaraha dhaqanka.
follement, adv.	si waali ah; si aad u badan.
fomenter, v.	diyaarin arin si qarsoodi ah
foncé, adj. bleu foncé	midab qiro leh buluug qiro leh.
foncer, v.	qiro u yeelid
fonction, n.f.	xil ; ujeeddo ama dhaqdhaqaaq gaar ah oo qof ama wax leeyahay.
fonctionnaire, n.	sarkaal.
fonctionnel, adj.	la xidhiidha xubnaha ama qaybaha jidhka.
fonctionnement, n.m.	shaqayn; sida ay wax u shaqaynayaan.
fonctionner, v.	socodsiin; hawl socodsiin; maarayn.
fond, n.m.	salka; meesha ugu hoosaysa; gunta
toucher le fond courant de fond	gunta la soo taabto biyaha dhulka hoostiisa mara.
fondamental, adj.	aasaaska; gunta.
fondant, adj.	dhaacaan badan leh oo afka ku baabaa.
fondateur, adj. et n.	qofka wax sameeya ama abuura.
fondation, n.f.	aasaas; sees.
fondé, n.m. fondé de pouvoir	asaaska ku salaysan awood
fondement, n.m. sans fondement	xidid (sida xididdaaha geedka), asaas aan aasaas lahayn.
fonder, v.	dhisid; asäas adag u yeelid; ku salayn

fondre, v.	dhalaalin; shubid (bir)
fondre un métal	dhalaalinta birta (kala soo cidda).
fondeur, n.m.	bir shube.
fonds, n.m.pl.	lacag urursan oo u tal ujeeddo.
fondu, adj.	dhalaalay (biraha).
fontaine, n.f.	meesha biyuhu ka soo boodaan
fonte, n.f.	galka baastoolada; kiiska baastooladda.
football, n.m.	kubbadda cagta (lugta).
for, n.m.	wacyiga ama garashada qofka.
forage, n.m.	qodid ceel ama daloolin.
force, n.f.	quwad; awood weyn.
employer la force	awood saarid; dul saarid.
reprendre des forces	xoog yeelasho ka dib marka uu qof xanuunka ka bogsado (baan qadasho hagaajo).
forces de production	xoogagga tacabka.
forcément, adv.	khasbid.
forcer, v.	quwad ku qasab; ku dirqiyid; ku khasbid; ku cadaadin
forer, v.	daloolin; qodid sida ceelasha saliida iyo biyaha
foret, n.m.	aalad looxaanta lagu dalooliyo
forêt, n.f.	toon (kayn; aay; jiq); kayn.
forfait, n.m.	wax inta aan la bilaabin qiimihisa la siigooyo.
forge, n.m.	hooso.
forger, v.	tumaalid; birtumid.
forgeron, n.m.	tumaal; birtun.
formalité, n.f.	fulinta waxyaabaha khasabka ah.
format, n.m.	cabir.
formation, n.f.	hab; tababarka
formation socioéconomique	habka dhaqan dhaqaaleed.

forme, n.f. — qaab; saamayn; qaabayn.
forme générale du capital — formulaha guud ee kabitaalka.
forme étendue de valeur — qaabka qiimaha ee fidsan.
forme générale de valeur — qaabka qiimaha ee guud.
forme relative de valeur — qaabka qiimaha ee nisbiga ah.

formel, adj. — wax aan fogayn.

former, v. — tababarid; carbin ; waxbarid; barbaarin.

formidable, adj. — aad u wanaagsan;aad u fiican.

formule, n.f. — naanays; qaacido; hab ama dariiqo wax loo sameeyo (sida cuntada).

fort, adj. — xoog (xooggan); qalcad; xooggan oo caafimaad qaba.

fort, adv. — waxay ku dhawdahay; qiyaastii waa ugu dhawaan.

fortement, adv. — xoog leh.

forteresse, n.f. — qalcad.

fortifiant, adj.et n. — wax wax xoojiya.

fortification, n.f. — la xoojiyo.

fortifier, v. — xoojis.

fortin, n.m. — qalcad yar.

fortiori, adv. — ugu xoogbadan.

fortuit, adj. — si iska fursad ah isaga dhacay; iska dhacay; wax dar Alle isaga dhacay.

fortune, n.f. — fursad; nassib; lacag; xoolo

fortuné, adj. — nasiib badan leh.

forum, n.m. — aqoon-is-weydaarin.

fosse, n.f. — cel;god dheer; furuq dhoon.

fossé, n.m. — saaqiyad; qacan (ka biyuhu maraa); kali biyo maraan

fossette, n.f. — godka dhabanka ku yaala oo marka qofku qoslo soo baxa.

fossile, n.m. — lafihi xayawaanadii hore ka hadhay

fou, adj. — waa waalan yahay,nasakh; waalan xis la'aan; aan miyir qabin; maskaxda ka jirran; caqliga wax uga dhiman yihin.

fouailler, v. — shaabuugeyn; karbaashid; jeedalis;

foudre, n.f. — onkod; hilaacac; jac.

foudroiement, n.m. — qof jac ay kudhacdo .

foudroyant, adj. — naxdin leh; argagax leh.

foudroyer, v. — jac ku dhacdo; koronto qabato.

fouet, n.m. — karbaash.
coup de fouet — shaabuugayn; karbaashid; jeedalid;

fouetter, v. — shaabuugeyn; karbaashid.

fouille, n.f. — dhulka laqodo iyada oo wax laga raadi nayo.

fouiller, v. — baadhid sida marka wax la raadinayo; qodid sida macdanta

fouillis, n.m. — midaan daro; isku qasnaan.

fouinard, n.m. — qof waxwalba jecel in uu ogaado oo aan loodirsan.

fouir, v. — god qodid

fouisseur, adj. et n. — xayawaanka gudadka qoda.

foulard, n.m. — iskaaf; maro luqunta lagu xidho.

foule, n.f. — dad badan.

fouler, v. — ku tumasho.

foulure, n.f. — murkacsho; hilib qo'.

four, n.m. — foorno.

fourberie, n.f. — caado u yeelasho in dadka la siro.

fourche, n.f. — faraqeyto.

fourchette, n.f. — fargeetto; farageyto.

fourgon, n.m. — bas yar; baabuur yar oo wax lagu qaado

fourmi, n.f. — qudhaanjo.

fourmilière, n.f. — meesha ama aqalka qudhaanjado u hoyato.

fournaise, n.f. — meel aad u kulul.

fourneau, n.m. — foorno; shoolad; shooladda wax lagu kuleyliyo; ardaaga dabka ee dhismaha lagu kuleyliyo.

fournée, n.f. — la foorneeyo sida rootiga.

fournil, n.m. — meesha foornado ku taal.

fournir, v. — siin; wax ama hanti qof bixiyo oo qof kale ku wareejiyo ama u dhiibo ama gacanta ka saaro; deeq

fournisseur, n.m. — meesha ama qofka wax laga gato.

fourré, n.m. — meel caws iyo geedo badan; kayn; dhir badan oo meelku wada taalka; duurka.

fourreau, n.m. — galka soodhka; galka tooreyda.

fourrure, n.f. — dhogorta xayawaan gaar ah sida bisadahe bakaylaha iwm.

fourvoiement, n.m. — khalad.

fourvoyer, se, v. — habaabin.

foyer, n.m. — hooy; aqal; guri;

fracas, n.m. — buuq; qaylo; degdeg; duqeyn.

fracasser, v. — burbur qarax oo kale ah.

fraction, n.f. — jabin.

fractionnement, n.m. — jajabin.

fractionner, v. — qayqaybin.

fracture, n.f. — jabid.

fracturer, v. — jabin.

fragile, adj. — jilicsan.

fragilité, n.f. — jilicsanaan.

fragment, n.m. — in yar; qidcad yar; jajab; burbur; googo; firdhad; fanfaniin

fragmenter, v. — kala jajabid.

fraichement, adv. — cusub.

fraicheur, n.f. — qabow.

fraichir, v. — qaboojin.

frais, adj. — cusub; dhadhamo macaan; daray ah; qabowga yar; kaad.

frais, n.m.	kharash.
fraise, n.f.	midho yaryar oo gaduudan laga helo yuruub (frees).
= outil	qalab loo isticmaalo daloolinta.
fraiser, v.	qodid; daloolin.
framboise, n.f.	frambawas: midho yaryar oo guduud khafiif ah oo laga helo yuruub.
franc, n.m.	faran (lacagta fransiiska).
franc, adj.	mukhlis ah; weji furan.
français, adj.	reer frans.
franchement, adv.	dhab ahaan; xaqiiqdu sida ay tahay
franchir, v.	ka gudbid; dhaafid; gudbid, ka sii shisham-marid; ka hormarid
franchissement, n.m.	gudbidda; dhaafidda; ka shishammaridda
francophile, adj.	dadka jecel fransiiska.
frange, n.f.	foodyar.
frappant, adj.	la yaab leh.
frappe, n.f.	qarac; tumidda
frapper, v.	dhirbaaxid; ku dhufasho; garaacid.
frapper avec une massue	budh, ul madax buuran la dhicid
fraternel, adj.	walaalnimo.
fraterniser, v.	saxiibid; walaalid.
fraternité, n.f.	saxiibnimo; walaalnimo.
fratricide,adj.	walaalki dile.
fraude, n.f.	koontarabaanin; koontarabaan.
frauder, v .	sirid.
fraudeur, n.m.	tuug.
frauduleux, adj.	sirid leh.
frayeur, n.f.	cabsi.
fredonner, v.	hoos u heesid iyada oo afka la iskku haysto
frein, n.m.	bireegga ama fareenka wax socda lagu joojiyo, sida bireegga baabuurka joojiya.

freiner, v.	joojin.
frelater, v.	isku laaqid; badhxid (labo khamro)
frêle, adj.	weyd; dhumuc yar.
frémir, v.	gariirid (sida dhulka); ruxid.
frémissement, n.m.	ruxan; lulan.
frénésie, n.f.	waali.
frénétique, adj.	waalan.
fréquemment, adv.	inta badan; badiyaaba.
fréquence, n.f.	mowjad; hir sida hirarka raadiaha
fréquent, adj.	soo noqnoqda; marwalba.
fréquenter, v.	la xidhiidhid joogta
fréquenter un lieu	si joogta ah meel u tagid
fréquenter une personne	xidhid joogta ah oo qof lalayeesho.
frère, n.m.	walaal.
friabilité, n.f.	dhilis.
friable, adj.	dhilmi kara.
friandise, n.f.	cuno khafiif ah.
fricasser, v.	kalaankal.
friche, n.f.	dhulka caadiga ah; aan la beerin
friction, n.f.	isliska; is xoqidda
frictionner, v.	islisid; is xoqid
frigidaire, n.m.	franjiteerka; qabowjiye.
frigorification, n.f.	qaboojiye.
frileux, adj.	qofka qabowga u jilicsan.
frime, n.f.	ismacnayn; isqaad qaadis.
frimousse, n.f.	waji qoruxsan oo carooreed.
fringale, n.f.	gajeysan.
friper, v.	jactadin.
friperie, n.f.	dhar ama qalab duug ah.

fripier, n.m. — qofka qalabka duuga ah gada.

fripon, n.m. — aan daacad ahayn; ninka aan daacadda ahayn; nin sharaf daran.

fripouille, n.f. — tuug.

frire, v. — shiilid; dubid (cuntada).
poêle à frire — birlaxooxeed (weelka wax lagu shiilo ama lagu dubo).

friser, v. — tiimo kojin.

frisquet, adj. — qabow yar;

frisson, n.m. — qamandhaco; gariir; kurbo

frissonnement, n.m. — qamandhacada; gariirka (jidhka)

frissonner, v. — gariirid; kurbasho (jidhka); qamandhacood

friture, n.f. — shiilid; dubid.

froid, n.m. — qabow.
coup de froid — qabowga dhaxanta xun, oof waraan (koralba aariyo).

froid, adj. — qabow; duray; hargab (durey) jirro qufac leh.

froideur, n.f. — jacjuunimo ; aan dadka la shekeysaan.

froisser, v. — jactadin (maro); aflagaadayn

frôler, v. — agmarid; agtiisa mara; meel u dhaw mara

fromage, n.m. — formaajo (baacug); burcad.

froment, n.m. — qamadi.

fronce, n.f. — laablaab; laalaabka surwaalka

froncer, v. — weji ururin; laalaabid

fronde, n.f. — shimbirolaaye.

front, n.m. — hor; xagga hore; wejiga intiisa sare ee soo taagan (indhaha dushooda); weji.

frontal, adj. — hardi.

frontière, n.f. — soohdin (xuduud; xagga xadka; xuduudka dhinacyadiisa); xad; xariiq laba dal kala qaybisa; xariiqa laba meelood kala qaybiya; xuduud.

frottement, n.m. — xoqida.

frotter, v.	xaquuq ama xoqid ku nadiifin; isku lisid; laba shay la isku xoqo
froufrouter, v.	shanqadha maryuhu marka ay is xoqan
froussard, adj.	fulay.
frousse, n.f.	cabsi.
fructifier, v.	midha saara; midha bixiya.
fructueux, adj.	miro leh; miro dhalinaaya; wax soo saar leh.
frugal, adj.	cuno yar; wax yar
fruit, n.m.	miro; midho; khudrad
frustrer, v.	u diidid
fugitif, adj.	qof fakad ah; xabis ka soo carara
fuir, v.	baxsad; orday; ordid; orod; carar; hawl gabid.
fuite, n.f.	cararidda; fakadka
fulminer, v.	cadho; xanaaq.
fumée, n.f.	qiiq
nuage de fumée.	buuq; arbush.
fumer, v.	qiiq; qaac; sigaar cabid.
il est interdit de fumer	sigaar laguma cabbi karo (sigaarku waa reeban yahay).
fumet, n.m.	ur-udgoon; urta naftujeclaysato.
fumeur, n.m.	sigaarya cab; qofka sigaarka caba.
fumier, n.m.	digo; saalada xoolaha.
fumiste, adj.	qof aan waxba qaban·
fumoir, n.m.	meesha sigaarka lagu cabo.
funérailles, n.f.pl.	xabaal (geeri) maamuusid aas ama duugis qof dhintay la aasayo ama la duugayo.
funeste, adj.	dhimanaya; aan noolaanayn; murugo.
fureur, n.f.	cadho; cadhooday.
furibond, adj.	cadhaysan; xanaaqsan.
furie, n.f.	xanaaq aad kulul.

<u>furieux</u>, adj.	badow; dabadgaleen ah; waxshi ah; axmaq ah debed galeen; waxshi, cadhaysan; cadhoonaya;
<u>furtivement</u>, adv.	dhuumasho·
<u>fusée</u>, n.f.	gantaal (hub).
<u>fuselage</u>, n.m.	gafuurka dhuuban ee dayuurad
<u>fusil</u>, n.m.	qori ; nooc kamid ah qoryaha rasaastu ka dhaco.; bunduq
<u>fusiller</u>, v.	toogasho; dilid rasaas lala dhoco
<u>fusion</u>, n.f.	dhalaalinta birta (kala soocidda).
point de fusion	barta dhalaalka
<u>fusionner</u>, v;	iska darid; midayn; isu keenid.
<u>futaie</u>,n.f.	kayn; ay; hawd jiq ah; xidh
<u>futé</u>, adj.	caqli badan; maskax badan;garasho badan.
<u>futile</u>, adj.	aan macno lahayn; qiimo lahayn.
<u>futur</u>, n.m.	ninka aroosi doona
<u>futur</u>, adj.	mustaqbal; wakhtiga soo socda.
<u>fuyard</u>, adj.	qof carar ah; fakaad ah.

G

gabardine, n.f.	marada dhogorta ka samaysan: kibood ka samaysan dhogorta oo aan biyaha soo dayn.
gabarit, n.m.	cabir.
gabbro, n.m.	dhagax magici (jooloojia)
gabelle, n.f.	canshuurta milixda laga qaado.
gabonais, adj.	reer gaaboon.
gâchage, n.m.	khasaarin si aan looga faa'iidaysan; jilcin; marka shamiinta biyo lagu daro si loo jilciyo.
gâche, n.f.	gaanjada handrafka la galiyo.
gâcher, v.	qooyn; jilciyin; khasarin.
gâchette, n.f.	fargada buntukha.
gâcheur, n.m.	qofka wax khasaariya; aan dhaqaalaha lahayn.
gadoue, n.f.	dhiiqada; caramadowda qoyan.
gaffe, n.f.	khalad; gaf.
gaffer, v.	la khaldamo; khaldamid; gafid.
gaffeur, n.m.	qofka dadka u gafa.
gage, n.m.	mushaharo.
gagé, adj.	rahamad.
gager, v.	marka wax rahaan loo dhigo.
gageure, n.f.	qofka rahanta dhigta.
gagnant, adj.et n.	hela bakhtiya nasiib wax ku guulaysta.
gagne-pain, n.m.	shaqaysi si aad cunadaada u la soo baxdo.
gagne-petit, n.m.	lacag yar qaata; wax yar qaata.
gagner, v.	guulaysi; rayn (ku raaya imtixaan shaqo; bakhtiya nasiib iwm.)
gagneur, n.m.	qofka wax ku guulaysta.
gai, adj.	farxad.

gaiement, adv. — farxad leh.

gaieté, n.f. — farax sanaan.

gain, n.m. — faa'iido; guul.

gaine, n.f. — gal; galka mindida bastoolada ama buntukha la galiyo.

gainer, v. — galayn; dahaadhid.

gainier, n.m. — ninka sameeya galka tooriyaha, baastoolada iyo bonduqdaba.

galactose, n.m. — sonkorta caanaha laga helo ama ku jirta.

galant, adj. — ninka naagaha u roon ama jecayl daraadi wax walba ugu qabato.

galanterie, n.f. — u jajabnaanta haweenka.

galapiat, n.m. — baagamuudo; shaqo laawe.

gale, n.f. — cadho; cudur oo gada ku dhaca.

galère, n.f. — markab dagaal oo nooci hore ah.

galerie, n.f. — god wayn ama aqal wayn oo bandhig lagu sameeyo ama wax lagu gado.

galérien, n.m. — qof nolol adag ku nool.

galet, n.m. — dhaqax kuukuusan.

galetas, n.m. — buulo ama deegan sabool ah.

galette, n.f. — nooc macmacaanad ka mid ah.

galeux, adj. — qof cadha qaba; la xidhiidhkiiso khatar yahay.

galiléen, adj. — magac dadka aan diinta lahayn ay u bixiyeen Nebi Ciise.

galimatias, n.m. — khudbad aan cadayn ama aan la fahmi karin.

galion, n.m. — markab wayn oo hubaysan oo qaadi jiray wagi hore dahabka iyo lacagta.

galle, n.f. — dhadhid ama hagaa-sida geedaha oo katimad cudur ama cayayaan cuna.

gallon, n.m. — darajo.

galoche, n.f. — kabo hoosta qori ka ah.

galon, n.m. — bilad.

galonner, v. — bilad siin.

galop, n.m. — xawaraha ama orodka faraska dheereeya.

galoper, v. — ordid (faras iwm).

galopin, n.m. — ciyaal sooq.

galurin, n.m. — koofiyad.

galvanique, adj. — xoog siiya; xoojiyo.

galvanisation, n.f. — xoog la siiyo; koronto la galiyo xoog siin.

galvanomètre, n.m. — makiinad lagu cabiro xooga qulqulka korontada.

galvauder, v. — baaga muudayn.

gambade, n.f. — booddo.

gambader, v. — rabaalaynta baraarka ama dhasha idaha.

gambette, n.f. — lug,addin.

gambiller, v. — cagta ku ciyaarid.

gamelle, n.f. — gaweetada.

gamin, n. — ilmo yar; canug.

gaminerie, n.f. — caruurnimo; fal caruur oo lagu koco.

gamma, n.m. — waa shucaac radioaktif ah; kalmad sadeexad ee alfbetada griiga (γ).

gamme, n,f. — nooc.

ganache, adj. — qof aan maskax badnayn; nacas.

gang, n.m. — budh cad; qawlaysato .

gangétique, adj. — budh cadnimo.

ganglion, n.m. — qanjidh.

ganglionnaire, adj. — la xidhidh qanjidhada.

gangrène, n.f. — musuqmaasuqnimo; wax isdaba marin; khayaa--mayn.

gangréner, v. — wax isdabamarin; khayaanayn.

gangréneux, adj. — wax isdabamaris.

gangster, n.m. — tuug; nin budhcad ah.

gangstérisme, n.m. — budhcadnimo.

gant, n.m. — maro ama harag jaangooyada gacanta leh; gaamanka.

ganter, v. — gaman gashasho.

garage, n.m. — hooso; meesha baabuurta lagu hagaajiyo laguna gado.

garagiste, n.m.	qofka hoosada ka shaqeeya; baabuurta sameeya ama hagaajiyo; farsamo yaqaan.
garant, adj. etn. qui sert de garantie	qofka wax damiinta. caymiye.
garantie, n.f.	caymis.
garantir, v.	caymin;
garce, n.f.	gabadh nolol xun ku nool; dhilo ah; dhilay- -sata.
garçon, n.m.	wiil; doob.
garçonne, n.f.	gabadh doorata nolool kali ah; nin la'aan.
garçonnet, n.m.	wiil yar.
garçonnière, n.f.	gabadh u nool sida wiilasha.
garde, n.f. prendre garde	naagta caruurta haysa ama ilaalinta. digtoonaan; feejignaan.
garde, n,m.	ilaalinta; wardiyenta.
garde-à-vous, adv.	digtoonaan; qabasho xidhid.
garde-chasse, n.m.	askarta ilaalisa xayawaanka si looga celiya dadka laaya.
garde-côte, n.m.	cidamada xeebta ilaaliya.
garde-feu, n.m.	shabaqa birta oo lagu dado dabka.
garde-malade, n.	qofka xanaaneeya dadka jiran.
garde-manger, n.m.	qolka ilaaliya xerada lagu layliyo fardaha.
garde-meuble, n.m.	meesha lagu ilaaliyo qalabka guriyaha la dhigto.
garde-pêche, n.m.	cidaanka ilaaliya ama kor socda kalluumaysatada
garder, v.	wardiyeyn; dhawrid; xanaanayn.
garderie, n.f.	meesha caruurta lagu hayo ama xanaaneeyo.
garde-robe, n.f.	armaajada dharka.
garde-voie, n.m.	ilaaliyaha jidka tareenku maro. (isgoyska)
gardien, n.m.	qofka wax ilaaliya.
gardiennage, n.m.	ilaalinta.
gardienne, n.f.	qofka haweenka ah ee wax ilaaliya.
gare, n.f.	meesha tareenka laga raaco ama looga soo dago.

garer, v. — soo galid; imaati; baabuur istaajin.

gargariser, se, v. — luqluqid; luqluqasho.

gargarisme, n.m. — luqluqashada.

gargote, n.f. — makhaayad cuno jaban.

gargotier, n. — qofka leh makhaayad aan qaali ahayn.

gargouillement, n.m. — shanqadha calooshu samayso.

gargouiller, v. — shanqadhid.

gargouillis, n.m. — shanqadhis.

garnement, n.m. — qalqaalinimu; wax xun.

garni, adj. — aqal qalabaysan.

garnir, v. — qurxin; qalabayn.

garnison, n.f. — xeero militari.

garnissage, n.m. — la xoojiyo.

garniture, n.f. — dhamaystir.

garrigue, n.f. — naqo ama caws gaagaaba oo dhulka qariya.

garrot, n.m. (médecine). — xadhig ama bambiiro qofka lagu qabto si dhiiga loo joojiyo.

garrot, n.m. (mesure). — cabirka dheerarka xoolaha (fardaha).

garrotter, v. — dhiig xidh; dhiiga la joojiyo.

gars, n.m. — wiil.

gas-oil, n.m. — baansiin.

gaspillage, n.m. — khasaarinta; dayacidda.

gaspiller, v. — khasaarin; dayicid.

gaspilleur, adj. et n. — qofka wax khasaariya.

gastrectomie, n.f. — marki qof inta la qalo calooshа in laga jaro.

gastrique, adj. — laabjeex.

gastrite, n.f. — laabjeexid.

gastro-entérite, n.f. — calool xanuun ama calooshu boogowdo.

gastro-entérologie, n.f. — cilmiga barashada cuno mareenka.

gastronome, adj. et n. — qofka jeecel cunada sida fiican loo diyaariyo.

gâteau, n.m.	macmacaan.
gâter, v.	halayn; khasaarin; xumayn; kibrid
gâterie, n.f.	nacnac,wax aad u macaan.
gateux, adj.	dacnimo; tabar daro.
gauche, n.f.	bidix; qofka shuciga ah.
gauche, adj.	bidixda; gacanta bidixda ah.
gauchement, adv.	bidix ahaan.
gaucher, adj.	guran; qofka guran.
gauchisant, adj.	qof siyasadisu bidix u dhawdahay; hantiwadag u dhaw.
gauchisme, n.m.	shucinimo lagu fogaado.
gauchiste, n.	qof fikradiisu bidix tahay.
gaufrage, n.m.	diyaarinta macmacaanka malabka leh.
gaufre, n.f.	macmacaan malab lagu sameeyey.
gaufrette, n.f.	doolshe yar oo malab lagu kariyay.
gaufrier, n.m.	qalabka lagu sameeyo doolshaha malabka leh.
gaulage, n.m.	midho soo daadin ayada oo uldheer loo istic--maalayo inta lagu lulo.
gaule, n.f.	ul wayn oo loo isticmaalo soo daadinta midhaha.
gauler, v.	geed ka soo daadin midho.
gaullisme, n.m.	fikrad ka soo jeeda De Gaulle. madaxwaynihi fransiiska ee hore.
gaulois, adj. et n.	dadkii waagi hore Fransa ku noolaan jiray
gauloiserie,n.f.	jeesjeesid.
gausser, v.	ku jeesjeesid.
gavage, n.m.	la cunsiiyo si aad ah; laga badiyo ama laga buuxiyo.
gaver, v.	buuxin iyada oo lagu khasbayo.
gavial, adj.	yaxaas ku nool Hindiya iyo Birmania.

gaz, n.m. — neef.

gazage, n.m. — neefka yeelid;u badalid neef.

gaze, n.f. — maro khafiif ah oo suuf ah.

gazé, adj. — neef ama gaas ku summoba.

gazéification, n.f. — gaas ku laaqida waxa la cabo sida kooka koolada.

gazeifier, v. — gaas samayn.

gazelle, n.f. — cawsha.

gazer, v. — gaas wax lagu sumeeyo; hagagsanid.

gazetier, n.m. — qofka ama joornalistaha wargayska qora.

gazette, n.f. — wargays.

gazeux,adj. — neef ah.

gazoduc, n.m. — dhuumaha gaasku maraan.

gazomètre, n.m. — lagu cabiro xajmiga gaaska.

gazon, n.m. — caws.

gazonner, v. — caws ama doog ku beerid.

gazouillant, adj. — heeso shimbir isku mid ah.

gazouillement, n.m. — shanqadha cida shimbiraha.

gazouiller, v. — hadaaqa caruurta; hadaaqid.

gazouillis, n.m. — hadaaq.

géant, adj. et n. — qof aad iyo aad u weyn,dheer, xoog badan caadiga ka dheer.

geignard, adj. — qof catow badan; eed sheegasho badan.

geindre, v. — taahid; jibaadid; talalid

geisha, n.f. — eray ka soo jeeda japaan oo ah dhiladda.

gel, n.m. — fadhiisinta ama baraafka yeelida biyaha.

gelé, adj. — marka qof lacagta laga joojiyo.

gelée, n.f. — kulka oo eber laga hoos mariyo si biyuhu u fadhiistaan.

geler, v. — biyo fadhiisin.

gélification, n:f. — baraf samayn.

gélifier, v. — baraf u rogid

gélule, n;f. — kiniini.

gemellaire, adj.	la xidhiidha mataanaha.
gemellipare, adj.	qofka mataanaha dhasha.
géminé, adj.	laba laba.
géminer, v.	labalabayn.
gémir, v.	taahid; cataw.
gémissant, adj.	taahis.
gémissement, n.m.	taah.
gemmation, n.f.	laamo bixin
gemme, n.m.	milix (nooc milixda ka mid ah).
gênant, adj.	wax joojiya; wax celiya.
gencive, n.f.	ciridka.
gendarme, n.m.	askari
gendarmer, v.	cadhood; diidmo.
gendarmerie, n.f.	qayb ciidamada fransiiska ka mid ah.
gendre, n.m.	sodog; (ninka gabadhaada qaba).
gène, n.m.	qaybta kromosomka ee dhaxalka dabiiciga ah ee waalidka u gudbisa carruurta
gêne, n.f.	dhib.
gêné, adj.	lacag aan haysan, yaxyax
généalogie, n.f.	abtirka; cilmiga barashada abtirka.
généalogique, adj.	la xidhiidha abtirka.
gêner, v.	dhibid; joojin; u diidid.
général, adj.	guud ahaan.
général, n.m.	darajada cidamada ugu saraysa
général de brigade	sareeye guuto.
général de division	sareeye gaas.
général de corps d'armée	sareeye guud.
générale, n.f.	afada jananka u dhaxda.
généralement, adv.	guud ahaan.
généralisable, adj.	arin guud laga dhigi karo.
généralisation, n.f.	arin guud laga dhigo.
généraliser, v.	saamayn; qof walba taabata.

généralité, n.f.	Guud; aqoon guud.
dans les affaires	arin guud.
générateur, adj.	wax soo saari kara; wax dhalin kara.
générateur, n.m.	makiinad dhalisa ama soo saarta dabka(koronto) qaac iwm.
génération, n.f.	fac; jiil; inta u dhaxaysa ilaa 30 sano ee qof korayo.
généreusement, adv.	si deeqsinimo ah.
généreux, adj.	deeqsi.
générique, adj.	sifo isbadbadasha marka dhadig ay tahayn hab leh marka ay labtahayna habkale leh.
générique, n.m.	astaan ama musiko lagu aqoonsado ama lagu garto barnaamij ama filin oo ka soo horeysa ama lagu furo, ama lagu bilaabo (barnamijka caruurta, isbortiga, iwm.)
générosité, n.f.	deeqsinimo.
génèse, n.f.	bilow; bilaabid; barta laga bilaabo.
genêt, n.m.	faras itaal yar oo laga helo ispania.
généticien, n.	aqoonyahanka dhaxalka dabiiciga ah ee waalidka iyo carruurtooda.
génétique, n.f.	cilmiga dhaxalka dabiiciga ah.
génial, adj.	wanaag leh; caqli badan leh.
génie, n.m.	aqoon wayne; caqli badan.
génisse, n.f.	aalada lo'da.
génital, adj.	qaybta oo gada ee dhalmad (guska iyo siilka).
géniteur, n.m.	ninka; dhadiga.
génocide, n.m.	cidhibtir dad ama xoolo
genou, n.m.	lawga; jilibka lugta; law; jilib.
genre, n.m.	nooc; qayb; laan.
gens, n.m.pl.	dad.
gentil, adj.	qof wanaagsan; edeb leh.
gentillesse, n.f.	edeb; wanaagsan; dabeecad fiican.
gentillet, adj.	aad u fiican (qof).
gentiment, adv.	si edeb leh.
génuflexion, n.f.	jilbo jabsi.

géochimie, n.f. — cilmiga kiimikada la xidhiidha jooloojiada.

géochronologie, n.f. — cilmiga barashada abtiriska dhulka iyo cimri--giisa.

géodynamique, n.f. — cilmiga barashada dhaqdhaqaaqa dhulka ama guurkiisa.

géographe, n.m. — qofka aqoonta u leh joqraafiga.

géographie, n.f. — cilmiga dhulka: qaabka, qaybaha cimilada, tirada dadka wax soo saarka iwm; joqraafi.

gêole, n.f. — xabis.

géologie, n.f. — jooloojia; cilmiga baarista (macdanta) dhulka iyo taariikhdiisa.

géologique, adj. — la xidhiidha cilmiga baadhista macdanta.

géomètre, n.m. — aqoon yahanka jiomeetaria iyo xisaasta.

géométrie, n.f. — cilmiga xisaabta qiyaasta xagalada ama jaangoynta.

géométrique, adj. — la xidhiidha xisaabta qiyaasta.

géomorphologie, n.f. — cilmiga qolofta dhulka.

géophysicien, n. — aqoonyahanka gariirka dhulka.

géophysique, n.f. — cilmiga gariirka dhulka.

géopolitique, n.f. — cilmiga siyaasada.

géostratégie, n.f. — cilmiga xeelada dagaalka.

géosynclinal, n.m. — dooxo.

géotechnique, n.f. — la xidhiidha qalabka jiolojiyada.

géothermie, n.f. — kulaylka dhulka hoostiisa.

géothermique, adj. — ku saabsan kulaylka dhulka hoostiisa.

gérance, n.f. — maamul.

gérant, n.m. — maamule.

gerbage, n.m. — isku xidh; isku uruurin.

gerbe, n.f. — xidhmo (ubax iwm).

gerber, v. — la isku xidho; la isdul dhigo.

gercer, v. — qolo faysiga bishinta.

gerçure, n;f. — qolofta bishimada ka kacda qabow awgi.

gérer, v. — maamulid.

germain, adj. — laba qof oo isku dhaw; aabo mid ah ka wada yimid.

germanique, adj. — jarmal ah.

germanisation, n;f. — jarmalayn.

germanisme, n.m. — habka ku hadalka afka jarmalka.

germanophile, adj. — jarmalka jecel.

germanophobe, adj. — dadka cadawga jarmalka u ah.

germanophone, adj. — dadka afka jarmalka ku hadla.

germe, n.m. — bilawga nolaasha; jeermi.

germer, v. — marka geeduhu dhashan ee ugu horaysa.

germicide, n.m. — jeermi dile.

germinal, adj. — la xidhiidha jeermiga.

germinateur, n.m. — awood wax bixin leh.

gérontocratie, n;f. — dawlad ay dad da wayni maamulan.

gérontologie, n.f. — cilmiqa barashada duqnimada.

gérontologue, n.m. — aqoonyahanka duqnimada (takhtarka).

gésine, n;f. — naag xiligii foosha joogta.

gésir, v. — jiifid.

geste,n.m. — fal; xarako; dhaqaaq adin.

gesticulation, n.f. — isdhaqdhaqaajin badan.

gestion, n.f. — maamul.

gestionnaire, adj. et n. — maamulid.

gestuel, adj. — la xihdiidha dhaqdhaqaaqa.

geyser, n.m. — biyo kulul oo dhulka marmar ka soo butaaca.

ghetto, n.m. — meel dadka gaar ahaan saboolka la isugugeey ama ladajiyo.

gibbon, n.m. — daanyeer Hindia iyo Maleesia laga helo.

gibier, n.m. — ugaadha.

giboulée, n.f. — roob aad u badan oo aan wakhti badan da'ayn.

giboyeux, adj. — meel ugaadh badan.

giclée, n.f. — soo tuurid; soo saarid xoog leh.

giclement, n.m. — soo tuuris; banaan u soo saarid.

gicler, v. — tuurid.

gifle, n.f. — dharbaaxo.

gifler, v. — dharbaaxid.

gigantesque, adj. — aad u waynaan; xoog waynaan.

gigantisme, n.m. — waynaan.

gigogne, adj. — islaan caruur badan la jilo

gigolo, n.m. — wiil dhalinyar oo naag ka weyni maamulato.

gigot, n.m. — lug hilib ah oo idaad.

gigoter, v. — luhidda lugta oo aan kala joojis lahayn.

gilet, n.m. — jubad aan gacmo lahayn.

gingival, adj. — la xidhiidha ciridka.

gingivite, n.f. — ciridku marka uu qofka xanuuno ama yiridka.

girafe, n.f. — gariga; gari.

giration, n.f. — marka bar lagu wareego.

giratoire, adj. — wareeg; meel lagu wareego.

giraviation, n.f. — fikrad; mabda'a.

girofle, n.f. — dhagayare.

giron, n.m. — inta u dhaxaysa xudunta iyo jilibka.

gisant, adj. — jiifa; horda.

gisement, n.m. — meesha macdanta laga helo ama laga qodo.

gite, n.m. — meesha la dago; guriga; meesha macdantu ku jirto.

givre, n.m. — ciiryaamo dhibco baraf ah wadata.

givré, adj. — marka ciiryaamadu dhulka qariso.

glabre, adj. — qof aan timo lahayn.

glaçant, adj. — qaboojia.

glace, n.f. — baraf; biyo fadhiya.

glacé, adj. — baraf noqda.

glacer, v. — qaboojin; baraf ka yeelid.

glacial, adj. — aad u qabow.

glaciation, n.f. — barafayn.

glacier, n.m. — baraf weyn oo buuraha (dhulka qabow) ku dul samaysma.

≙ point de vente de sorbets — meesha lagu sameeyo barafka iyo jalaatada ama lagu gado.

glacière, n.f. — meesha barafka lagu kaydiyo ama jalaatada.

glaçon, n.m. — jab baraf ah; qof aan waxba kala jeclayn.

gland, n.m. — qanjidh.

glande, n.f. — qanjidh.

glander, v. — warwareeg aan u jeedo lahayn.

glandulaire, adj. — leh habka qanjidhka.

glaner, v. — qashin qaad (marka beerta la gooyo kadib).

glapir, v. — cida dawacada.

glapissant, adj. — ciya.

glaucome, n.m. — cudur indhaha ku dhaca oo indhaha beelreeba ama arag darro.

glissade, n.f. — sinbiririxo.

glissage, n.m. — ka daadaga buuraha.

glissant, adj. — ku sinbiririxada.

glisser, v. — sinbiririxasho.

global, adj. — dhamaan.

globalement, adv. — dhamaan ahaan;

globaliser, v. — saameeya dhamaan.

globe, n.m. — aduunya; dhulka.

globulaire, adj. — wareegsan.

globule, n.m. — wareegsan sida ukunta.

gloire, n.f. — guul.

glorieusement, adv. — si guul leh.

glorieux, adj. — guuleeystay.

glorificateur, adj. — guul keena.

glorification, n.f. — guul soo dheelmin.

glorifier, v. — guulaysi.

gloriole, n.f. — fan iyo isla wayni.

glose, n.m. — arrin inta la fasira sida dhabtu ay tahay aan wax looga sheegin oo si xun wax loogu sheego.

gloser, v. — been ka sheeqid.

glossaire, n.m. — abwaan fasira eerayada aan la aqoon.

glouglou, n.m. — cida balamboolada.

glouglouter, v. — ciyid (balamboolada ilwaynta).

gloussement, n.m. — cida digaagu marka ay carruurtooda u yeedhaysan.

glousser, v. — ciyid (digaaga).

glouton, adj. — qofka cirta weyn; qofka cuntada fara badan cuna.

gluant, adj. — dhegdheg ah.

glucomètre, n.m. — makiinad lagu qiyaaso sonkorta.

glucose, n.m. — glukoos (sonkor).

glycémie, n.f. — sonkorta dhiiga ku jirta.

gnangnan, adj. — qof jilicsan ama culus, dhaqdhaqaaqiisu yaryahay.

gnognote, n.f. — wax ama shay aan qiimo laahyn.

gnon, n.m. — jug.

gnosticisme, n.m. — mabda diineed oo dadka haysta sheegtaan in ay aqoon u leeyihi ilaahay.

gnostique, adj. et n. — dadka haysta diinta gnostika.

goal, n.m. — gool hayaha.

gobelet, n.m. — koob wax lagu cabo.

gober, v. — wax liqid iyada oo aan la raamsan ama la calalin.

goberger, v. — fadhiisi.

goinfre, adj. — si xun oo wax loo cuno.

goinfrer, se, v. — si xun wax u cunid.

goitre, n.m. — marka qanjidhadho waawaynaadan.

golf, n.m. — xeeqada (ciyaar).

golfe, n.m. gacan (sida gacanka cadmeed).

gommage, n.m. la tirtiro.

gomme, n.f. koolo.

gommé, adj. koolo ku dhejin.

gommer, v. tirtirid.

gondoler, v. qalqaloocin.

gonflable, adj. la 'afuufi karo; la buuxin

gonflage, n.m. buuxid.

gonflement, n.m. la buuxiyo.

gonfler, v. buuxin; afuufin.

goniomètre, n.m. makiinad lagu cabiro sinaanta dhulka iyo xagalada.

goniométrie, n.f. aqoonsiga xagalada.

gonorrhée, n.f. jabti; cudur ku dhaca ibaha laga kaajo iyo qaybaha dhalmada ee jiidka.

goret, n.m. doofaar yar; wiil aan nadiif ahayn.

gorge, n.m. hunguri; dhuunta.

gorgée, n.f. wixii hal mar la liqi karo.

gorger, v. buuxin; ka badin.

gorget, n.m. qaybta hoos ee koofiyada madaxa iyo qoorta la gashado.

gorille, n.m. gorille; daanyeer aad u weyn.

gosier, n.m. hunguriga ama dhuunta caloosha cuntada u marto afka illa caloosha inta ka dhexaysa.

gosse, n. wiil ama gabadh yar.

gouailler, v. si xun u kaftamid.

gouape, n.m. qof aan qiimo lahayn; aaan macno lahayn.

goudron, n.m. laami.

goudronnage, n.m. laamiyen.

goudronner, v. laami lagu shubo.

goudronneux, adj. laami leh.

gouffre, n.m. god.

goujat, n.m. edeb daran.

goujaterie, n.f.	badci xun.
goulu, adj.	aad u jecel in uu wax cuno.
goupiller, v.	hagajin; diyaarin.
gourde, n.f.	ubo; buraashad.
gourer, se, v.	khaldamid.
gourgandine, n.f.	naag nolol xun; dhilo.
gourmand, adj.	honguri wayn; aad wax u cuna.
gourmander, v.	cunid badan.
gourmandise, n.f.	honguri wayni; cuno jecayl.
gourou, n.m.	madax diineed.
goût, n.m.	dhadhan.
goûter, v.	dhadhamis.
goûter, n.m.	dhadhamid.
gouteur, n.m.	dhadhamiye; qof wax dhadhamiya.
goutte, n.f.	dhibic; dhibic biya ah.
gouttelette, n.f.	dhibco yaryar.
goutter, v.	gororin; biyo ka saaris.
gouttière, n.f.	manjaroorka biyuhu ka hooraan.
gouvernable, adj.	la wadi karo; la xukumi karo; la maamuli karo.
gouvernail, n.m.	isteersada ama halka laga wado baabuurta, dayuurada, doonta iwm.
gouvernant, adj.	qofka wax maamula; wax wada.
gouvernante, n.f.	qofka haweenka ah ee caruurta wax barta ama maamusha.
gouverne, n.f.	sharci lagu socdo.
gouvernement, n.m.	dawlad, xukun; maamul.
gouvernemental, adj.	dawladu leedahay.
gouverner, v.	hogamin, xukumid; maamulid.
gouverneur, n.m.	maamule; hogaamiye gobol.
grabat, n.m.	sariir aan ficnayn; gogol xun.

grabataire, adj. et n.	qof xanuunsan oo aan sariirta ka kici karin.
graben, n.m.	dhulku marka uu hoos u go'o(graaben).
grabuge, n.m.	qaylo; muran.
grâce, n.f.	ixsan; wanaag u galid; qof dhimanay oo la dhamaystiro.
grâce!, interj.	qaylo magan galyo lagu codsanayo.
grâcier, v.	u dambidhaafid.
gracieusement, adv.	dambidhafid leh.
gracieuseté, n.f.	macaamilo wanaagsan oo dadka lagula dhaqmo.
gracieux, adj.	wanaag gala; ixsaan gala.
gracile, adj.	dhuubnaan; dhilaan.
gradation, n.f.	isku xigxig; kala sarayn.
grade, n.m.	darajo.
gradé, n.m.	sarkaal ku xigeen.
graduation, n.f.	qaybin; kala saarsaarid.
gradué, adj.	qaybqaybis.
graduel, adj.	isku xigxiga sida lambarada.
graduellement, adv.	qayb sanaan.
graduer, v.	qaybin; darajooyin u kala bixin.
graffite, n.m.	qalin qoriga intiisa dhexe oo madow oo wax lagu qoro.
grailler, v.	cunid; marka doofaarku cunayo.
graillon, n.m.	shiilida hilibka doofaarka yaryar.
graillonner, v.	shiilid.
grain, n.m.	xubuub, sida badarka; sarrenka galeeyda; masaggo; badar; hadhuudh;
grainage, n.m.	korinta iyo badinta dixiriga xariirta sameeya.
graine, n.f.	iniin; midhaha iniintooda.
grainer, v.	midho dhalin.
grainetier, n.m.	qofka ama dukaanka midhaha gada (hadhuudh, basal, iwm).
graissage, n.m.	saliid marin.
graisse, n.f.	baruur.

graisser, v. — xaydheynta iya saliidaynta qaybaha mishiinka si uu hawlyari ugu shaqeeyo.

graisseur, n.m. — qofka saliida mariya baabuurta iwm.

graisseux, adj. — saliid leh.

grammaire, n.f. — naxwe; cilmiga naxwaha luqadeed.

grammairien, n.m. — qofka naxwaha dhiga.

grammatical, adj. — ku saabsan ama la xidhiidha naxwaha.

grammaticalement, adv. — naxwo ahaan.

grammaticalisation, n.f. — naxwayn.

gramme, n.m. — halbeega misaanka: garaam (1/ 1000 kg).

grand, adj. — weyn dheer (siiba dadka); kor u dheer; ballaran.

grand-angle, n.m. — xagal aad u furan.

grand-chose, n.inv. — wax wayn ama shay wayn.

grandelet, adj. — yare wayn (dheerar).

grandement, adv. — badnaan.

grandeur, n.f. — weyni; weynaan.

grandiose, adj. — quwad weyn leh; awood badan.

grandir, v. — kordhid; ku biirid; korin; la koriyo; beerid;

grandissement, n.m. — balaadhin; wayneyn.

grand-maman, n.f. — ayeeyo.

grand-mère, n.f. — ayeeyo.

grand-oncle, n.m. — aabaha ama hoyada adeerkood.

grand-papa, n.m. — awow.

grand-peine, n.inv. — aad u adag.

grand-père, n.m. — awow.

grands-parents, n.m.pl. — waalidka waalidkood.

grand-tante, n.f. — aabaha ama hooyada eedadood.

granite, n.m. — graanit; dhagax adag oo midabkiiso isugu jiro cadaan iyo madow.

granitique, adj. — graanitka lagu yaqaanay leh.

granivore, adj. — cuna midhaha.

granulaire, adj.	hab midho leh.
granule, n.f.	jajab yaryar; midho yaryar.
granulé, n.m.	ka kooban wax midho yaryar u eg.
granulométrie, n.f.	cilmiga kala saarsaarida ciida sida ay u kala waaween tahay.
graphe, n.m.	garaaf.
graphie, n.f.	habka qoraalka.
graphique, n.m.	qoraal.
graphiquement, adv.	qoraal ahaan.
graphite, n.m.	karboonka.
graphologie, n.f.	cilmiga kala saaridda qoraalka dadka.
graphologue, n.	aqoon u leh kala saaridda farta.
grappe, n.f.	cinab miro laga sameeyo khamriga lana cuno; canab.
grapillage, n.m.	soo guridda canabka inta hadha.
grapiller, v.	gurid ama soo jarid (canab).
grappin, n.m.	xadhig soohan ; barroosinka markabka ee sudhatooyinka badan leh.
gras, adj.	weyn; buuran; shiilis; baruur,
gras, n.m.	xaydh, baruurta.
gras-double, n.m.	caloosha xoolaha (Lo') qaybteeda la cuno.
grassement, adv.	wanaagsanaan dhaqaalo.
gratification, n.f.	marka qof la siiyo lacag dheeri ah.
gratifier, v.	abaalgud.
gratin, n.m. = personnes formant une élite	xagxaga digsiga salkiisa ku hadha dadka buulshada horseedka u ah,
gratinée, n.f.	maraq laga sameeyo basaal iyo formaajo.
gratis, adj.	lacag la'aan ah.
gratitude, n.f.	mahad celin.
grattage, n.m.	xoqidda.
gratte, n.f.	ka faa'iidaysi xaqdaro ah.
gratte-ciel, n.m.	saro ama aqalo dheerdheer.

grattement, n.m. — xoqmo.

gratter, v. — burush; burushayn; xaquuq; isku simid.

grattoir, n.m. — qalabka wax lagu xoqo ama xaquuqo.

gratuit, adj. — aan ujeeddo lahayn; lacag la'aan ah.

gratuité, n.f. — aan lacag ahayn.

gratuitement, adv. — si lacag la'aan ah; aan run ahayn.

gravats, n.m.pl. — jajabka ka soo hadha dhismaha.

grave, adj. — halis; khatar.

gravement, adv. — halis ah.

graver, v. — xusuus qorid.

gravide, adj. — uur leh.

gravidité, n.f. — uur lahaan; uur ah.

gravier, n.m. — quruurux, dhagax yar oo suuban ah oo kulucsan.

gravir, v. — tafid; korid; fanasho.

gravitation, n.f. — hoos u soo jiidasho;

gravité, n.f. — jiidis hoose (dhulka).
  gravité terrestre — dhul jiidad.

graviter, v. — hoos u soo jiidid.

gravure, n.f. — loox ama dhagax wax lagu dhexqoro.

gré, n.m. — rabid.

grec, adj. — griig.

gredin, n.m. — qof aan waxba isku falayn; qof aanay waxba ka xaaraan ahayn.

greffe, n.m. — diiwaanka ama qoraalada sirta ah meesha ay yaalaan.

greffe, n.f. — marka qofka inta oogadiisa wax laga jaro si meel kale oo oogadiisa ah loogu talaalo;

greffer, v. — abqaalad (beerta ama dhir).

greffier, n.m. — diiwaan hayn.

grêle, adj. — dhumuc yar; dhuuban yar oo caato ah; weyd.

grêle, n.f. — baraf adag oo cirka ka soo daata.

grêler, v. — soo daadasho baraf.

grêlon, n.m.	baraf yaryar.
grelotter, v.	qadhqadhid; gariirid qabowawgi.
grenade, n.f.	garneyl; bam (ka qarxa).
grenadine, n.f.	rumaan.
grenaille, n.f.	macdaan jeexjeex ah.
grené, adj.	jidhiidh laga dhigo; la ridqo
grenier, n.m.	dabaqa guriga ugu kooreeya oo loo isticmaalo makhasiin.
grenouille, n.f.	rah, rake
grenouillère, n.f.	maryo caruureed.
grenu, adj.	macdan indhaha lagu arki karo.
grès, n.m.	xaani; bacaad; qaruurax yaryar.
grésillement, n.m.	cida kabajaanka.
grève, n.f. (arrêt du travail)	mudaaharaad; giriifid; shaqo ku istaaqid.
grever, v.	mudaaharaadid.
gréviste, n.	qofka mudaaharaadka sameeya.
grief, n.m.	is dagaalid; isu cadhoon.
grièvement, adv.	halis ah.
griffe, n.f.	sudhato; bir qoolaaban oo wax la soo suro; ciddi.
griffe de félin	ciddiyaha fiiqan ee soo gadan (sida kuwa libaaxa).
griffer, v.	ciddiyayn; xagxagasho.
grifonner, v.	si xun wax u qorid ama farxumi.
griffu, adj.	cidiyo leh.
grignoter, v.	dhadhamo; wax yar la cuno.
grigou, n.m.	musmaarka.
grigri, n.m.	sixin; fal.
grillade, n.f.	hilibka la solo; solay.
grillage, n.m.	shabaq bir ah oo albaabada ama dariishadaha lagu sameeyo.
grillager, v.	shabaqayn.
grille, n.f.	shabaq bir ah.

griller, v.	solis; solid; marka hilibka la solo.
grillon, n.m.	kabajaan.
grimaçant, adj.	sanqasho ama wajiga oo la dhaqdhaqaajiyo.
grimace, n.f.	isbadbadalid waji, sanqasho
grimacer, v.	la sanqado.
grimage, n.m.	wajiga oo midabyo la iska mariyo.
grimer, v.	is midabayn waji.
grimpant, adj.	korid ama kor u fuulid.
grimpée, n.f.	fanasho; kor u fuulid.
grimper, v.	kor u korid; korista dhirta, gidaarka,buurta iwm.
grincement, n.m.	jiiqjiiq,sanqadha ama dhawaaq ay sameeyaan wax saliid la'aan isu xoqaya.
grincer, v.	jiiririiqsi; miciyo isku lisid.
gringalet, n.m.	aad weyd u ah.
grippe, n.f.	hargab.
grippé, adj.	hargab qaba.
gripper, v.	is xoqidda birta; saliid la'aan awgeed.
grippe-sou, n.m.	xaasid; sha xeexnimo; bakhayl.
gris, adj.	midab boodhe ah; midab dameer oo kale; camaajiir.
grisâtre, adj.	midab boorboor ah; boodhe.
grive, n.f.	cabeebka.
grog, n.m.	dhirta laama yarada ah ee dhawrka jirridood (ee yaryar) leh.
grognard, adj.	qayla badan; qofka gungunuunuca badan.
grognement, n.m.	qaylo; gungunuunicidda,
grogner, v.	gunuus; gungunuunicid.
grognon, adj.	cabasho badan.
groin, n.m.	sanka doofaarka.
grommeler, v.	gunuus; gungunuunicid.
grondement, n.m.	gungunuunicidda.

gronder, v.	haaraamid ; canaan ay hadallo cadho lihi weheliyaan·
gronder sans cesse	yuusid.
groom, n.m.	kabaaliyeeri; wiilka hoteelka ka shaqeeya.
gros, adj.	weyn.
rouler de gros yeux	indho caddayn; indho warwareejin.
grosse (enceinte)	uur leh (xoolaha).
en gros	iibinta alaabta jimlada (tafaariiq maaha).
grosse, n.f.	laba iyo toban dersin 144.
grossesse, n.f.	uur.
grosseur, n.f.	weynaan.
grossier, adj.	qallafsan; ilbaxnimadiisu dambayso.
grossir, v.	weyneyn; korin; beerid; soo bixin.
grossissement, n.m.	la weyneeyo.
grossiste, n.m.	ninka waxa jumladda ah gada.
grotte, n;f.	god.
groupe, n.m.	dad wada shaqaynaya, koox dad ah oo isku raacay inay wax arbushaan; dhacaan dilaan; koox; urur·
grouper, v.	xidhmo; wax isku gunta; uruurin
gruau, n.m.	soor.
grue, n.f.	xuur; wiish luqun fidin.
gruyère, n.m.	nooc formajada ka mid ah.
guenille, n.f.	maryo jeexjeexan.
guenon, n.f.	dhaddiga daanyeerka.
guêpard, n.m.	bahal baramcadka u eg.
guérilla, n.f.	geeriya; dagaal yahan.
guérilléro, n.m.	dagaal yahan (ciidanka caadiga ah ka mid maaha).
guérir, v.	bogsiin (meel bogtay); daaweyn la daaweeyo.
guérisseur, n.m.	qofka wax bogsiiya.

guerre, n.f.	dagaal.
faire la guerre	dagaal samayn.
marine de guerre	maraakiibta dagaalka ee dal lee yahay.
guerrier, n.m.	dagaalyahan.
guerroyer, v.	dagaal samayn.
guet, n.m.	ilaalin; qayb ama qol gooni ah oo jeel ama isbitaalka ah; ku ilaalin; takoorid; jeedaalin.
guetter, v.	qooraansad; qooraansasho
gueulard, n.m.	qofka gunguruunuca badan.
gueule, n.f.	gafuurka xayawaanka (sida eyda ama dawacada).
gueuler, v.	dhawaqid sida ayda; qaylin
gueux, adj.et n.	qofka skagga badan (wasakhda badan). uskagga.
guichet, n.m.	maqal (tikid-haye).
guide, n.m.	qofka wax tilmaama.
guider, v.	tilmaamid;
guigner, v.	ku dhaygagid (eegid).
guilleret, adj.	faraxsan.
guillotine, n.f.	mindi weyn oo qoorta lagu jaro
guillotiner, v.	qoor kajaris.
guirlande, n.f.	xidhmo ubax ah (goobo ah).
guitare, n.f.	kaman, gitaarad.
guitariste, n.m.	qofka kitaarada garaaca.
gymnase, n.m.	rugta ciyaaraha.
gymnaste, n.	qofka jimnaastiga sameeya.
gymnastique, n.f.	jimicsi; jimnaastik.
gynécologie, n.f.	cilmiga barashada ilmo galeenka.
gypse, n.m.	macdan nuuradda u eg oo milix ah.

H

habile, adj.	kari kara; xariif; qof khibrad iyo waayo arag--nimo leh.
habileté, n.f.	karti; awood; itaal; tabar; karaan.
habilitation, n.f.	awood siinta.
habilité, n.f.	awood; karti. (sharci)
habiliter, v.	awood siin.
habillable, adj.	la labisan karo; la xidhan karo.
habillage, n.m.	xidhasho dhar.
habillement, n.m.	dhar-xidhasho; labbis.
habiller, v.	labbis; dhar-xidhasho.
habilleur, n.m.	qofka labbiska gacan ka siiya qalanjada iyo irbaha.
habit, n.m.	maryo,;hu; marashi; marrin.
habitable, adj.	la dagi karo.
habitant, n.m.	qofka meel dagan.
habitat, n.m.	dagmo.
habitation, n.f.	la dagan yahay; guriga.
habiter, v.	ku dhex nool; deggan oo ku nool; ku nool; lagu noolaado; la deggo; la yeesho (aqal; beer ; dhul iwm.)
habitude, n.f.	caado,; dhaqan; xeer; waxyaalo la falay oo lagu noqnoqday oo loo bartay oo dabadeed wax lagu dhaqmo oo aan la goyn karin noqday.
habituel, adj.	iska caadi ah; la caadaysatay; caadi.
habituer, v.	caadaysi; la caadaysto.
hache, n.f.	gudin; faas
coup de hache	gudin ka jarid; ku goynta ama ku jaridda (looxa, cadka iwm) ee faaska ama gudinta.
hacher, v.	jarjarid; falfaliidhid.
hachette, n.f.	faas yar.
hache-viande, n.m.	hilibshid (makiinad).
hachis, n.m.	shiidis.
hachoir, n.m.	mindi balaadhan oo laba gacan leh.

hachure, n.f. — jeexjeex is feedh orda.

hachurer, v. — jeexjeexid.

hacienda, n.f. — aseendo; beer iyo aqal is wata.

hadith, n.m. — xadiith.

hadjdj, n.m. — xaaji; qofka xajka taga.

hagard, adj. — aan niddam sanayn.

haie, n.f. — ood.

haillon, n.m. — mariyo jeexjeexan.

haine, n.f. — nacayb.

haineusement, adv. — aad u neceb.

hair, v. — karhid; nacbeyn; dhibsi.

haissable, adj. — karaahiyo; aan la jeclayn; la necebyahay.

hâle, n.m. — casaan; midabka dadka mediterranianka ku nool.

haleine, n.f. — urta afka.

haler, v. — jiidid.

hâler, v. — la nooqdo casaan.

haletant, adj. — hiraanhirid.

halètement, n.m. — la hiraanhiro.

haleter, v. — hiraanhirid..

haleur, n.m. — qofka doonta xadhiga u jiida.

hall, n.m. — gole; qol lagu kulmo oo weyn; qolka shirka.

halle, n.f. — barxad.

hallier, n.m. — kayn; dhir badan oo meel ku wada taalla.

hallucination, n.f. — dhallanteed;ismoodsiin.

halluciné, adj. — qof waallan.

halluciner, v. — aad la yaab u leh.

hallucinogène, adj. — wax la cuno ama la cabo oo qofka ku dhaliya dhallanteed.

halogène, n.m. — curiye kimikeed, sida kloro (Cl), Iodo (I), fluor (F) iyo Bromo (Br).

halte, n.f.	hakadka; istaaga; meeshu lagu hakado.
hameau, n.m.	tuulo yar.
hameçon, n.m.	jiilaab ka malayga lagu dabto.
hampe, n.f.	daab.
han!, onomatopée	ha!
hanche, n.f.	misig; sin.
handball, n.m.	kubbada gacanta.
handicap, n.m.	curiyamid.
handicapé, adj.	curiyan.
handicaper, v.	curiyamin.
hangar, n.m.	dhismaha dayaaradaha lagu hagaajiyo; dhismo yar oo dhismaha weyn ku dheggan.
haoussa, adj.	u mad ku nool nayjeeria.
haranguer, v.	cambarayn; dad la cambarayo.
harangueur, n.m.	cambaraye.
harassant, adj.	lagu daalo; daal leh,
harasser, v.	daalid.
harceler, v.	dhibid; cadaadin.
harde, n.f.	raxan ; xoolo dugaag ah.
hardi, adj.	aad geesi u ah; aan cabsanayn.
harem, n.m.	naaga badan oo guri mid ah ku wadanool.
hargne, n.f.	cadho badan.
hargneusement, n.m;	dagaalama.
hargneux, adj.	dagaal badan.
haricot, n.m.	digir.
harmonie, n.f.	isku quruxsan.
harnachement, n.m.	kooraynta faraska.
harnacheur, n.m.	qofka koorayaasha sameeya.
haro, n.m.	ku qaylin.

hasard, n.m.	fursad.
hasardé, adj.	khatar.
hasarder, v.	is biimayn.
hasardeux, adj.	khatar leh.
hase, n.f.	dhaddiga bakaylaha.
hâter, v.	dhaqsasho (socod); degdegsiin; dhaqso u socodsiin.
hativement, adv.	degdeg ahaan.
haussement, n.m.	kor u qaadid.
hausser, v.	gundhin.
hausser les épaules	garab gundhin.
haut, adj.	dheer; kor; dheerer (joog) ahaan; sarreeya; meel sare.
parler haut	kor u dhigid; kor u dhawaaqid.
en haut	sare kore; ka sareeyse madaxa dadka.
plus haut	sarreye (koreeye).
haut, n.m.	dusha; sare; kore.
hautain, adj.	isla-weyn; kibir weyn; qab weyn; hanweyn.
hauteur, n.f.	dheerar.
haut-le-coeur, n.m.	yaqyaqsi; mantag qabto.
haut-parleur, n.m.	cod wayneeye; makarafoon.
hauturier, adj.	bad maax
havanais, adj.	nooc ka mid ah ayda; waa gaaban yahay oo midab cadyahay.
havane, n.f.	nooc tubakada ka mid ah ama sigaarka oo laga helo kuuba.
have, adj.	daal iyo cudur ka muuqdo.
havre, n.m.	furdo yar oo qarsoon.
hé!, interj.	alla; aga; naw; jaw.
heaume, n.m.	koofiyad bir ah oo madaxa qarisa waxa la isticmaali jirey waagi hore.
hebdomadaire, adj.	todobaad walba.
hebdomadier, adj.	wadaad todobaad kiiba mar wax tujiya.
hébergement, n.m.	qolka ama qolalka caadig ah ee loo kiraysto in lagu noolaado.

héberger, v.	dajin; qof la dajiyo.
hébété,adj.	nasakhin; wareerid.
hébêtement, n.m.	nasakhnaan.
hébétude, n.f.	curyaaminta awooda garashada ama aqoonta.
hébraïque, adj.	afka yuhuuda.
hébraisant, adj.	barta afka yuhuuda.
hébreu, adj.	yuhuud; cibroo.
hécatombe, n.f.	sadaqo (xoolo layn).
hectare, n.m.	cabbir ama qiyaas dhulka lagu sameeyo.
hégémonie, n.f.	xoog waynaan sida maraykanka iyo ruushka.
hégire, n.m.	taariikhda islaamka.
hein ?, interj.	la yaabid.
hélas, adv.	nasib daro; adiga oo ka xun.
héler, v.	markab u yeerid; u baaqid.
hélice, n.f.	musmaar mardhacyo leh, garaaro leh.
hélicoptère, n.m.	dayuurad qumaati u kacda.
héliographe, n.m.	mashiin lagu qiyaaso shucaaca qoraxda.
héliport, n.m.	aeroborka dayuuradaha qumaatiga u kaca.
héliportage, n.m.	lagu qaado haylo kabtar.
hélium, n.m.	heliom; wa neef: He (kimiko).
hellène, adj.	griig.
héllénique, adj.	griigi hore
hélléniser, v.	qofka barta cilmiga la xidhidha barashada griigi hore.
héllénisme, n.m.	xadaaradi griigi hore.
héllénistique, adj.	waqtigi griigi hore jiray.
helvétique, adj.	sowisra; suwisra (dawlad).
hématie, n.f.	ukumaha gudguduudan ee dhiiga.
hématite, n.f.	macdan: hematit: Fe_2O_3.

hémicycle, n.m. — wax kasta oo hab goobaabin badh leh.

hémiplégie, n.f. — dhinac ka curyaamid ama naafooba.

hémisphère, n.f. — qaybta wa qooyi ama koon fureed ee dunida.

hémoglobine, n.f. — hemogloobin; dhibco yaryar oo dhiiga ku jira oo u kala qaada unugyada oksijenka iyo neefta karboonika ah.

hémopathie, n.f. — cudur dhiiga ku dhaca.

hémophile, adj.et n. — qofka marka uu dhawacmo aan dhiigu istaagin.

hémorragie, n.f. — dhiig bax.

hémorragique, adj. — dhiig bixid.

hémorroïde, n.f. — bawaasiir; cudur ku dhaca malawadka hoostiisa ama futada.

henné, n.m. — xinaha, timaha lagu midabeeyo.

hennir, v. — danan; dananka faraska.

hennissement, n.m. — dananidda faraska.

hep!, interj. — warya!; hooy!; marka qof loo yeedhayo.

hépatique, adj. — wixii beerka la xidhiidha.

hépatite, n.f. — beer xanuun.

hépatologie, n.f. — cilmiga barashada samayska beerka.

heptaèdre, n.m. — toddobu dhinac leh.

heptagonal, adj. — toddoba xagal leh.

heptagone, n.m. — toddoba xagal leh.

herbe, n.f. — doog; doogga ay xooluhu daaqaan.
mauvaise herbe — haramo (qashinka beerta ama dhirta ka hoos baxa).

herbeux, adj. — geeduhu ku koraan.

herbicide, adj. — dila geedaha xun.

herbier, n.m. — geedaha inta la qalajiyo la dhexgaliyo laba waraqood si wax loogu barto.

herbivore, adj. — geedaha ouna;

herborisation, n.f. — qofka geedaha soo gura si uu darso ama uu u baadho.

herboriser, v. — geedo soo gurid si wax loogu barto.

herboristerie, n.f. — dukaanka geedaha lagu gado.

herbu, adj. — doog badan leh; dhul cagar leh.

hercule, n.m. — qof xoog leh.

herculéen, adj. — xoog aad u wayn leh; xoog wayn.

hercynien, adj. — cimri jooloojia ah; hersiiniyan.

hère, n.m. — faqri; caydh.

héréditaire, adj. — dhaxal ah.

héréditairement, adv. — dhaxalnimo.

hérédité, n.f. — dhaxal.

hérésiarque, adj. — madax madhabta falaagowda ee diinta krish-tanka.

hérésie, n.f. — wax ka sso horjeeda dinta krishtanka oo ay cambaaraysay diintaso.

hérétique, adj. — leh madhab ka soo horjeeda diinta.

hérissement, n.m. — kicin.

hérisser, v. — kicis.

hérisson, n.m. — caanaqub; kashiito; dhiddo; yaadaddo.

héritage, n.m. — dhaxal.

hériter, v. — dhaxlid; ka dhaxlid.

héritier, n. — qofka dhaxalka leh; sida boqortooyada.

hermaphrodisme, n.m. — labeeb.

hermaphrodite, adj. — labeebnimo.

hermétique, adj. — adkayn; xidhidh; ku adkayn.

hermétiquement, adv. — si adag loo xidho.

hermétisme, n.m. — dahsoonaan; aan la fahmikarin.

herminette, n.f. — gudin; faas.

hernie, n.f. — eerno.

hernié, adj. — marka xuubka caloosho dilaaco oo ay caloosho soo baxdo.

hernieux, adj. — eerno leh.

héroïne, n.f. — naag geesiyad ah.

héroïne, n.f. — nooc ka mid ah mukhada raadka ama xashiishada.

héroïnomane, adj. — cuduŕ ka yimaad xashiishka.

héroïque, adj. — geesi khatar ah.

héroïquement, adv. — gessinimo; halyeynimo.

héros, n.m. — halyey; geesi.

herse, n.f. — ganjeelo weyn oo wax lagu xidho sida albaa--bada

hésitant, adj. — laga shakiyo.

hésiter, v. — shkiyid.

hétéroclite, adj. — ka dheer fanka.

hétérodoxe, adj. — ka duwan ama ka soo horjeeda fikrad.

hétérodoxie, n.f. — ka duwanaan.

hétérogène, adj. — kala duwan.

hétérogénéité, n.f. — kala duwanaan.

hétéromorphe, adj. — hab koodu kala duwan yahay.

hétéronome, adj. — gof aan maskaxdiisa ku socon ee tu kale ku socda.

hétéroptère, n.m. — nooc ka mid ah cayayaanka sida casha qudhunka

heu, interj. — ka yaabiya; yaab leh.

heur, n.m. — nasiib.

heure, n.f. — saacad; waqti; saacad sheegista baa lagu isticmaala.

- il est cinq heures — waa 5 (shan) saac.
- d'heure en heure — saacad walba; saacad kasta; saacadiiba mar.
- heures supplémentaires — shaqayn waqti dheeraad ah.
- laisser passer l'heure — iska indhatirid.
- heure de travail — waqti shaqo.
- quelle heure est-il? — meeqa saac?
- 3heures et quart — waa saddexdii iyo rubuc.
- 4 heures et demi — waa afartii iyo badh.
- 8 heures moins le quart — waa siddeedii oo rubuc dhimman.
- à l'heure — markeed (goorteed; jeerkeeda).
- heure du repas — saacada qadada.

heureusement, adv. — nasiib wanaag.

heureux, adj.	faraxsan; nasiib badan leh.
heurt, n.m.	isku dhac.
heurté,adj.	iska horimaad; is diidid fikradeed.
heurter, v.	ka nixin; jugsiin.
hexaèdre, n.m.	lix wajileh ama dhinac leh.
hexagonal, adj.	lix-xagal leh.
hexagone, n.m.	lix-xagale.
hexapode, n.m.	lix logood leh sida cayayaanka.
hiatal, adj.	daloola; banaan.
hiatus, n.m.	dalool; marka laba shibane isku xigan eray qudhah ama laba eray dhexdood.
hibernal, adj.	waxa dhaca qaboobaha.
hibernant, adj.	xayawaanka qaboobaha oo dhan jiifa.
hibernation, n.f.	hordo ku dhafid xilig qabowga.
hibou, n.m.	guumeys; nooc shiimbiraha ka mid ah.
hic, n.m.	guntin; arin adag.
hideur, n.f.	foolxumi.
hideusement, adv.	foolxumaan.
hideux,adj.	aad u foolxumindhaha u daran.
hiémal, adj.	geedaha baxa xiliga qaboobaha.
hier, adv.	shalay; maanta maalintii ka horreysay; shalayto.
hiérarchie, n.f.	kala sarayn (darajo).
hiérarchique,adj.	kala sarayn ku dhisan.
hiérarchiquement, adv.	la kala saraysiiyo.
hiérarchisation, n.f.	la sameeyo hab kala sarayn ku dhisan.
hiérarchiser, v.	kala hormarin.
hiéroglyphe, n.m.	farti masaaridi hore.
hilarant, adj.	qosol keena; lagu qoslo.
hilare,adj.	farxad dag dag ah.
hilarité, n.f.	lagu farxo.
hindi, adj.	afka hindido ku hadasho.

hippie, n.f. — hab dhalinta qarrkeed ay u nooshahay timo dheer daroog iwm.

hippisme, n.m. — ciyaarta farda fuulka.

hippodrome, n.m. — garoonka ama fagaaraha lagu tartansiiyo fardaha.

hippomobile, adj. — gaadhi faras.

hippoplagie, n.f. — gofka cuna hilibka fardaha.

hippopotame, n.m. — jeer (xaywaan webiga ku nool).

hirondelle, n.f. — shimbirbadeed.

hirsute,adj. — timo badan.

hispanique, adj. — isbaanish ah.

hispano-américain, adj. — ameerikada isbaanishka ku hadasha.

hisser, v. — taagid; marka calan la taago.

histoire, n.f. — taariikh; sheeko.

historié,adj. — sheeko lagu qoslo.

historien, n.m. — taariikhyahan.

historique, adj. — taariikh leh; ku caan ah taariikhda.
matérialisme historique — taariikhda maadiyadda.

historisme, n.m. — barashada taariikhda.

hitlérien,adj. — habkii Hitleer aaminsan.

hitlérisme, n.m. — fikradii Hitleer.

hiver, n.m. — qaboobaha; xagaaga; waadamaha kulul xiliga roobku da'o.

hockey, n.m. — xeego, barafka lagu kor ciyaaro.

hold-up, n.m. — dhac ; boobid.

hollandais, adj. — reer Hollan.

homard, n.m. — iskaanbe (xayawaan badda ku nool).

homicide, n.m. — dad layn; dad dilis.

hommage, n.m. — xusuus leh.

homme, n.m.	nin; qof; ruux.
homme de science	nin wax dhigasho fiican leh si weyn wax u dhigtay.
homme de loi	qareen; qofka barta sharciga.
jeune homme	wiil; ninka yar; kuray.
homme de métier	xirfadle.
l'Homme	bani-aadan.
homme politique	qofka siyaasiga ah; wax ka yaqaan siyaasadda.
homogène, adj.	isku mid ah.
homogénéisation, n.f.	la isu ekaysiiyo.
homogénéisé, adj.	isu ekaysiin.
homogénéiser, v.	la isuekeeyo.
homographe, n.m.	isku si wax u qora.
homologue, n.m.	labba qof oo siman.
homologuer, v.	isudhignaan.
homonyme, adj.	isku dhawaq ah (kalmado).
homophone, adj.	isku cod ah.
homosexualité, n.f.	khanisnimada.
homosexuel, adj.	khaniska.
homosphère, n.f.	hawada dhulka ku wareegsan ila iyo 100 kms oo joog ah.
homotherme, adj.	kulaylkiso iskumid yahay.
hongrois, adj.	reer hangeeriya.
honnête, adj.	daacad ah.
honnêteté, n.f.	daacadnimada; qummanaanta.
honneur, n.m.	sharaf; maamuus; sharfid; caan ah; sharaf u yeelid; qaddarin mudan; waynayn.
demoiselle d'honneur	gabadh gashaanti ah;
honnir, v.	dadka hortiisa lagu ceebeeyo.
honorabilité, n.f.	sharfid.
honorable, adj.	sharaf leh.
honorablement, adv.	la sharfo.
honoraire, n.m.	magacaabid sharaf ah.

honorer, v.	ixtiraamid.
honorifique, adj.	sharfid; ixtiraamid.
honte, n.f.	isku sheexid; isla yaabid.
honteusement, adj.	si khajal leh.
honteux, adj.	isla yaabid; isku sheexid; ceeb badan.
hôpital, n.m.	isbitaal; bukaanjiif.
hoquet, n.m.	higo.
hoqueter, v.	higood.
horaire, n.m.	faahfaahin ama qoraallo tusaaya wax lagu tala galay; jadwal.
horaires,n.m.pl.	looxa waqtiyada.
horion, n.m.	feedhidda; tatoomidda; judbidda.
horizontal, adj.	siman.
horizontalement, adv.	sinaan; aan kala dheedheerayn.
horloge, n.f.	sacaad wayn oo darbiga lagu dhajiyo.
horloger, n.m.	nin sacadaha sameeya ama gada.
horlogerie, n.f.	beecmushtarka sacaadaha.
horodateur, n.m.	makiinad qorta saacada iyo taariikhda.
horoscope, n.m.	cilmul falak.
horreur, n.f.	naxdin leh; cabsi leh.
horrible, adj.	aad u xun; necbaansho ama cabsi xun; naxdin leh.
horriblement, adv.	laga naxo.
horrifier, v.	naxdin-gelin; ka nixin; ka bajin.
horrifique, adj.	naxdin keena.
horripilant, adj.	dhibaato leh.
horripilation, n.f.	xaadu marka ay kacdo ;qamandhacada.

<u>hors</u>, prép.	dibad; ka saarid.
<u>hors-d'oeuvre</u>, n.m.	qaybta ugu horeeysa ee cunada.
<u>hors-jeu</u>, adj.	ciyaar ka saarid.
<u>hors-la-loi</u>, n.m.	sharciga ka baxsan.
<u>horst</u>, n.m.	dhulka marka kor uu u kaco.
<u>hors-taxes</u>, adj.	canshuurta marka laga saaro.
<u>hors-texte</u>, adj.	masawirada qoraalka ka baxsan.
<u>horticole</u>, adj.	abuurka jardiinooyinka.
<u>horticulteur</u>, n.m.	qofka jardiinooyinka ka shaqeeya.
<u>horticulture</u>, n.f.	cilmiga abuurka jardiinada.
<u>hospice</u>, n.m.	aqalka duqayda iyo caruurta aan waalidka lahayn lagu xanaaneeyo.
<u>hospitalisation</u>,n.f.	loo diro in u qofku isbiital seexdo.
<u>hospitaliser</u>, v.	takhtar la dhigo.
<u>hospitalité</u>, n.f.	soo dhawayn; xushmayn.
<u>hôtel</u>, n.m.	dhismaha (leh jiif iyo cuntaba) lagana kireeyo dadka; huteel; albeergo; loojin.
<u>hôtelier</u>, adj.	qofka aqoonta u leh ee maamula huteelàda.
<u>hôtesse</u>, n.f.	naagta ama gabadha loo martida yahay.
<u>houe</u>, n.f.	yaambo.
<u>houille</u>, n.f.	dhuxul dhagax noqotay.
<u>houiller</u>, adj.	casri joolooji ah oo dhuxusho samaysatay.
<u>houillère</u>, n.f.	ka samaysan dabaqado dhuxul dhagax ah leh.
<u>houle</u>, n.f.	mawjadda badda.
<u>houleux</u>, adj.	marka ay baddu kacsantahay.
<u>hourra</u>, inter. et n.m.	qaylo daqaal ama nabad salaan ah.
<u>houspiller</u>, v.	xumayn; jaaifayn.
<u>housse</u>, n.f.	dabool.
<u>huche</u>, n.f.	santooq loox ah ama khasnad loox ah.

hucher, v.	u dhawaqid.
huée, n.f.	qaylo dheer.
huer, v.	qaylin.
huile, n.f.	saliid.
huissier, n.m.	soo dhoweynta dadka gelaya riwaayadaha; siniimada xafladaha iwm.
saisir par huissier	rahmaad; kala rahma.
huit, adj.num.	sideed.
huitre, n.f.	nooc lohodka ka mid ah oo la cuno iyadoon la karin.
humain, adj.	bani'aadam.
humainement, adv.	bani'aadanimo.
humanisation, n.f.	hore u marinta aadamiga.
humaniser, v.	qof sharaf aadami loo yeelo.
humanisme, n.m.	ujeedo sida qofka bani'aadanka ah loo horo marinlaha.
humanitaire, adj.	si aadami ah dadka u fiican.
humanité, n.f.	dadnimo; bani'aadanimo; aadaminimo
humble, adj.	dulli ah; iska yara hooseeya (qof).
humblement, adv.	hoos is dhigid.
humectage, n.m.	la yare qooyo.
humecter, v.	qooyn.
humecteur, n.m.	qofka wax qooynaya.
humer, v.	fiifsi; neefka qaadasho xagga sanka oo sanqadh leh.
humérus, n.m.	lafta cududda.
humeur, n.f.	sida u kolba qofka niyaddiisu tahay; inuu murugaysan yahay; inuu farxan yahay; inuu qiiraysan yahay iwm.
bonne humeur	kaa farxinaya ku farxad gelinaya.
mauvaise humeur	hurrufid; si xun u eegid; hurruf.
humide, adj.	hawada oo qoyan ku dhexe jira (cimilo); suyuc; qoyaan; dharab.
humidificateur, n.m.	qofka wax qooya.

humidification, n.f. — la huyuciyo.

humidifier, v. — hoyocin ama yareheqoyn.

humidité, n.f. — dharab; qoyaan; aan weli qalalin.

humiliant, adj. — niyo ka dilid.

humilié, adj. — sharafta laga qaado.

humoriste, n.m. — niyo u haya.

huppe, n.f. — dhoor.

huppé, adj. — dhoor leh.

hurlant, adj. — qayliya (qof)

hurlement, n.m. — qaylo.

hurler, v. — qaylada dhuuban (xayawaanka, caruurta); codka libaaxa oo kale ah; qaylo dhuuban oo dheer (sida damqashada).

hurleur, n.m. — qofka qaylada badan.

hutte, n.f. — dargad; cariish; mundul.

hybridation, n.f. — muuq shabeel.

hybride, adj. — iska dhal; muwalad.

hybrider, v. — la hirgaliyo dhalasho wax aan isku asal ahayn.

hybridité, n.f. — muuq shabeelnimo.

hydne, n.m. — maara buqda; dooro dhurwaga.

hydratable, adj. — qoyi kara.

hydratant, adj. — dhaacaan sida saliida oo kale ah oo oogada la mariyo qooysana.

hydratation, n.f. — la qooyo.

hydrater, v. — qooyn.

hydraulique, adj. — ku socda biyo.

hydraulique, n.f. — cilmiga barashada qiyaasta iyo socodka biyaha.

hydrocarbure, n.m. — betrool.

hydrocéphale, adj. — madax waynaad.

hydroélectricité, n.f. — korontada biyaha kadhalata.

hydroélectrique, adj. — koronto laga dhaliyo quwadda biyaha.

hydrofugation, n.f. — biyo celin ama kasaarid biyo.

hydrofuge, adj. — biyaha celiya.

hydrogène, adj. — curiye hawo ah; haydarojiin.

hydrolyse, n.f. — falgalbiyood.

hydrolyser, v. — falgalin biyo.

hydrosoluble, adj. — biyaha ku baabi' i kara.

hydrothérapie, n.f. — cudurada biyaha lagu daaweeyo.

hydrothermal, adj. — biyo kulul.

hydrure, n.m. — curiye H^-. (kimiko).

hyène, n.f. — dhurwaa; waraabe.

hygiène, n.f. — feyo; dhawr; cilmiga fayo ama caafimaad ilaalinta.

hygiénique, adj. — nadiif ah; ka dhowrsan wasakh iyo wixii kale ee jiro keenaya; fayow.

hydromètre, n.m. — makiinad lagu qiyaaso qoyaanka hawada.

hydrophile, adj. — geedka isagu qoyaanka ama rayska raadsada.

hymen, n.m. — xoob khafiif ah ee qabadho leedahay inta aan la guursan bikirka.

hymne, n.m. — hees qaran; hees wadani ah.

hyperbole, n.f. — la buunbuuniyo.

hyperbolique, adj. — buunbuunis.

hyperémotivité, n.f. — gof wax walba aad u dhibsada.

hypermarché, n.m. — dukaan aad u wayn oo laga adeegto.

hypermétropie, n.f. — cudur indhaha ku dhaca oo dhaliya in aan si fiican wax loo arag.

hypernerveux, adj. — aad u cadho badan.

hypertendu, adj. — qofka dhiig kar leh.

hypertension, n.f. — dhiig kar.

hypertrophie, n.f. — u kora si aan caadi ahayn .

hypertrophier, v. — waynaan si aan caadi ahayn.

hypnose, n.f. — hurdo aan si caadi ah uu iman, qofka lagu sameeyo fal hurdo u keena.

hypnotiser, v. — seexin aan caadi ahayn.

hypnotiseur, n.m. — qofka dadka hurdada ka keena.

hypocrisie, n.f. — munaafaqnimo.

hypocrite, adj. — munaafaq.

hypocritement, adv. — si munaafaqnimo ah.

hypodermique, adj. — durid ah.

hypoglycémie, n.f. — marka sonkortu dhiiga ku yarato oo uu qofku wareero ama u dhulko ku dhoco.

hypotendu, adj. — qofka dhiig yarantu ku dhacdo.

hypotension, n.f. — dhiig yaran.

hypoténuse, n.f. — shakaal (saddex geeslaha dhinaciisa dheer).

hypothèse, n.f. — nadariyad.

hypotrophie, n.f. — nafaqo daro; nafaqo yaran.

hypovitaminose, n.f. — fitamiin la'aan.

hypsomètre, n.m. — makiinad lagu qiyaso dheeraarka dhulka inta uu u jiro heerka badda.

hystérie, n.f. — cadho badan.

hystérique, adj. — qofka cadhada badan.

ibère, adj.	reer isbaania.
ibn, n.m.	magac carab ka soo jeeda waa wiil.
iceberg, n.m.	jasiirad.
ici, adv.	halkan.
idéal, adj.	wax aad u fiican oo aan riyo ma'ahee aan run lagu gaadhi karin. Idiyaal.
idéalement, adv.	idiyaalnimo.
idéalisation, n.f.	idiyaaliisimka.
idéaliser, v.	fikrad fiican siin (qof).
idéalisme, n.m.	idiyaaliisimada.
idéaliste, adj. et n.	qofka idiyaalistiga ah.
idée, n.f.	fikarad; ra'yi.
idem, adv.	la mid ah.
identification, n.f.	aqoonsi; garasho.
identifier, v.	aqoonsiin.
identique, adj.	isku mid ah; isku eg.
identité, n.f.	aqoonsi.
idéogramme, n.m.	calaamad ama sawir fikrad sheegaysa.
idéographie, n.f.	calaamayn.
idéologie, n.m.	aaydiyoolojiyad.
idéologique, adj.	la xidhiidha aaydiyoolojiyada.
idéologue, n.	cilmiga aaydiyoolojiyada yaqaan.
idiome, n.m.	af dal gooniu leeyahay isla yaqaan.
idiot, adj.	qofka qalba daciifka ah; nacas.
idylle, n.f.	sheeko ku saabsan mashaakil qof soo maray ama jacayl.
idyllique, adj.	aad u fiican.

igname, n.m. — sonkor khaan (baradho macaan).

ignare, adj. — nacas; aqoonla; jaahil.

ignifugation, n.f. — gubasho ka celinta.

ignifugé, adj. — gubasho ka celin.

ignifuger, v. — ka yeelid shay in uusaan guban.

ignoble, adj. — saqajaan; waxba iskadhawrin.

ignominie, n.f. — sharaf dhicid dhicidda; qiimo beelidda.

ignominieux, adj. — sharaf dhac keena.

ignorance, n.f. — jaahilnimo.

ignorant, adj. — aqoonla; jaahil.

ignoré, adj. — aan aqoon loo lahayn.

ignorer, v. — iska dhegmarid; iska jaahil-yeelid.

il, pron. pers. — magac u yaal, isaga.

île, n.f. — gasiirad; dhul biyo ku soo wareegsan yihiin.

illégal, adj. — sharciga ka horjeeda.

illégalement, adv. — si sharci daro ah.

illégalité, n.f. — sharci daro ah.

illégitime, adj. — garac; farakh; wecel; aan sharcigu banaynayn.

illégitimement, adv. — sharci daro ah.

illégitimité, n.f. — sharci daro.

illétré, adj. et n. — aqoondarro; cilmidarro; aan akhrin karin. qorina karin (waxba).

illicite, adj. — sharci maaha; waa maamnuuc; lama oggola.

illicitement, adv. — wax aan la oggolayn; sharciga ka soo horjeeda.

illico, adv. — dhaqso; durba diiba; si degdeg ah.

illimité, adj. — aan xad lahayn.

illisible, adj. — aay adagtahay ama aan suuragal ahayn inla akhriyo; aan la akhriyi karin.

illogique, adj. — aan maskaxda galikarin; aan suuro gal ahayn.

illumination, n.f. — iftiiminta.

illuminer, v. — iftiimin; ilaysin.

illusion, n.f. — khaldamida; aan dhabahayn.

illusionner, v. — khaldamid.

illusionnisme, n.m. — wax runta ka soo horjeeda oo la sameeyo.

illusionniste, n. — qofka dadka indha saracaadiya; wax la yaab leh sameeya.

illusoire, adj. — aan dhab ahayn.

illustrateur, n.m. — qofka wax sawira.

illustration, n.f. — sawiraad.

illustre, adj. — caan ah; tixgelin leh.

illustré, adj. — leh ama ku saabsan sawiro la sameeyo.

illustrer, v. — sharax ama sifayn;leh tusaalooyin iyo sawiro.

ilot, n.m. — jasiirad yar.

image, n.f. — muuqaal sawir ah.

imaginable, adj. — la malayn karo.

imaginaire, adj. — malayn; mala'awaal.

imaginatif, adj. — maleeya.

imagination, n.f. — male iyo khayaal abuurid (maskaxda).

imaginer, v. — malayn; u malayn (maskax ka dhisid).

imām, n.m. — imaan; sheekha dadka tujiya.

imbattable, adj. — aan la qancin karin.

imbécile, adj. et n. — nacas.

imbécilité, n.f. — nacasnimo.

imberbe, adj. — aan gadh lahayn.

imbiber, v. — qooyn.

imbibation, n.f. — qooynta.

imbrication, n.f. — marka dhismaha laba dhagax dhagax lagu duldhiso.

imbriqué, adj. — laba dhagax oo isgarab yaala marka mid lagu dado.

imbriquer, v.	isdul fuushiin.
imbroglio, n.m.	aan cadayn; aan muuqan.
imbrûlable, adj.	aan guban karin.
imbu, adj.	buuxa.
imbuvable, adj.	aan lacabi karin.
imitateur, n.	jile; qofka wax jila.
imitatif, adj.	lagu dayan karo; tusaale laga qaadan kara.
imiter, v.	ku dayasho samayn; tusaale laga qaadan karo.
immaculé, adj.	aan wasakh lahayn;
immangeable, adj.	aan la cunikarin.
immanquable, adj.	aan laga maqnaan karin.
immatérialisme, n.m.	falsafad in kirta maadada.
immatérialité, n.f.	aan maadi ahayn (qofka).
immatériel, adj.	aan fikrad maadi ah lahayn.
immatriculation, n.f.	la diiwaan galiyo.
immatriculer, v.	diiwaan galis.
immature, adj.	aan weli baaluqin; aan qaan gaärin.
immaturité, n.f.	aan bislayn.
immédiat, adj.	isla markiiba (dakhso).
immédiatement, adv.	si degdeg ah; si dhaqso ah.
immémorial, adj.	aan la xusuusnayn wax hore u dhacay.
immense, adj.	aad u weyn; baaxaad weyn.
immensité, n.f.	aad u weynaan.
immerger, v.	biyo dhex gelin; muquursiin; biyo muquurid.
immérité, adj.	aan la mutaysan.
immersion, n.f.	biyo dhex galin.
immeuble, n.m.	aqal dhawrdabaq ka samaysan.
immigrant, adj.et n.	dal shisheeye ka yimid.
immigration, n.f.	doolid;dal kale oo la aado si loo dago.

immigré, adj. et n.	qax; dool.
immigrer, v.	haajirid; qaxid.
imminent, adj.	aad u dhaw; dhici waqti dhaw.
immiscer, s', v.	faragelin (arrin).
immixtion, n.f.	faragalinta arrin aan ku khusayn.
immobile, adj.	aan dhaqdhaqaaqayn.
immobilier, adj. et n.	qofka guryaha maamula dhaqaalahooda; ijaar--kooda iwm.
immobilisation, n.f.	curiyaamin; dhaqdhaqaaq loo diido.
immobiliser, v.	dhaqdhaqaaqid la'aan.
immobilité, n.f.	aan jabaq jabaq ama sanqadh lahayn.
immodéré, adj.	xad dhaaf
immolateur, n.m.	qofka wax sadaqaysta.
immolation, n.f.	sadaqo.
immoler, v.	sadaqaysi.
immonde, adj.	aad uxun; wanaag lahayn.
immondices, n.m.pl.	wasakh.
immoral, adj.	aan xurmo iyo sharaf midna lahayn.
immoraliste, n.m.	qof aan xushmad lahayn.
immoralité, n.f.	wasakh; xun.
immortel, adj.	waaraya; aan weligii dhimanayn.
immortel, n.m.	qof aan dhiman.
immortelle, n.f.	nooc ubax oo aan qalalin.
immuabilité, n.f.	aan beddeli karin.
immuable, adj.	aan la beddeli karin.
immunisant, adj.	cudur celin.
immunisation, n.f.	cudur ka celin.
immuniser, v.	cudur celin; cudur joojin.
immunité, n.f.	manaacada dabeeciga ah ee qofku leeyahay.
immunologie, n.f.	cilmiga barashada awooda qofku oo u leeyahay in uu cudurada iska celiyo.

immunothérapie, n.f. — wax kordhiya manaacada qofka.

impact, n.m. — isku dhac; raad ku leh.

impair, adj. — is dheer; tiro is dheer.

impalpable, adj. — aad khafiif u ah.

impardonnable, adj. — aan dambi dhaaf laahyn.

imparfait, adj. — aan hagaagsanayn; aan dhammayn.

imparfaitement, adv. — si aan hagaagsanayn.

impartageable, adj. — aan qaybsami karin.

impartial, adj. — aan laalaabka aqoon; toosan si fiican wax u maamula.

impartiabilité, n.f. — laalaab la'aan.

impartir, v. — u oggolaan.

impassible, adj. — aan waxba dareemin; dareen ama naxdin lahayn.

impatiemment, adv. — samir la'aan.

impatience, n.f. — samir daro.

impatient, adj. — samir la'aan; aan samir lahayn.

impatienter, s', v. — samir beelid.

impavide, adj. — cabsi la'aan; geesinimo.

impayable, adj. — sakhiif ah; dadka ka qosliya.

impayé, adj. — aan lacag ama mushaar la siin.

impeccable, adj. — aan ceeb lahayn, fiican.

impénétrable, adj. — aan la dhexgali karin, guntiisa la gaadhi karin.

impénitence, n.f. — madax adayga.

impénitent, adj. — qofka madaxa adag oo canaadiga ah.

impensable, adj. — aan laa malayn karin.

impératif, adj. — amarka; dadka la amro.

impérativement, adv. — amar ah khasab ah.

impératrice, n.f. — boqorada.

imperceptibilité, n.f. — maqal la'aanta.

imperceptible, adj. — aan la maqli karin.

imperfectible, adj. — aan la wanaajin karin.

imperfection, n.f. — iin leh; ceebaal leh.

impérial, adj. — la xidhiidha boqortooyada.

impérialisme, n.m. — siyaasadda gumeysiga; iinberyaaliyada.

impérialiste, adj. et n. — iinberyaalist.

impérieux, adj. — aan la diidi karin.

impérissable, adj. — aan dhimanayn; aan dhamaanayn.

imperméabilisation, n.f. — ka yeelid maro in aysan biyo soo dayn.

imperméabiliser, v. — laga yeelo wax aan biyo soodayn.

imperméabilité, n.f. — biyaha celiya; biyo soo dayn.

imperméable, adj. — aan biyo soo dayn.

impersonnalité, n.f. — shakhsiyad la'aan; dadnimo xumi.

impersonnel, adj. — aan gaar ahayn.

impertinemment, adv. — edeb daraan.

impertinence, n.f. — edebdaraan.

impertinent, adj. — hab aan xurmo ku jirin dadka u la aqdaanta.

imperturbable, adj. — aan waxba joojin karin.

imperturbablement, adv. — aan carqaladayn karin ama aan la joojin karin.

impétueusement, adv. — fal aan daganayn.

impétueux, adj. — marka si aan degganayn wax loo falo ama sameeyo.

impétuosité, n.f. — dabciga daganaan shiinyo la'aanta.

impie, adj. — diinta diidan; ka soo horjeeda diinta.

impiété, n.f. — nacaybka iyo ka yaqyaqsiga diinta.

impitoyable, adj. — naxariis daraan; naxariis la'aan.

implacabilité, n.f. — joojin la'aanta; dhimid la'aanta.

implacable, adj. — aan la dhimi karin.

implantation, n.f. — talaalka; abuuridda; beeridda.

implanter, v. — abuurid; beerid.

implication, n.f. — marka qofka dambiloo qabsado.

implicite, adj. — caadi; maskaxda gali kara; cad.

impliquer, v. — lug ku yeelasho dambi.

implorant, adj. — baryo; la baryo.

implorer, v. — weydiisad codsi ah (maxkamadda).

implosion, n.f. — qarxid.

impoli, adj. — edeb daran; aan edeb lahayn.

impoliment, adv. — edeb daro.

impolitesse, n.f. — xurmu la'aan.

impondérabilité, n.f. — wax aan horay loo sii ogaan karin.

impondérable, adj. — aan la sii ogayn oo dhaca.

impopulaire, adj. — aan shacbi ahayn; aan dadku oggolayn.

importable, adj. — la qaadan karo.

importance, n.f. — muhiimadiiso badantahay.

important, adj. — muhiim ah; lagama maarmaan.

importateur, adj. et n. — wax banaanka ka keena.

importation, n.f. — soo waaridid.

importer, v. — soo dejin; dibadda ka soo dhoofin ama ka soo dejin (alaab).

importunément, adv. — loo baahnayn.

importuner, v. — daalid.

importunité, n.f. — aan baahi loo qabin; loo baahnayn.

imposable, adj. — la khasbi karo.

imposant, adj. — xoog leh.

imposé, adj. — canshuur khasab ku ah in uu bixiyo.

imposer, v. — dulsaarid (cashuurta, waajibka shaqada iwm).

impossibilité, n.f. — suuro galid la'aanta.

impossible, adj. — aan suuragal ahayn; aan suurtoobayn.

imposteur, n.m. — qofka iska dhiga ama iska yeela waxaanu ahayn.

impôt, n.m. — canshuur.

impraticabilité, n.f. — aan la'isticmaali karin.

impraticable, adj. — aan la mari karin.

imprécation, n.f. — qof xumaan la la jeclaysto.

imprécis, adj. — aan sax ahayn.

imprécision, n.f. — aan sugnayn.

imprégnation, n.f. — qoynta; wax qoyan ka dhigidda.

imprégner, v. — qoyn; wax qoyan ka dhigid.

imprenable, adj. — aan la qabsan karin (qalcad).

impression, n.f. — daabicidda; ka yaabinta.

impressionnable, adj. — yaab leh.

impressionnant, adj. — yaab.

impressionner, v. — yaabin.

imprévisible, adj. — aan horay loo sii oggan karin.

imprévision, n.f. — aan loo sii diyaar garoobin.

imprévoyant, adj. — saado la'aan; sahan la'aan, aan laga fakarin.

imprévu, adj. — aan la filayn; aan loo diyaar garoobin.

imprimable, adj. — la daabici karo.

imprimante, n.f. — makiinada wax daabacda.

imprimé, adj. — daabacan.

imprimer, v. — daabicid.

imprimerie, n.f. — madbacada.

improbabilité, n.f. — aan suuro gal ahayn.

improbable, adj. — suurogal noqon karin.

improbation, n.f. — aan la oggolaan; la diido.

improductif, adj. — aan wax soo saarayn, aan wax dhalayn.

impromptu, adj. — wax dhaca oo aan lagu talo galin.

imprononçable, adj. — aan lagu dhawaaqi karin.

impropre, adj. — aan nadiif ahayn.

improprement, adv. — wasakh ah; aan sharaf lahayn.

improuvable, adj. — aan la cadayn karin; aan markhaati loo hayn.

improvisation, n.f. — wax iyada oo aan lagu tala galin markaba la'alifo.

improviser, v. — iyada oo aan lagu talagalin oo markaba la'alifo gabay; hees ama musiik iwm.

improviste, adj. — hab qorsho la'aan ku dhaca.

imprudemment, adv. — taxadar la'aan.

imprudence, n.f. — taxadarid la'aanta.

imprudent,adj. — aan taxadar lahayn.

impudence, n.f. — samayn fal aad sharafkaaga wax ugu dhima.

impudent, adj. — ceeb leh.

impudeur, n.f. — xishood daro aad ah.

impudicité, n.f. — fal ama eray aan xishood ku jirin.

impudique, adj. — waxba ka xishoon.

impuissance, n.f. — xoog la'aan.

impuissant, adj. et n. — awood yari; xoog daro.

impulser, v. — rixid; durkin.

impulsif, adj. — fal aan laqa fakarin.

impulsion, n.f. — gujayn; gujo.

impunément, adv. — ciqaab lahayn.

impuni, adj. — aan la ciqaabin.

impunité, n.f. — ciqaab la'aanta.

impur, adj. — aan saafi ahayn.

impureté, n.f. — wasakh ah aan nadiif ahayn.

imputable, adj. — sabab u noqon kara (arrin).

imputation, n.f. — qof dambi la iska saaro iyada oo aan loo hayn wax cad.

imputer, v. — qof wax loo nisbeeyo.

imputrescibilité, n.f. — leh dabci aan la kharibi karin.

imputrescible, adj. — aan la kharibi karin; aan la qudhmin karin.

inabordable, adj. — aan loo dhawaan karin; aan lala hadli karin.

inabrité, adj.	aan la degi karin.
inaccentué, adj.	carabka lagu dhufan karin.
inacceptable, adj.	aan la'oggolaan karin.
inacceptation, n.f.	diidmada.
inacceptabilité, n.f.	oggolaanshiinyo la'aanta.
inaccessible, adj.	aan la gali karin; loo dhawaan karin.
inaccompli, adj.	aan dhammayn.
inaccordable, adj.	aan loo oggolaan karin.
inaccoutumé, adj.	aan la caadaysan; aan loo baran.
inachevé, adj.	aan dhammaan; wali socda.
inachèvement, n.m.	dhamaad la'aanta.
inactif, adj.	aan firfircoonayn.
inaction, n.f.	aan waxba qaban; dhaqdhaqaaq la'aan.
inactivité, n.f.	aan noolayn; firfircoonaan la'aanta.
inactuel, adj.	aan casriga ahayn.
inadaptation, n.f.	laqabsasho la'aanta.
inadapté, adj.	aan la qabsan karin.
inadéquat, adj.	aan ku filnayn; aan kaafiyi karin.
inadmissible, adj.	aan loo qiri karin; aan lagu yeeli karin.
inadvertance, n.f.	digtoonaan la'aanta.
inaliénabilité, n.f.	isbedal la'aanta aan jidka toosan laga leexan.
inaliénable, adj.	aan la duwi karin.
inaliénation, n.f.	weecasho la'aan; toosnaan wanaagsanaan; jidka fiican aan laga duwi karin.
inaltéré, adj.	aan isbedel ku dhicin.
inamical, adj.	saaxiibtinimo la'aan; col ah.
inamissible, adj.	aan lumi karin.
inanimé, adj.	naf la'aan; aan naf lahayn ama noolayn.
inanité, n.f.	macna aan laahyn.
inanition, n.f.	cuno joojinta; cuno ka istaaga .

inapaisé, adj.	aan cadho joojin.
inaperçu, adj.	aan la'arkayn; aan muuqan.
inappétence, n.f.	aan cuno jeclayn.
inapplicable, adj.	aan ku habboonayn.
inapplication, n.f.	ku haboonaan la'aanta.
inappliqué, adj.	aan lagu dabaqi karin.
inappréciable, adj.	la qiyaasi karin.
inapprécié, adj.	aan la qiyaasi karin.
inapprivoisé, adj.	aan la soo xero galin karin.
inapte, adj.	aan ku haboonayn.
inatitude, n.f.	awood la'aanta.
inarrangeable, adj.	aan la hagaajin karin.
inassimilable, adj.	aan la fahmi karin; aan la qaadan karin.
inassouvi, adj.	aan la jeclaankarin, raali gal ahayn.
inassouvissement, n.m.	necbanta, aan raali galin.
inattaquable, adj.	aan la weerari karin.
inattendu, adj.	aan la filayn.
inattentif, adj.	aan feejiignayn; aan digtoonayn.
inattention, n.f.	aan laga feejignaan.
inaudible, adj.	aan la maqli karin.
inaugural, adj.	boogajin.
inauguration, n.f.	boogajinta; maamus meel cusub.
inaugurer, v.	furid meel cusub.
inauthentique, adj.	aan dhab ahayn.
inavouable, adj.	aan la qiran karin.
inavoué, adj.	aan la qiran.
incalculable, adj.	aan la qiyaasi karin; aan la tirin karin qaali ah.
incapable, adj.	aan yeeli karin, aan awood lahayn.

incapacité, n.f. — tamar la'aanta.

incarcération, n.f. — xidhidda; xabisidda.

incarcérer, v. — xabsiyid; xidhid.

incarné, adj. — hoos u baxa; hoos u kora.

incassable, adj. — aan jabi karin.

incendiaire, n. — qofka wax guba.

incendie, n;f. — gubasho.

incendier, v. — gubid.

incertain, adj. — aan la hubin; hubaal ahayn.

incertitude, n.f. — aan la hubin.

incessament, adv. — waqti go'an laahyn;

incessant, adj. — kala joogsi lahayn.

inchangé, adj. — aan badalmin.

inchavirable, adj. — aan la rogrogi karin.

incidemment, adv. — si kada ah.

incidence, n.f. — abbaar; tusmo; marin; aaddanaan.
angle d'incidence — xagal abbaarka.

incident, adj. — is afgaran waa.

incinération, n.f. — dambas laga yeelo, la gubo.

incinérer, v. — meyd gubid; la gubo meydka.

incirconcis, adj. — aan gudnayn; balagtu ku taal.

incirconcision, n.f. — gudmo la'aanta:

incise, n.f. — eray odhaah ka duwan la dhex galiyo.

inciser, v. — goyn.

incisif, adj. — wax gooya.

incision, n.f. — goynta.

incisive, n.f. — fool; dhool (ilkaha hore ee dadka).

incitateur, n.m. — qofka wax ku geesinimo galiya.

incitation, n.f. — ku riixidda; ku geesinimo galinta.

inciter, v. — ku riixid.

incivil, adj. — edeb daran.

incivique, adj. — aan wadani ahayn; dalkiisa aan jeclayn.

incivisme, n.m. — jiritaan la'aan wadaninimo.

inclassable, adj. — aan la nidaamin karin.

inclinaison, n.f. — janjeedh.

inclination, n.f. — janjeedhka.

incliner, v. — janjeedhis; dhinac u janjeedhin.

inclure, v. — ku jira.

inclus, adj. — ka mid ah.

inclusion, n.f. — ku darid.

inclusivement, adv. — lagu daro.

incognito, adv. — ayada oo aan la garanayn.

incohérence, n.f. — aan xidhiidh lahayn.

incohérent, adj. — aan is haysan.

incollable, adj. — ka jawabi kara su'aal walba.

incolore, adj. — aan midab lahayn.

incombustible, adj. — aan dab loo isticmaali karin; aan guban.

incomestible, adj. — aan la cuni karin.

incommodant, adj. — wax dhiba.

incommode,adj. — dhib keena.

incommoder, v. — dhibato iyo xanuun keena.

incommodité, n.f. — dhibka; xanuunka.

incommunicable, adj. — aan lala xidhiidhi karin.

incomparable, adj. — aan lays barbardhigi karin.

incomparablement, adv. — is barbardhig la'aan.

incompatibilité, n.f. — aan israci karin.

incompatible, adj. — isdiidaya.

incompétence, n.f. — aan aqoon lahayn.

incompétent, adj. — aan garasho u lahayn.

incomplet, adj.	aan hagaagsanayn; aan dhammayn; aan buuxin.
incomplètement, adv.	si aan dhammaystirayn.
incompréhensible, adj.	aan la Cami karin.
incompréhensif, adj.	aan Cahmayn.
incompréhension, n.f.	aan is fahmi karin.
incompressibilité, n.f.	aan la isku riixi karin.
incompressible, adj.	aan xajmigiisa la yarayn karin.
incompris, adj.	aan la helin qiimihiisa.
inconcevable, adj.	aan la qaadan karin.
inconcevablement, adv.	si aan loo qaadan karin.
inconciliable, adj.	aan hishiin karin.
inconditionné, adj.	shardi la'aan.
inconditionnel, adj.	aan sabab loo yeelin; aan shardi ku xidhnayn.
inconduite, n.f.	akhlaaq xumi.
inconfort, n.m.	aan raaxo lahayn.
inconfortable, adj.	aan lagu raaxaysan karin.
inconnaissable, adj.	aan la aqoonsan karin.
inconnu, adj.	aan la aqoon caan ahayn.
inconsciemment, adv.	si aan garasho laahyn.
inconscience, n.f.	garasho la'aan; nacasnimo.
inconscient, adj.	garasho daro.
inconscient, n.m.	caqli daro.
inconséquemment, adv.	si aan xor ka ahayn.
inconsidéré, adj.	aan loo fiirsan.
inconsistant, adj.	aan caqli gali karin.
inconsolable, adj.	aan la dajin karin.
inconsolé, adj.	aan laxawga laga bi'in karin.
inconsommable, adj.	aan la kharash garayn karin;
inconstance, n.f.	daganaan la'aan, fudayd.
inconstant, adj.	isbedbedalaya; aan xidhiidh u socon.

inconstatable, adj. — aan la'arki karin.

inconstitutionnalité, n.f. — aan sharci ahayn.

inconstitutionnel, adj. — ka soo horjeed sharciga.

inconstitutionnellement, adv. — sharciga khilaafsan.

incontestabilité, n.f. — aan la diidi karin.

incontestable, adj. — aan la dafiri karin.

incontestablement, adv. — siiba aan la diidi karin.

incontesté, adj. — aan la diidi karin.

incontinent, adj. — durba; hadiiba.

incontinent, adv. — si dhaqsa ah.

incontrôlable, adj. — aan la xukumi karin.

incontrôlé, adj. — aan la xukumin.

inconvenance, adj. — aan fa'iido lahayn.

inconvenant, adj. — wixi fal iyo erayba wax dhawaca.

inconvénient, n.m. — khasaaro leh.

inconvertible, adj. — aan badalmi karin.

incorporable, adj. — aan is raaci karin.

incorrect, adj. — aan sax ahayn.

incorrectement, adv. — si aan toosnayn.

incorrection, n.f. — khaldan oo aan la toosin.

incorrigibilité, n.f. — aan la sixi karin.

incorrigible, adj. — toosmi karin.

incorrigiblement, adv. — aan saxmi karin.

incorruptible, adj. — aan la kharibi karin.

incrédibilité, n.f. — aan la malayn karin.

incrédule, adj. — qofka aan ilaahay rumaysnayn.

incrédulité, n.f. — diin la'aan.

incréé, adj. — waligi jira.

increvable, adj. — aan daalin.

incriminable, adj. — dambiile noqon karin.

incrimination, n.f. — eedays.

incriminer, v. — eedayn.

incristallisable, adj. — aan adkaan; aan fadhiisan.

incroyable, adj. — aan la rumaysan karin; aan caqli gal ahayn.

incroyablement, adv. — si aan la malayn karin.

incroyance, n.f. — diin aamin la'aan; caqiido la'aan.

incroyant, adj. — qofka aan ilah rumaysnayn.

incrustant, adj. — golof macdanta dulfuusha.

incrustation, n.f. — qolfaysiga macdanta.

incruster, v. — qolfaysi.

inculcation, n.f. — wax lagu abuuro maskaxda qofka.

inculpation, n.f. — dambi loo qabsado.

inculpé, n. — qabasho dambiile.

inculper, v. — danbi ku qaadid.

inculquer, v. — maskaxda qofka wax lagu beero.

inculte, adj. — waxba ka bixi karin.

incultivable, adj. — aan la beeran karin.

incultivé, adj. — aan la beerin.

incurabilité, n.f. — cudur siiba aanlaga bogsan karin.

incurable, adj. — aan laga bogsan karin.

incurablement, adv — aan siiba laga dawoobin.

incurie, n.f. — aan la xanaanayn; la dayactirin.

incurieux, adj. — aan ilgal ahayn; aan jeclayn in uu waxwalba ogaado.

incuriosité, n.f. — aan kala jeclayn.

incursion, n.f. — weerarid.

incurvation, n.f. — godnaanta.

incurver, v. — godan.

indébrouillable, adj. — qaf aan isdabiri karin.

indécachetable, adj. — aan la furin; xidhan.

indécemment, adv. — si edeb aanay ku jirin.

indécence, n.f. — edeb daro; afxumi.

indécent, adj. — xumaan; wanaag ka horjeeda.

indéchiffrable, adj. — aan la'akhrin karin.

indéchirable, adj. — aan la jeexi karin.

indécis, adj. — aan dooran; aan goosan.

indécision, n.f. — doorasho la'aan.

indéclinable, adj. — aan la diidi karin.

indécollable, adj. — aan kici karin; duuli karin.

indécomposable, adj. — aan laga kala furfuri karin.

indécrottable, adj. — aan la sixi karin.

indéfendable, adj. — aan la diifaaci karin.

indéfini, adj. — aan la qeexi karin; aan la caddayn karin.

indéfiniment, adv. — si aan qeexnayn.

indéfinissable, adj. — aan la garan karin; aan sugi karin.

indéformable, adj. — aan badalmi karin.

indélébile, adj. — aan tirtirmi karin.

indélébilité, n.f. — tirmid la'aanta.

indélicat, adj. — xushmad la'aan.

indélicatement, adv. — si aan xushamadi ku jirin.

indélicatesse, n.f. — xurmo la'aan ah.

indemne, adj. — aan dhibaato ku dhicin.

indemnisable, adj. — xaq siin.

indemnisation, n.f. — xaq siinta.

indemniser, v. — u celin qof wixi ka lumay.

indemnitaire, adj. — qofka xaqiisa qaata.

indemnité, n.f. — xaq; magdhaw.

indémontable, adj. — aan la furfuri karin.

indémontrable, adj. — aan la cadayn karin.

indéniable, adj. — aan la inkiri karin.

indénouable, adj.	aan la kala furfuri karin.
indépendamment, adv.	xornimo.
indépendant, adj.	aan cid ama waxba ku tiirsanayn; xor ah; aan tixgelin laahyn; aan la tirsan.
indéracinable, adj.	aan la rujin karin.
indéréglable, adj.	aan la khaldi karin.
indescriptible, adj.	aan lagu dhawaqi karin.
indésirable, adj.	aan la rabin.
indestructible, adj.	aan la burburin karin; aan la dumin karin.
indéterminable, adj.	aan la fasiri karin.
indétermination, n.f.	garasho la'aanta; go'aan la'aanta.
indéterminé, adj.	dhana raacsanayn.
indéterminisme, n.m.	dhana raacsanaan la'aanta.
index, n.m. (doigt)	farta; murugsato.
indicateur, adj.	tilmaan; astaan.
indicateur, n.m.	jaajuus; tilmaame; basaas.
indicatif, adj.	calaamad ama lambar wax lagu garto.
indication, n.f.	summad; astaan.
indice, n.m .	calaamad.
indiciaire, adj.	ku xidhan calaamad.
indicible, adj.	aan la dhihi karin.
indiciblement, adv.	si aan la dhihi karin.
indiction, n.f.	tilaamidda; tusaalaynta.
indien, adj.	hindidi ameerika ku noolayd.
indifféremment,adv.	aan kala jeclayn.
indifférence, n.f.	aan kala ogayn.
indifférent, adj.	aanay khusayn.
indifférentisme, n.m.	kala jeclaan la'aanta.
indifférer, v.	qof aan waxba kala jeclayn.
indigence,n.f.	faqrinimo badan.

indigène, adj. et n.	dadka ku nool meeshay ku dhasheen.
indigent, adj.	faqiir; sabool; miskiin.
indigeste, adj.	aan dheef shiidmayn.
indigestion, n.f.	yaqyaqsi yalaalugo.
indigne, adj.	xushmad daran.
indignement, adv.	xushmad daraanta.
indigner, v.	sharaf dilid.
indignité, n.f.	sharaf dilidda af la gadaynta.
indigo, n.m.	buluug (midab).
indiquer, v.	tilmaamid, tusid.
indirect, adj.	aan toos ahayn; si dadban.
indirectement, adv.	si aan toos ahayn; qof aan hortiisa waxba laga dhihin.
indiscernable, adj.	aan la soo sooci karin.
indisciplinable, adj.	aan la edbin karin.
indiscipline, n.f.	edeb la'aan.
indiscipliné, adj.	nidaam ka soo horjeeda.
indiscret, adj.	aan qarsoodiga aqoon; wax walba iska dhaha.
indiscrètement, adv.	si aan qarsoodi ahayn.
indiscrétion, n.f.	sir la'aanta.
indiscutable, adj.	aan laga sheekaysan karin.
indiscutablement, adv.	si aan sheeko lahayn.
indiscuté, adj.	aan laga sheekaysan.
indispensable, adj.	loo baahan yahay, lagama maarmaan ah.
indisponibilité, n.f.	aan diyaar ahayn.
indisponible, adj.	si aan diyaar ahayn.
indisposé, adj.	yarehe xanuunsan.
indisposer, v.	aan raali laga ahayn.

indisposition, n.f. — wareer yar.

indisputé, adj. — aan la diidi karin.

indissociable, adj. — aan la kala reebi karin.

indissolubilité, n.f. — ku baabi'id la'aan.

indissoluble, adj; — aan biyaha ku baabi' karin.

indistinct, adj. — aan la qaran karin; aan la arki karin.

indistinctement, adv. — siiba aan la kala sooci karin.

individu, n.m. — qof; ruux.

individualisation, n.f. — keli kaliyeen.

individualiser, v. — keli ka yeelid.

individualisme, n.m. — keli noolaan.

individualiste, n. — qofka keligi jeceyl in uu noolaado.

individuel, adj. — shakhsi gaar ahaaneed; gaar ahaan; keli-keli.

indivisible, adj. — aan la qaybin karin.

indivision, n.f. — wada lahaan; wadaagid.

indochinois, adj; — reer indoshiin.

indocile, adj. — aan amar qaadan.

indocilité, n.f. — si amar diido ah.

indolemment, adv. — si aan kala doorasho lahayn.; kala jeclayn.

indolence, n.f. — kala jeclayn.

indolent, adj. — kala jeclayn.

indolore, adj. — aan xanuun lahayn.

indomptable, adj. — aan la maamuli karin; aan la xokumi karin.

indompté, adj. — sii aan la celin karin.

indonésien, adj. — reer indunisia.

indu, adj.(contre la règle) — sharciga ka soo horjeeda.

indu, adj.(qui ne doit pas être payé) — aan wajib ahayn.

indubitable, adj. — aan laga shakiye karin.

indubitablement, adv. — shaki la'aan; dhab ah.

induction, n.f. — wax ku bilawda keli-keli kaddibna arrin guud noqota.

induire, v. — keenid; soo gelin.

indulgence, n.f. — si sahlan ama fudud dadka ugu dambi dhaafa.

indulgent, adj. — qofka dambi dhaafka badan.

indurer, v. — adkayn; wax adag ka dhigid.

industrialisation, n.f. — warshaddaynta.

industrialiser, v. — warshaddayn.

industrialisme, n.m. — hab ka warshaddaynta.

industrie, n.f. — warshadda.

industriel, adj. — warshadaysan; ee warshadeed.

industriel, n.m. — warshadaye.

industriellement, adv. — hab warshadayn.

industrieux, adj. — shaqo badan.

inébranlable, adj; — aan badbadalmin.

inébranlablement, adv. — go'aan leh.

inéchangeable, adj. — aan la isku badali karin.

inédit, adj. — aan haray loo qorin; aan hore loo aqoon.

inéductable, adj. — aan la barbaarin karin.

ineffaçable, adj. — aan la tirtiri karin.

ineffaçablement, adv. — si aano u tirtirmin.

inefficace, adj. — aan si buuxda wax u tarayn.

inefficacité, adj. — firfircoonaan la'aan.

inégal, adj. — isla'ekayn.

inégalable, adj. — aan is la'ekayn.

inégalement, adv. — si aan sinayn.

inégalité, n.f. — sinnan la'aan.

inélégamment, adv. — xarago la'aan.

inélégance, n.f. — xarago la'aanta.

inélégant, adj. — aan xarago lahayn.

inéligibilité, n.f. — aan la dooran karin.

inéligible, adj.	aan doorasha gali karin.
inéluctable, adj.	aan la joojin karin.
inéluctablement, adv.	si aan la joojin karin.
inemployable, adj.	aan shaqayn karin; aan la isticmaali karin.
inemployé, adj.	aan shaqayn;
inepte, adj.	aan u qalmin; aan suuro galayn.
ineptie, n.f.	suuro gal la'aan.
inépuisable, adj.	aan dhammanayn.
inépuisablement, adj.	si aan dhammad lahayn.
inépuisé, adj.	aan la dhammayn karin.
inéquitable, adj.	aan is la'ekayn.
inerte, adj.	aan lahayn quwad uu wax ku dhaqaajiyo ama kula falgalo.
inespéré, adj.	aan rajo lahayn.
inesthétique, adj.	aan quruxsanayn.
inestimable, adj.	aan la qiyaasi karin; aad u weyneyn qaali ah.
inétendu, adj.	aan waynayn; yar.
inévitable, adj.	lama huraan ah.
inévitablement,adv.	si lama huraan ah.
inexact, adj.	aan sax ahayn.
inexactement, adv.	si aan sax ahayn.
inexactitude, n.f.	aan sax ahayn.
inexaucé, adj.	aan la hirgalin.
inexcitabilité, n.f.	aan laga xanaajin karin.
inexcitable, adj.	aan xanaaqin.
inexcusable, adj.	aan loo dambi dhaafi karin; aan loo dul-qaadan karin.
inéxécutable, adj.	aan la fulin karin.
inexécuté, adj.	aan siiba la hirgalin karin.
inéxécution, n.f;	hirgalid la'aanta.

inexercé, adj. — aan waayo arganimo lahayn.

inexigibilité, n.f. — aan la khasbi karin.

inexigible, adj. — aan khasab ahayn.

inexistant, adj. — aan jirin.

inexistence, n.f. — jiritaan la'aan.

inexorable, adj. — aan la joojin karin (khatar, wakhti..).

inexorablement, adv. — aan la celin karin.

inexpérience, n.f. — waayo aragnimo la'aan.

inexpérimenté, adj. — aan khibrad lahayn.

inexpié, adj. — aan la ciqaabin.

inexplicable, adj. — aan la fasiiri karin.

inexplicablement, adv. — si aan fasiraad laahyn.

inexpliqué, adj. — aan la fasiirin.

inexploitable, adj. — aan la qodan karin (macdan). aan laga faa'idaysan karin.

inexploité, adj. — aan laga faa'idaysan; aan la qodan.

inexplorable, adj. — aan la baadhi karin; aan la raadin karin.

inexploré, adj. — dihin.

inexplosible, adj. — aan qarxi karin.

inexpressif, adj. — aan waxba sheegayn.

inexprimable, adj. — aan laga hadli karin; aan hadal lagu soo koobi karin.

inexprimé, adj. — aan la sheegin.

inexpugnable, adj. — iska caabiya; iska celiya, karti leh.

inextensible, adj. — aan balaadhan karin.

inextinguible, adj. — aan la damin karin.

inextirpable, adj. — aan la soo bixin karin.

inextricable, adj. — aan la xallin karin.

inextricablement, adv. — si xal aan lahayn.

infaillibilité, n.f. — aan khaldamin.

infaillible, adj.	aan khaldamayn.
infailliblement, adv.	toosan ; sax ah.
infaisable, adj.	aan la samayn karin.
infalsifiable, adj.	aan la khaldi karin; aan been laga sheegi karin.
infâme, adj.	sakhiifnimo; liidnimo.
infâmie, n.f.	fal sakhiifnimo ah.
infanterie, n.f.	ciidaanka lugta; askarta lugta ah.
infanticide, adj.	carruur dilid.
infantile, adj.	carruurnimo.
infantilisme, n.m.	carruur iska yeel qof weyn oo u aqdaanta sida carruurta.
infatigable, adj.	aan daalayn.
infatigablement, adv.	si aan daalid lahayn.
infécond, adj.	mandhalays; aan dhalin.
infécondité, n.f.	dhalmo la'aan.
infect, adj.	xun; wasakh ah.
infectant, adj.	wasakhaysan.
infecter, v.	wasakhayn (cudur).
infectieux, adj.	cudur leh.
infection, n.f.	dhaawac; boog.
inférieur, adj.	hooseeya (darajo iwm); ee hooseeya.
inférieurement, adv.	hoos ahaan.
inférioriser, v.	hoos u dhigid.
infériorité, n.f.	hoos u dhicidda.
infermentescible, adj.	khamiri kara.
infernal, adj;	dhib badan (carruur..) cadaab leh.
infertile, adj.	(dhul) aan wax ka bixin.
infertilité, n.f.	aan beer laga abuuran karin.
infidèle, adj.	aan u daacad ahayn.

infidélité, n.f. — daacadnimo la'aan.

infiltration, n.f. — soo dhex gelidda.

infiltrer, s', v. — dhex gelid.

infime, adj. — aad u yar.

infini, adj. — aan dhammaad lahayn.

infini, n.m. — meel uu ku dhammaado lahayn.

infinité, n.f. — tiro badan.

infirmatif, adj. — ka soo horjeeda.

infirmation, n.f. — isburin; isdiid.

infirme, adj. et n. — curyaan.

infirmer, v. — diidid.

infirmerie, n.f. — ambolotooryo; meel dawada laga qato.

infirmier, n.m. — farmayeeri ; kalkaaliye caafimad.

infirmière, n.f. — farmayeeriyad; kalkaaliyad caafimad.

inflammable, adj. — si hawl yar dabka u qabsan og.

inflammation, n.f. — boogow.

inflammatoire, adj. — boogoobi kara.

inflation, n.f. — qiimo barar.

inflationniste, adj. — qiimo barar leh.

infléchir, v. — fikrad ka bedelid.

inflexible, adj. — aan qallocsami karin; aan la qalloocin kari.

inflexion, n.f. — lalabid; isku lalabid.

influençable, adj. — la duufsan karo.

influence, n.f. — duufsasho; quwad; xoog; awood.

influencer, v. — duufsi.

influent, adj. — awood leh.

influer, v. — fikrad ku beerid si wax loo duufsado.

informateur, n. — qofka warka geeya; jaajuus.

informaticien, n. — qofka aqoonta u leh kombiyuutarka.

informatif, adj. — wargeeye (qof).

information, n.f. — war; akhbaar; warka idaacada.
les Informations — war; wararkii (war bixintii) ugu dambeeyey.

informatique, n.f. — kombiyuutarka la xidhiidha.

informatiser, v. — kombiyuutar la galiyo.

informe, adj. — aan dhammaysnayn; aan jaangooyo lahayn.

informé, adj. — u sheegid; wargalin.

informel, adj. — aan sugnayn.

informer, v. — wargelin; la wargeliyo; sheegid.
s'informer — la weydiiyo; weydiisi; wardoonis.

infortune, n.f. — murugo; qofka had iyo jeer niyada xun; marxalad xun; nasiib darada.

infortuné, adj. — nasiib-darro; nasiib-xumo.

infraction, n.f. — sharci jabin; sharciga oo aan la dhawrin.

infranchissable, adj. — aan la gudbi karin.

infrangible, adj. — aan la jabin karin.

infrastructure, n.f. — asaaska ama saldhiga (nolosha, siyasad iwm).

infréquentable, adj. — aan xidhiidh lala yeelan karin; aan saxiib--nimo lahayn.

infroissable, adj. — aan la jactadin karin.

infructueux, adj. — aan miro lahayn; fa 'iido la'aan.

infumable, adj. — aan la cabi akrin (sigaarka oo kali ah).

infus, adj. — aqoonta qofku wax isbaro isaga oo aan nina gacan siin.

infuser, v. — ku dhex baabi'in; ku dhacamid sida shaaha.

infusibilité, n.f. — ku dhex baabi'id.

infusible, adj. — aan ku dhexbaabi'in.

infusion, n.f. — shaah; caleenta shaaha.

infusoire, adj. — caleen la karsado kaddibna la cabo (shaah, tiisan, manta, iwm).

ingagnable, adj. — aan lagu guulaysan karin.

ingénier, s', v. — baadhis ama wax raadin;

ingénieur, n.m. — injeneer; aqoonyahan farsamo.

ingénieux, adj. — qofka xariifka ah; xirfadda iyo maskaxda badan.

ingénu, adj. — laab xaadhni.

ingénue, n.f. — jilista gabadh qalbi xaadhan.

ingénuité, n.f. — dhadhawi; miskiinimo; laga roonyahay.

ingénument, adv. — laga roonaan.

ingérence, n.f. — faragalin shisheeye.

ingérer, v. — marka qofka afka inta wax laga galiyo ilaa caloosha la gadho.

ingouvernable, adj. — aan la xukumi karin.

ingrat, adj. — jaaxid; ixsaan aan gudin.

ingratitude, n.f. — abaal laawe.

ingrédient, n.m. — maadada dhismaha ka mid ah (wax).

inguérissable, adj. — cudur aan laga bogsan karin.

ingurgiter, v. — qudhqudhin; qudhqudhis; si degdeg ah wax u liqliqid.

inhabile, adj. — edeb la'aan; si aan sharaf lahayn.

inhabilement, adv. — sharaf la'aan.

inhabileté, n.f. — xurmo la'aanta.

inhabilité, n.f. — wax sharci ah aan qaban karin.

inhabitable, adj. — aan la dagi karin.

inhabitué, adj. — aan caadi ahayn; aan loo baran.

inhabituel, adj. — aan la aqoon; aan loo baran; aan horay u dhici jirin.

inhalateur, n.m. — neefqaadasho loo isticmaali karin.

inhalation, n.f. — neef qaadashada.

inhaler, v. — neef qaabasho.

inharmonieux, adj. — aan maqalka u roonayn sida hees aan maqal fiicnayn; aan is ku fiicnayn.

inhérence, n.f. — ku xidhnaan.

inhérent, adj. — ugu xidhan si cadifad iwm.

inhiber, v. — mucaarad firfircoon abuuris.

inhibiteur, adj. — joojin ama socodkooda oo la yareeyo wax socda.

inhibition, n.f. — yarayn ama joojin dhaqdhaqaaq.

inhospitalier, adj. — aan soo dhawayn lahayn; aan martiqalin lahayn.

inhumain, adj; — axmaqnimo; aan dadnimo ahayn; bani'aada--nimo ahayn.

inhumainement, adv. — aan aadaminimo ahayn.

inhumanité, n.f. — hab aadaminimada ka soo horjeeda.

inhumation, n.f. — aas; xabaalis ama duugis, marka qof la aasayo.

inhumer, v. — aasid; xabaalid; duugid; marka qof dhintay xabaasha lagu rido ee la aaso.

inimaginable, adj. — aan la malayn karin.

inimitable, adj. — aan lagu dayan karin.

inimitié, n.f. — cadawnimo; nacayb.

ininflammabilité, n.f. — aan guban karin.

ininflammable, adj. — aan la gubi karin.

inintelligemment, adv. — nacasnimo; caqli la'aan.

inintelligence, n.f. — nacasnimoda.

inintelligent, adj. — nacas.

inintelligibilité, n.f. — wax garasho la'aan.

inintelligible, adj. — garasho la'aan.

inintelligiblement, adv. — dabci nacasnimo leh.

inintéressant, adj. — aan xiiso lahayn;

ininterrompu, adj. — aan kala joojis lahayn.

inique, adj; — sharci daro ku socda.

iniquité, n.f. — sharci daro aad u badan.

initial, adj. — bilowga; ka bilowda.

initiale, n.f. — laga bilaabo.

initialement, adv. — ugu horayn; asal.

initiateur, adj. — bare.

initiation, n.f. — baridda.

initiative, n.f.	go'aan qaadasho; ku tilaabsasho.
initié,adj.	khibrad; waayo-aragnimo leh (wax barasho).
initier, v.	bilaabid; u yeelid.
injecter, v.	durid;mudid.
injecteur, adj.	mude; dalooliye.
injection, n.f.	dhaawicid (qoomis iwm); durid.
injouable, adj.	aan ciyaari karin.
injure, n.f.	cay.
injurier, v.	caytan; af-xumayn; naanaysid xun.
injurieusement, adv.	cay ah.
injurieux,adj.	cayid.
injuste, adj.	aan xaq ahayn; xaqmaaha qayb ahaan·
injustement, adv.	aan sax ahayn; khalad ah.
injustice, n.f.	caddalad la'aan; caddaalad darro.
injustifiable, adj.	aan qiil loo hayn.
injustifié, adj.	aan loo baahnayn; sabab lahayn.
inlassable, adj.	aan dadlayn; madaale; daalin.
inlassablement,adv.	daal la'aan ah.
innavigable, adj.	aan lagu dhoofi karin marka badda laga hadlayo.
inné, adj.	ku dhalasho; wax qofku uu ku dhasho maskax badan iwm.
innervation, n.f.	sida acsaabto ama dareemado ugu qaybsan yihin oo qada.
innerver, v.	taabashada neerka ama dareemada.
innocemment, adv.	garasho la'aanimo.
innocence, n.f.	daacadnimada; aan lug ku lahayn.
innocent, adj.	daacad; nadiif ka ah.

innocenter, v. — dambilawe.

innocuité, n.f. — aan dhibaato keenayn.

innombrable, adj. — aan la tirin karin; tiradiisu xad dhaaf tahay; ka badan wax la tirin karo.

innommable, adj. — aan la magacaabi karin.

innovateur, adj. — qofka wax cusub keena; isbadal keena.

